**Dugsiyada Dadweynaha Cambridge**
**159 Thorndike Street, Cambridge, Massachusetts 02141**

# Dugsiyada Dadweynaha Cambridge

# Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda

## JADWALKA TUSMADA

Qeybta Nambarka Bogga

1.0 SIYAASADDA .... 1

2.0 TAGIDDA .... 2

3.0 SEARCH OF PERSON .... 8

4.0 QAANADAHA IYO MIISASKA IYO QALABKA ELATAROONIGGA ARDAYGA .... 12

5.0 XORIYADDA QOFKA .... 13

6.0 XORIYADDA HADALKA .... 44

7.0 XORIYADDA KULLANKA .... 45

8.0 ISTICMAALKA DHISMOOYINKA DUGSIGA .... 46

9.0 XEERKA LABISKA .... 46

10.0 XORIYADDA DIINTA .... 47

11.0 GUURKA ARDAYGA IYO XAAMILONIMADA .... 48

12.0 DAWLADDA ARDAYGA .... 48

13.0 SIYAASADDA DISHIBILIINKA IYO HABABKA .... 49

14.0 KA-JOOJINTA .... 51

15.0 KA-SAARIDDA DEGDEGGA .... 64

16.0 SHIRKA KA-JOOJINTA .... 65

17.0 RACFAANKA LAGA QAATO KA-JOOJINTA .... 69

18.0 WAXBARASHADA KHAASKA/HABABKA DISHIBILIINKA QORSHAHA 504 (504 PLAN DISCIPLINE PROCEDURES) .... 72

19.0 SIYAASADDA KA-SAARIDDA -- Hubka, Mukhadaraadka iyo Weerarka .... 77

20.0 AADAABTA DIBADDA DUGSIGA .... 91

21.0 ADEEGYADA WAXBARASHADA IYO HORUMARKA WAXBARASHADA XAALADDA KA-JOOJINTA .... 93

22.0 KA REEBIDDA .... 94

23.0 XAQA LOO LEEYAHAY DHAGEYSIGA SI WAX LOOGA QABTO KA QAADIDDA XUQUUQDA .... 95

24.0 BUUGAAGTA ARDAYGA .... 98

LIFAAQA DAMBE A .... 99

# XUQUUQDA IYO MAS'UULIYADDA

Xeerka Asluubta Ardayga
Dugsiyada Dadweynaha Cambridge

## 1.0 SIYAASADDA

1.1 Guddiga Dugsiga wuxuu soo saari doonaa lana daabici doonaa sharciyo qoran oo maamula dhaqanka ardayda iyada hoos yimaada.

1.2 Erayada soo socda, sida loo isticmaalay sharciyadaan iyo xeerkaan, waxay leeyahiin macnaha soo socda:

a. "Arday" waxaa loola jeedaa qof kasta oo gaaray da'da dugsiga kuna qoran dugsiga dadweynaha oo hoos yimaada xukunka Guddiga Dugsiga Cambridge.

b. "Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka" waxaa loola jeedaa waalidka ardayga, ilaaliyaha, ama bixiyaha daryeelka ee rasmi ahaan waalidka ardayga ama ilaaliayaha ku tilmaameen sidaas sida waafaqsan sharuudaha sharciga gobolka, ilaa laga gaaro waqti sida arday, jira 18 sanno ama ka weyn, codsado qoraal ahaan in qaar ama dhamaan xuquuqda iyo qodobada sharciyadaan iyo xeerkaan aysan gaari doonin waalidka, ilaaliyaha ama bixiyaha daryeelka noocaas.

1.3 Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu tago dugsiga dadweynaha Cambridge, taasoo hoos timaado sharciyada qoran iyo xeerarka Guddiga Dugsiga.

1.4 Ma jiro sarkaal ka tirsan dugsiga ama shaqaale ama Guddiga Dugsiga oo talaabo dishibiliin ka qaadi karo arday, marka laga reebo sida waafaqsan heerarka qoran iyo hababka ku jiro sharciyada iyo xeerarka Guddiga Dugsiga. Talaabo dishibiliin kasta oo laga qaado arday oo aan waafaqsaneyn sharciyada iyo xeerarka Guddiga Dugsiga wuxuu ahaan doonaa waxaan eber iyo wax aan waxba ka jirin.

1.5 Arday kasta wuxuu lacag la'aan ku heli karaa koobiyada sharciyada iyo xeerarka, waqtiga sharciyada noocaas la hirgeliyo iyo bilowga sannad dugsiyeed kasta oo ku xigta. Koobiyada waa in ay heli karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee dhamaan ardayda iyo xubnaha daneeya ee ka tirsan bulshada.

1.6 Ka hor intaa ugu dambayntii la qaadanin lana daabicin dhamaan sharciyada iyo xeerarka ama ka hor inta aan la baddalin, Guddiga Dugsiga wuxuu qaban doonaa dhageysiga dadweynaha. Ugu yaraan hal todobaad dhageysiga ka hor, Guddiga

Dugsiga wuxuu bixin doonaa koobiyo marka la soo codsado sharciyada la soo jeediyay ka hor inta aan la dhaqan gelinin lana soo daabicin dhamaan sharciyada iyo xeerarka ama ka hor inta aan wax laga baddalin. Ugu yaraan hal todobaad dhageysiga ka hor, Guddiga Dugsiga wuxuu bixin doonaa koobiyo marka la soo codsado sharciyada iyo ogeysiisyada ku saabsan waqtiga iyo meesha lagu qaban doono, lana siin doono ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka. Guddiga Dugsiga wuxuu kaloo ogeysiiska dhageysiga ku daabici doonaa wargeyska sida balaaran looga akhristo Magaalada. Guddiga Dugsiga wuxuu tixgelin doonaa, hase ahatee qasab kuma aha, faalada la soo gudbiyo dhageysiga ka hor inta aan la dhaqan gelinin sharciyada. Dhaqan gelinta ugu dambeeyo ee dhamaan sharciyada waxay ahaan doonta hadba sida inta badan ugu codeyso.

1.7 Ma jiraan sharciyo, xeerar ama baddalaad hirgeli doono ilaa Guddiga Dugsiga ka dhaqan geliyo, soo daabaco, laguna wareejiyo bulshada dugsiga..

1.8 Sharciyada iyo xeerarka ku qoran *Buuggaan* waxaa si gaar ah loogu dabaqi doonaa
asluubta dhamaan ardayda timaada dugsiyada dadweynaha ee hoos yimaada awoodda Guddiga Dugsiga.

1.9 Waa siyaasadda u dagsan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge in ay iskudaydo in ay suurtogeliso jawi ammaan ah ay ardayda wax ku baran karaan kana qeybgeli karaan dhamaan brograamyada la bixiyo ama ay kafaalo qaadaan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge. In la sugo ammaanka ardayda, shaqaalaha iyo dadka soo booqda inta ay ku sugan yahiin dugsiga iyo/ama ka qeybgalaan hawlaha uu dugsiga kafaalo qaaday waa mas'uuliyada saaran dhamaan shaqaalaha. Shaqaalaha Waaxda Dugsiga ee la kulma xaalad (xaaladaha) noocaas una arkaan in aysan ammaan ahayn, sabab kasta ha noqoto, waa in ay qaadaan dhamaan talaabadaha macquulka ah ee awoodooda hoos yimaada si meesha looga saaro suurtogalka waxyeelada la gaarsiiyo dadka kale kaddibna ay daruufaha u gudbiyaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. Muddo ka muddo, waxaa dhici karto in maamulaha ama qofka loo xilsaaray soo saaro "hababka maamulka" si loo hirgeliyo ujeedooyinka siyaasadaan.

## 2.0 TAGIDDA

2.1 Imaashada joogtada aan kala go'in waxay lagama maarmaan u tahay waxbarashada, horumarinta waxa ay qabtaan ardayda, adkeynta jawi ku dhisan xushmad iyo waxqabadka uu ku guuleysto ardayga. Ujeedada siyaasadda imaashada ardayga waxay tahay in la horumariyo in si joogto ah loo yimaado dugsiga iyo fasalka maalin kasta. Waxaa la filaa in dhamaan ardayda qaadan doonaan, ugu yaraan boqolkiiba sagaashan iyo shan (95%) imaashada dugsiga iyo fasal kasta, maalin dugsiyeed kasta. Ardayga gooya fasalada, in badan ka

maqnaada ama in badan ka soo daaha dugsiga, la'aanta sabab ku filan, wuxuu jebiyay siyaasadaan.

a. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka waa in ay wacaan dugsiga si ay u soo sheegaan maqnaashada ugu dambeyn subaxnimada maqnaashada.

b. Haddii aan la soo wicin, waxaa loo baahan yahay in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka laga keeno qoraal gaaban oo sharaxeyso maqnaashada. Hase ahatee, ma jiro arday loo diri doono guriga si uu sharaxaad qoran uga soo qaataan waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka inta uu socdo dugsiga.

c. Xaaladaha maqnaashada soo noqnoqoto ama aan nidaam lahayn taasoo ugu wacan cudur, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay codsan karaan in warqada xaqiijin laga soo qaado takhtarka si cududaar loogu sameeyo maqnaashada noocaas.

d. Haddii la filaayo in ardayga maqnaan doono muddo fidsan, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa in ay la xariiraan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga si ay u sameyaan qorshe lagu dhamaystiro sharuudaha waxbarashada.

e. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay la shaqeyn doonaan ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka si loo soo saaro qorshe lagu hagaajiyo imaashada marka ardayga gooyo, ka celceliyo in uu ka maqnaado ama ka soo daay dugsiga. Intaas kaddib, ardayga gooya fasalada, si ku noqnoqod u maqnaada ama soo daaha waxaa lagu wareejin doonaa Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada. Agaasimaha Ammaanka iyo Sugidda, kaddib marka uu la tashado Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ee ku habboon, wuxuu fiirin doonaa xaajada kaddibna wuxuu qaadi doonaa talaabada lagu saxo sida u dirista Maxkamadda Dagmada Middlesex haddii ardayga loo arko in uu u baahan yahay adeegyo dheeraad ah sida hoos timaado ammarka Maxkamadda.

Maqnaashada La Fasaxay waxaa ka mid ah:

a. Xanuunka qofka ama karantiilka;

b. Maqnaashada lala xariirin karo xanuunka soo gaaro qofka; calool xumada, dhimashada ku timaado qoyska ama cudur culus oo ku yimaada qoyska;

c. Xuska ama dhaqanka fasaxa diinta;

d. Ballamada caafimaadka aan la qaban karin saacadaha ka baxsan dugsiga ama booqashooyinka la-tallinta;

e. Arrimaha sharciga ee u baahan in qofka isa soo xaadiriyo;

f. Ka-joojinta ama ka saaridda gudaha ama dibadda dugsiga;

g. Safarada la xariira dugsiga, shirarka waaweyn ama shirarka yaryar.

h. Booqashooyinka kulliyadda (labo maalin sanooyinka hore dugsiga sare iyo saddax maalin sanooyinka dambe dugsiga sare);

i. Hal safar ama waayaha waxbarashada oo aan ka badneyn shan maalin sanooyinka uu ardayga ku jiro dugsiga sare; ama

j. Cimilo aad u darran oo halis gelisa caafimaadka ama ammaanka cunugga.

Ardayga waa la fasaxi doonaa marka ay jiraan asbaab aan caadi ahayn oo kale, lana haysto ogolaashada maamulka kana badneen kullamada todobada maalin ama toban iyo kullamada maalin barkeed muddo lex bil.

<u>Maqnaashada aan la fasaxin waxaa ka mid ah:</u>

a. Ka maqnaashada dugsiga ama fasalka qaar ama qolalka wax lagu barto;

b. Safarada uusan horey u ogolaanin agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga;

c. Raadinta shaqo iyadoo aan ogolaasho horay looga qaadanin agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga;

d. La joogo guriga si looga baaqdo imtixaanka maadada ama si leysugu diyaariyo imtixaan;

e. Ka tagidda dhismaha dugsiga maalinimada dugsiga iyadoo aan bixidda laga saxiixin xafiiska agaasimaha/qeybta sare dugsiga.

f. Hurdo badsiga ama ka daahidda dugsiga (Saddax daahid aan la fasaxin waxaa loo tirin doonaa sida hal maqnaasho aan la fasixin);

g. In la joogo agagaarka xerada dugsiga ama meel u dhaw, lana tagin fasalada uu ardayga ku qoran yahay; ama

h. Maqnaasho kasta oo kale aan la fasixin ama maqnaasho la fasixi karo aysan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ku soo sheegin telefoon

ama soo dirin xasuusin qoran ama aan warqad laga keenin bixiyaha caafimaadka ardayga marka ardayga ku soo noqdo dugsiga.

Inta uu joogo dugsiga, ardayga waxaa kormeeri doono macalimiinta iyo madaxda dugsiga iyo waa in ruqsad laga helo agaasimaha/madaxa xafiiska qeybta sare dugsiga si uu u horay u baxo. Arday kasta aan warqadda ka bixidda dugsiga ka saxiixin xafiiska agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ka hor inta uusan bixin lama siin doono cududaar mana loo tixgelin doono dhamaan hawlaha fasalada ama hawlaha uu gafay. Macalin kasta wuxuu haayn doonaa diiwaanka maqnaashada ama daahidda ardayda. Ardayga soo gaala fasalka waqtiga loo qabtay bilowga kullanka kaddib waxaa loo qori doonaa in uu soo daahay. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha daryeelka waxaa la ogeysiin doonaa marka ardayga uu qaato maqnaasho aan la fasaxin, ama daahid aan la fasixin ama maqnaasho aan la fasixin oo ka koobtan labo (2) ama ka badan xissadaha dugsiga. Dugsiga waa in uu hubiyo in uu waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga maqnaashada ardayga muddo saddax (3) maalin gudahooda laga bilaabo maqnaashada haddii dugsiga uusan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga ka ogaanin maqnaashada. Marka ardayga soo daaho shan (5) jeer, maqnaado shan (5) maalin ama toban (10) maalin barkeed lexdii (6) bilood ee la soo dhaafay, lana keenin cududaar sharciga waafaqsan oo la xariira daahidda ama maqnaashada la soo sheegay, baaqdo shan (5) maalin dugsiyeed ama ka badan oo aan lahayn cududaar muddo hal sanno dugsiyeed ama labo (2) xisso ama ka badan aan la fasixin muddo hal sanno dugsiyeed, waajib ayay ka saaran tahay agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga uu cunugga nooca ku qoran yahay in uu diiwaanka imaashada noocaas u gudbiyo Maamulaha Dugsiyada. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu ku dadaali doonaa sida macquulka ah in uu la kulmo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga qaatay shan (5) maqnaasho aan la fasaxin si talaabo looga qaado imaashada ardayga. Talaabadaha laga qaado waxaa si wadajir ah uga shaqeyn doono agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ku biirinta shaqaalaha ay quseeyso ee ka tirsan dugsiga iyo saraakiisha ay quseeyso kana socda ammaanka dadweynaha, caafimaadka iyo adeegga aadanaha, guryaha iyo wakaaladaha samafalka, hadba sida ku habboon.

Arday kasta oo laga fasaxay dugsiga ama fasalada waxaa loo ogol yahay in uu gadaal ka sameeyo hawsha fasalka, shaqada guriga ee la gaffay, imtixanaadka gaagaaban, imtixanaadka caadiga, warqadaha, mashaariicda iyo hawlo kale. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu hubin doonaa in uu jiro qorshaha adeegga waxbarashada ku baahsan dugsiga oo idil lana siiyo dhamaan ardayda laga joojiyay ama laga saaray dugsiga in ka badan shan (5) maalin isku xiga, ha ku jiraan dugsiga ama ha ku sugnadaan dibadda. Intaas kadditb, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu hubin doonaa in arday kasta oo laga joojiyo dugsiga ama laga saaro dugsiga in ka badan shan (5) maalin isku xiga, ama ha ku jiro ama dibadda ha ka ahaado dugsiga, wuxuu fursad u haystaa in uu horumar ka gaaro waxbarashada muddada laga reebay, in uu gadaal ka sameeyo hawlaha iyo in uu shaqeeysto buundooyinka uu gafay, kana mid ah, balse ku ekeen, shaqada guriga, imtixanaadka gaagaaban, imtixanaadka, warqadaha, mashaariicda iyo hawlaha kale.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga oo sharci ahaan maqan in ka badan shan (5) maalin dugsiyeed waa in ay ogeysiiyaan dugsiga si loo siiyo hawsha guriga. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka arday kasta oo la siiyo maqnaasho dheer (2 todobaad ama ka dheer) taasoo ugu wacan cudur ama dhaawac waa in uu soo ogeysiiyo dugsiga in uu sameeyo qorshaha loo baaban yahay si loo siiyo tilmaamaha guriga.

Maqnaashada ama daahidda aan si ku filan loo sharixin waxay muttesteen in laga qaado talaabo dishibiliin. Saraakiisha dugsiga waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay qaadaan dhamaan falalka dishibiliinka kale ka hor inta aysan ku dhaqaaqin ka-joojin, iyaga oo ku dadaala in ardayga laga kaalmeeyo dhibaatada goynta, daadhidda iyo jaridda fasalka, sida ardayga oo la tixraaciyo Maxkamadda Dhallinta sida cunug caadeystay goynta oo u baahan adeegyo iyo/ama tixraacinta ardayga Maxkamadda Dhallinta sida cunug caadeystay qoynta oo u baahan adeegyo iyo/ama tixraacinta qiimeynta sida cunug u baahan waxbarashada khaaska. Ma jirto tixgelin la siin doono ardayda aan samaynin shaqada dugsiga taasoo ugu wacan goysmo, daahid ama fasalka oo la gooyo, haddii ardayga uusan gadaal ka samaynin shaqada maqan sida macalinka ardayga uu faro iyo macalimiinta waa in ay ardayda siiyaan waqti macquul ah ay ku samayaan marka ay ku soo noqdaan fasalka si ay u samayaan shaqada guriga ee ka maqan, imtixanaadka gaaban, imtixanaadka, warqadaha, mashaariicda iyo shaqooyinka kale. Lama ogola in ardayga loo geysto xumaan, fikrado qalad ama takoor maxaa yeelay wuxuu ka baaqday in uu xusso fasaxa diinta. Ilaa inta suurtogalka ah, macalimiinta waa in ay jadwal u sameyaan imtixanaadka muhiimka ah, hawlaha la xariira, warqadaha waaweyn/warbixinada maalmaha lagu jiro fasax diinta.

Cambridge Rindge iyo Latin School iyo Brograamka Laanta Dugsiga Sare (High School Extendion Program) waxay afar (4) oo laga maqnaado fasalka u qaadan doonaan sida Jebinta Imaashada Dugsiga (Attendance Violation) (AV). Maqnaashada la fasaxo, sida cudurka qofka ku dhaco ee la xaqiijiyo, looma xisaabin doono ardayga mana dhallin doonto in la soo saaro Jebinta Imaashada (Attendance Violation) (AV) haddii maqnaashada ay soo gasho qeybaha soo socdo: (a) maqnaasho loo xisaabo sida xanuunka soo gaaro qofka; calool xumo, dhimasho ku timaado qoyska; (b) maqnaashada fasaxa diinta; (c) ballamada caafimaadka ama booqashooyinka la-tallinta aan la samayn karin saacadaha dibadda ka ah dugsiga; (d) arrimaha sharciga ee u baahan in qofka yimaado; (e) ka-joojinta gudaha iyo dibadda dugsiga; (f) safarada la xariira dugsiga, isu imaashada ama shirarka; (g) booqashooyinka kulliyadda (labo maalin sannadka hore iyo saddax maalin sannadka dambe); (h) hal safar ama waayaha waxbarashada aan ka badneyn shan maalin sanooyinka ardayga ku sugan yahay dugsiga sare.

Hase ahatee, afar (4)maqnaasho aan la fasaxin waxay dhallin doonaan Jebinta Sharciyada Imaashada (Attendance Violation) Kiiskaan, Madaxa Ardayda wuxuu termka soo saari doonaa darajada AV Intaas kaddib, saddax (3) daahid aan la fasixin waxaa loo xisaabin doonaa sida hal (1) maqnaasho aan la fasixin. Maqnaashada aan la fasixin waxaa ka mid ah: (a) goynta dugsiga ama fasalada qaar; (b) safarada uusan agaasimaha horay u ogolaanin; (c) raadinta shaqada iyadoo aan ogolaasho laga haysanin agaasimaha; (d)

joogitaanka guriga si aan oo qaadanin imtixaanka maaddo gaar ah ama si loo barto imtixaan; (e) ka tagidda dhismaha dugsiga maalinimada iyadoo aan la saxiixin xafiiska madaxa kulliyadda (goynta fasalka); (f) hurdo xad dhaaf ah ama in laga soo daaho dugsiga; (g) la joogo xerada dugsiga ama agagaarka, balse aan la tagin fasalada uu ku qoran yahay ardayga (goynta fasalka); iyo (h) maqnaasho kale aan la fasixin ama maqnaasho la fasixi karo aysan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ku sheegin telefoonka ama qoraal gaaban oo laga keeno waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ardayga marka ardayga uu ku soo noqdo dugsiga. Intaas kaddib, ardayga toban iyo labo (12) daahid aan la fasaxin ka qaata hal fasal, waxaa koorsadaas laga siin doonaa AV.

Sida waafaqsan siyaasadda u dagsan dugsiga dagmada, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka mar kasta uu ardayga maqan yahay iyo/ama uu soo daaho iyo wuxuu ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kaddib marka ardayga soo daaho afar maqnaasho isku xiga. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka waxay raadsan karaan ka-dhaafidda caafimaadka xagga xaaladaha soo noqnoqda, cudurka soo noqnoqda ama xanuun kasta oo ka batto afar (4) maalin. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka waxay xaq u yeelan doonaan in ay racfaan ka qaataan AV kasta una jeedin doonaan Guddiga Fiirinta Racfaanada (Appeals Review Committee) ee Cambridge Rindge iyo Latin School ama Brograamka Fidinta Dugsiga Sare (High School Extension Program) muddo tobab (10) maalin gudahooda laga bilaabo marka la soo saaro AV iyo, haddii la soo diido racfaanka, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay, muddo toban (10) maalin gudahooda laga bilaabo diidmada, racfaan qoran u gudbin karaan Maamulaha Dugsiyada. Go'aanka Maamulaha Dugsiyadaha (Superintendent of Schools) wuxuu ahaan doonaa kama dambeys.

Kooxaha waxbarashada Bulshada waxay la shaqeyn doonaan ardayda la kullanta sharuudaha AV iyo fulliya mid ka mid ah saddaxda (3) qodob soo socda:

a. Dhamaystirka heshiiska/tallada Dib u Gadashada (Buy Back) (ee la siiyo dhamaan ardayda)
b. In ardayga in lagu qoro Barashada Ardaynimada (Student Workshops) (waxaa loogu talogalay ardayda u baahan in la siiyo tababar dheeraad ah oo ku saabsan maamulka waqtiga lana siiyo taageerada ardaynimada.
c. In Qorshaha Taageerada Ku Kooban Qofka (Individual Support Plan) lala sameeyo kooxda LC (waxaa loo adeegsadaa ardayda ku sugan xaalado adag oo u baahan taageero gaar ah)

Haddii ardayga uusan ku guuleysanin in uu dhamaystiro qorshaha taageerada, waxaa dhici karto in laga dhimo 10-dhibic.

**OGEYSIIS KU SAABSAN ARDAYDA KA TAGTA DUGSIGA**

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay xil iska saareen in ardayda dhamaystiraan waxbarashadooda hoose iyo sare. Haddii ay dhacdo in arday jira toban iyo lex sanno ama ka weyb iskudayo in uu ka tago dugsiga, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay raaci doontaa sharuudaha M.G.L.c. 76, §18 kaddibna wuxuu raacaa hababka ku qoran hoos:

1. Agaasimaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu warqad siiyaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga taasoo ogeysiiso waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ardayga (a) muujiyay rabitaan in uu ka tago dugsiga, soona noqonin, ama (b) dugsiga ka qaatay toban iyo shan (15) isku xiga iy muujiyay taariikhda ugu dambaysay uu ardayga yimid dugsiga.

   Si dugsiga uu go'aan uga gaaro haddii ardayga uu rabo in uu ka noqdo dugsiga isaga/iyada aan ku talo jirin in uu ku soo noqdo, dugsiga wuxuu shir la geli doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, ujeedadana tahay in uu kala hadlo asbaabta ka dambeyso sababta ardayga uu u rabo in uu ka tago dugsiga iyo in uu sahmiyo waxbarashoa kale iyo meeleyn kale ka hor inta ardayga uusan si rasmi ah uga tagin dugsiga. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay codsan in taariikhda iyo waqtiga shirkaan la baddalo iyo in fiddinta waqtiga aysan ka badanin toban iyo afar (14) maalin laga bilaabo soo saaridda warqadda agaasimaha ama qofka loo xilsaaray.

2. Kaddib marka shirka lala galo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo

ardayga, agaasimaha ama qofka loo xilsaaray ay warqada u diraan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga taasoo soo koobta waxa laga hadlay iyo go'aan kasta oo la gaaray shirka, kana mid ah balse aan ku koobneyn, haddii ardayga uu ku soo noqday dugsiga, raaco ku meeleynta waxbarashada kale, raaco adeegyada taageerada kale ama si joogto ah uga tago dugsiga.

3. Sida waafaqsan sharciyada M.G.L.c. 76, §18, go'aan kasta oo laga gaaro in ardayga uu si joogto ah uga tagi doono dugsiga waa in aan loo qaadanin in si joogto ah laga reebay ardayga haddii ardayga doono in uu ku soo noqdo in uu raaco waxbarashada.

Si aad u heshid tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan hawshaan, tixraac Qeybta 22 ee *Buuggaan*.

## 3.0 RAADINTA QOFKA

Sida hoos timaado Baddalaadda Afaraad (Fourth Amendment) ee lagu sameyay Dastuurka U.S., ardayda waxaa laga badbaadiyay baaris aan macquul ahayn iyo kala wareegidda ay fulliyaan saraakiisha iyo macalimiinta dugsiga.
Inkastoo ardayda fishaan asturnaan sida sharciga qabo, baarista waxaa loo haystaa in ay tahay xaq haddii uu jiro tuhun macquul ah marka la bilaabo in baarista soo saari doonto caddeyn in la jebiyay sharci u dagsan dugsiga ama sharciyada, iyo in baaxadda baarista ahayd macquul.

3.1 **Heerka Darajada K-8:** Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha, ama qofka uu soo magacaabo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsig waa in ay fasaxaan fattashaadda iyo weydiinta su'aalaha ay fulliyaan sekuritiga dugsiga ama shaqaalaha kale aan ku saleysneyn dugsiga.

Heerka darajada 9-12: Agaasimaha, Kaaliyaha Agaasimaha, Madaxa ama qofka uu Agaasimaha u xilsaaray waa in ogolaasho siiyo sekuritiga dugsiga si ay u baaraan ardayga.

3.2 **Dhamaan heerarka darajada (K-12):** Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha, Madaxa ama Agaasimaha/Qofka loo Xilsaaray Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, marka ay macquul tahay sida suurtogalka ah, waxay codsan karaan qofka shaqaalaha sekuritiga loo baahan yahay in loo diro dugsiga iyo/ama bulshada waxbarashada yar.

3.3 **Heerka darajada K-8:** Agaasimaha/madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha ama Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga u xilsaaray, waa in ay joogaan inta ay socoto baaritaanka iyo marka sekuritiga dugsiga, ama shaqaalaha aan ka tirsaneyn ay su'aalo weydiinayaan ardayda.

**Heerka darajada 9-12:** Agaasimaha, Kaaliyaha Agaasimaha, Madaxa ama qofka Agaasimaha u xilsaaray, waa in uu joogo fattashaadda ay fulliyaan sekuritiga ama shaqalaha kale aan ka tirsanayn dugsiga.

3.4 **Heerka darajada K-8:** qofka jinsi ahaan la midka ah ardayga, mar kasta ay suurtogal tahay, waa in uu joogo marka ardayga la weydiinaayo su'aalo. Dhamaan baarista lagu sameeyo ardayda waa in uu fulliyo qof, jinsi ahaan la jinsi ah ardayga, oo ka tirsan sekuritiga dugsiga.

**Heerka darajada 9-12**: baarista ardayga waa in uu fulliyo qof ka tirsan sekuritiga dugsiga uu jinsigiisu la mid yahay jinsiga ardayga.

3.5 **Heerka darajada K-8:** Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Agaasimaha, ama Agaasimaha/Qofka uu Madaxa Qeybta Sare Dugsiga u xilsaaray waa in uu ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka hor inta aan la baarin ardayga taasoo ay fulliyaan

sekuritiga dugsiga.  Haddii ogeysiinta hore aan lagu guuleysanin, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa la ogeysiin doonaa sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah, kaddibna waxaa loo diri doonaa warqad isla maalintaas.

**Heerka darajada 9-12:** Agaasimaha, Kaaliyaha Agaasimaha, Madaxa kulliyadda, ama qofka Agaasimaha u xilsaaray waa in ay isla markiiba ogeysiiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kaddib marka sekuritiga dugsiga fulliyaan fattashaadda.  Kaddib, warqad ayaa la diri doonaa isla maalinta.

"Xariirka degdegga" waa qofka ay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka u xil saareen in uu ka jawaabo xaaladaha ku lugta leh arrimaha dishibiliinka, sida weydiinta su'aalaha ama baarista .  Sannad kasta waxbaradhada, waalidiinta/ ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa laga codsan doonaa in ay qof u magacaabaan xariirinta degdegga xagga arrimaha dishibiliinka, kana mid ah weydiinta su'aalaha ama fattashaadda, iyo in xariirkaas u shaqeeyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka xagga arrimaha dishibiliinka, sida weydiinta su'aalaha ama baarista, ilaa inta waalidka, ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ogol yahiin.

3.6 **Heerka darajada K-8:** Agaasimaha/madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha, ama qofka uu Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga u xilsaaray, waa in uu ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama xariirka degdegga ka hor inta sekuritiga dugsiga aysan ardayga weydiinin su'aalo.  Haddii ogeysiiska hore aan lagu guuleysanin, waxaa kaddib la ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah, kaddibna waxaa la diri doonaa warqad isla maalintaas.

**Heerka darajada 9-12:** looma baahna ogeysiiska waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka marka sekuritiga dugsiga uu su'aalo weydiinaayo ardayga.

3,7 **Heerka darajada K-12:** Dhamaan ardayda waxaa lagu ogeysiin doonaa *Xuquuqdaan iyo Buugga Mas'uuliyadda (Responsibilities Handbook)* (halkaan kaddib lagu tilmaamo Buugga) iyo/ama dugsiga hoose ama buugga ardayga CRLS xagga xuquuqda iyo mas'uuliyadda soo socoto ay iyaga leeyahiin xagga weydiinta su'aalaha iyo raadinta:

a. Arday kasta waxaa waqti kasta la weydiin karaa su'aalo sida hoos timaado ammarka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsgia, Madaxa Manhajka iyo Brograamka, Madaxa Ardayda, ama qofka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Principal/Head of Upper School, Dean of

Curriculum and Program, Dean of Students, or Principal/Head of Upper School's designee) u xilsaaray xagga waxbarashada, dishibiliinka ama arrimaha kale ee la xariira.

b. Waxaa dhici karto in ardayda la baaro sida hoos timaado awoodda Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Madaxa Manhajka iyo Brograamka, qofka loo xilsaaray Madaxa Ardayda, ama Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga marka ardayga ogolaado baarista, ama marka uu jiro tuhun macquul ah in baarista u hoggaamin karto caddeynta jebinta sharciga dugsiga ama sharci kasta.

c. Marka xubnaha Waaxda Amaanka iyo Sekuritiga (Safety and Security Department) ku lug leeyahiin weydiinta su'aalaha ama raadinta arday kasta oo ku jira darajooyinka K-8, ardayga, marka laga reebo degdegyada, waxaa la joogi doono qof qaangaar ah oo ka socdo dugsiga, kuna jinsi ah, iyo wakiil ka socdo maamulka dugsiga, inta uu socdo baaritaanka noocaas ama weydiinta su'aalaha. Ardayda Cambridge Rindge and Latin School, marka laga degdegyada, waxaa goobta xaadir ku ahaan doono qof qaangaar ah oo ka socdo dugsiga, kuna jinsi ah, iyo wakiil ka socdo maamulka dugsiga, inta uu socdo baaritaanka uu fulliyo xubin ka tirsan Waaxda Amaanka iyo Nabadgelyada (Safety and Security Department).

3.8 Sida loo isticmaalay Qeybta 3.0 ee Buugga iyo dugsiyada hoose iyo buugaagta ardayga CRLS, erayada "su'aalidda" iyo "baarista" waxaa loo sifeeyaa sida soo socoto:

"Su'aal weydiinta" waa ardayga oo si rasmi ah loo weydiiyo aqoonta, dishibiliinka ama xaajo kasta oo la xariirto dugsiga.

"Baarista" waa baarista jirka ee lagu sameeyo hantida ama qof ahaanta ardayga, sida balse ku ekeen, boorsa yarada ardayga, boorsada caadiga ama jeebabka. Baaritaanka waxaa ka mid noqon karaa in gacanta si tartiib loo saaro ardayga

3.9 Waa in la ogeysiiyo Maamulaha iyo Sarkaalka Hawlgalaha Sare (Chief Operating Officer) sida uu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka iyo macquulka ah kaddib marka sekuritiga dugsiga ay baaraan ardayga. Intaas kaddib, Guddiga Dugsiga waxay bil kasta heli doonaan warbin kooban oo la xariirto baaritaanada ay sameyaan sekuritiga, taasoo dheeraad ku ah warbixinada iminka la siiyo.

3.10 "Baaritaanka madax banaan" wuxuu tixraacaa baaritaanka cabsi ulus oo loo geysto ammaanka ardayda, kulliyadda iyo/ama shaqaalaha ee socda mana aha waxa ka dhasha dhacdo gooni ah. Baaritaanka waa in sidoo kale u ku lug yeesho hal dugsi ama ka badan ama dugsiyada CRLS ee Dagmada. Dhamaan "baaritaanada madax banaan" ee ku lugta leh in kab badan hal dugsi oo ku yaal Dagmada waa in uu soo ogolaado Maamulaha ama Sarkaalka Hawlgalka Sare. Marka baaritaanka madax banaan ku lug leeyahay in ka badan hal dugsi yar oo ku

yaal dugsiga sare, waa in uu Agaasimaha soo ogolaado in la fulliyo baaritaan madax banaan.

## 4.0 QAANADAHA IYO MIISASKA IYO QALABKA ELATAROONIGGA ARDAYGA

4.1 Qaanadaha Ardayga yo Miisaska
Bacdamaa qaanadaha iyo miisaska yahiin hantida waaxda dugsiga, waaxda dugsiga waxay reebatay xaqa ay u leedahay in ay baarto qaanadaha iyo miisaska iyo in ay muddo ka muddo baarto qaanadaha iyo miisaska iyo in ay fulliso baaritaan lagu dhawaaqo iyo mid aan lagu dhawaaqin oo lagu sameeyo kmiiska iyo qaanadda.

4.2 Waxaa kaloo dhici karta in la baaro armaajada iyo/ama miiska ardayga haddii uu jiro tuhun macquul ah oo lagu aaminsan yahay in armaajada iyo/ama miiska laga helo wax la soo qariyay ama caddeyn oo loo arko in ay armaajada iyo/ama miiska ku xerto caddeyn in la jebiyay sharciga u dagsan dugsiga ama sharciga, ama haddii ay jirto halis la arki karo waqtiga xaadirka oo degdeg ah kuna dhici karto dhismaha dugsiga ama dadka meesha jooga. Qofka (dadka) fulliya baarista waxay ahaan doonaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga u xilsaareen waa in uu ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah kaddib marka fattashaadda noocaas la fulliyo, kaddibna warqad loo diro isla maalintaas.

4.3 Dhamaan waxyaabaha lagu tuhmo in ay yahiin kontrabaan waxaa laga saari doonaa qaanadda ama miiska ardayga haddii ka-saaridda aysan waqtigaas halis cad ku ahayn dadka kale. Haddii tani dhacdo, waa la xeri doonaa qaanadda kaddibna Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxaa la ogeysiin doonaa isla markiiba, waa la sugi doonaa miiska, kaddibna isla markiiba waxaa la ogeysiin doonaa Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. Hababka ku qoran Qorshaha Ammaanka Dhismaha iyo Qorshaha Sekuritiga waxaa loo abaabuli doonaa shayga (waxyaabaha) la xado (s). Waxyaabaha ama shayga qofka leeyahay ee lagu dhaafo qaanadaha iyo/ama miisaska waa la tuuri doonaa marka la gaaro dhamaadka sannad dugsiyeedka. Dugsiyada Dadweynaha Cambridge ma loo qabsan karo mana ka aha mas'uul khasaarada, xattooyada ama burburka loo geysto hantida ku xeran qaanadda ardayga ama miiska, mana loo qabsan karo mana ka aha mas'uul khasaarada, xattooyada ama burburka soo gaara hantida lagu dhaafo qaanadda maalinta ugu dambeyso dugsiga.

4.4 Fureyaasha lagu furo qufulo badan iyo koobiyada dhamaan qufulada qaanadaha ardayda waxaa lagu hayn doonaa xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. Waa in la isticmaalo qufulada ay soo saarto waaxda dugsiga keliya. Any other locks will be removed at the student's expense.

4.5 Lama ogola in ardayda ay qaanadahooda ama miisaska gashtaan hub, mukhaadaraadka sharci darrada ah ama qalabka la xariira ee lagu sameeyo mukhaadaraadka, cabbitaanka qamrada, alaabta la soo xadday iyo shay kasta oo sharci darro ah ama waxyaabaha aysan ardayda isticmaalin inta ay joogaan dugsiga.

4.6 Qalabka Elataroonigga

Ardayda waxay rabaan in la siiyo axsaanka ay ku qaataan qalabka elataroonigga inta ay ku sugan yahiin hantida dugsiga ama munaasabad la xariirto dugsiga. Axsaankaas waxaa la socdo mas'uuliyadda saaran ardayda si loo hubiyo in qalabka elataroonigga loo adeegsado sida habboon. Ardayda waa in ay fahmaan in mid kasta oo iyaga ka mid ah mas'uul ka yahay isticmaal habboon iyo sekuritiga qalabka elataroonigga ay dugsiga la yimaadaan ama la yimaadaan munaasabad dugsiga la xariirta ama dugsiga kafaalo qaaday. Intaas kaddib, ardayda waa in aysan cid kale qeybsanin ama amaahinin qalabka elataroonigga Haddii arday uu sidaas sameeyo, ardayga waxaa loo qabsan karaa in uu mas'uul ka yahay sida qaldan ee loo isticmaaly qalabkaas elataroonigga isla sida in qalabkaas uu ku jiro milkiyadiisa.

4.7 Looma ogola ardayda in ay qalabka elataroonigga u isticmaalaan hab faragelisa habka waxbarashada ama abuurta carqalad. Tusaale ahaan, haddii qalabka elataroonigga shidan yahay, sameeyo qeylo, gariiro ama si kale isu soo jiido indhaha inta lagu dhex jiro xerada dugsiga, ama ku sugan dugsi uu dugsiga kafaalo qaaday ama munaasab la xariirto dhacdada, qalabka wuxuu abuuraa carqaladeyn. Sida qaladan ee loo adeegsado qalabka elataroonigga waxay dhallin kartaa in lagala wareego qalabka elataroonigga iyo waxay dhallin kartaa in lagu qaado dishibiliin.

4.8 Dugsiyada Dadweynaha Cambridge looma qabsan karo mana ka aha mas'uul khasaarada, xattooyada ama burburka ku dhaca qalabka elataroonigga uu ardayga keeno xerada dugsiga, ama uu keeno munaasabad uu dugsiga kafaalo qaado ama la xariirto-dugsiga. Ardayda waa in ay fahmaan halista marka ay dugsiga keenaan qalabka elataroonigga ama ay keenaan munaasabad uu dugsiga kafaalo qaado ama la xariirto dugsiga.

## 5.0 XORIYADDA QOFKA

5.1 Students shall have the right to be secure in their person while in school buildings, on school grounds or in transit to and from school, and at all times while at any authorized school function.

5.2 Looma ogola in ardayga, macalinka ama sarkaal ka tirsan dugsiga isticmaalaan xoogga jirka hab kasta si ay u sababaan ama iskudayaan in ay sababaan dhaawac ku talogal oo loo geysto arday, macalin ama sarkaal ka tirsan dugsiga. Hase ahatee, macalinka ama sarkaalka dugsiga wuxuu isticmaali karaa xoogga jirka haddii xoogga jirka uu yahay macquul iyo lagama maarmaan:

a. Si loo helo milkiyadda hubka ama shay kale oo halis ah; ama

b. Xagga difaaca qofka naftiisa; ama

c. Si loo badbaadiyo qof kale ama hanti kale.

5.3 Ma jiro macalin ama sarkaal ka tirsan dugsiga oo loo ogolaan doono in uu isticmaalo xoogga jirka, hab kasta, si dishibiliin loo saaro arday ama si loo ciqaabo. Waa mamnuuc in qofka loo geysto nooc kasta oo ka mid ah ciqaabta jirka.

5.4 Ma jiro arday, macalin, sarkaal ka shaqeeyo dugsiga oo loo ogol yahay in uu cabsi geliyo, handado ama kadeedo, hab kasta, arday, macalin ama sarkaal ka tirsan dugsiga, lama ogola in qofka noocaas uu hoos u dhigo ama ku xadgudbo arday meel fagaaro ah si uu u liido arday.

5.5 <u>Xeerarka Aadaabta (Codes of Conduct), Siyaasadda Takoor La'aanta iyo Mamnuuca Kadeedka Jinsiga ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment)</u>

Dhamaan ardayda aaminsan in loo geystay kadeedka jinsiga iyo/ama qaab kale oo takoor ah ama kadeed ku saleysan meelaha la badbaadiyo (isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada )waxay xaq u leeyahiin in ay ashtako u gudbiyaan Maamulaha Brograamka Horumarinta Kala Duwanaanta (Program Manager for Diversity Development) ama Agaasimaha Fulinta Ilaha Aadanaha (Executive Director of Human Resources). Ardayda waxay bilaabi karaan gudbinta ashtakada iyaga oo la xariira agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, madaxa kulliyadda, Maamulaha Brograamka Horumarinta Kala Duwanaanta (Program Manager for Diversity Development) ama Ku Xigeenka Maamulaha Tababarka iyo Barashada taasoo waafaqsan qodobada Siyaasadda Takoor La'aanta (Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) iyo hababka. Shaqaalaha dugsiga ee arka dhacdooyin la xariira kadeed ama takoor waxay dhacdooyinka noocaas isla markiiba u soo sheegi doonaan Agaasimaha/Madaaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha ama Madax Ardayda.

Sidoo kale, ardayda waxay ashtako u gudbin karaan Guddiga Ka Soo Horjeedo Takoorka ee Massachusetts (Massachussetts Commission Against Discrimination) ee laga helo:

| Xafiiska Boston: | Xafiiska Springfield: |
|---|---|

One Ashburton Place
Suite 601
Boston, MA 02108
Telefoon: 617-994-6000
TTY: 617-994-6196
Faks: 617-994-6024
Email: assistanttochairman@state.ma.us

436 Dwight Street
Suite 220
Springfield, MA 01103
Telefoonka: 413-739-2145
Faks: 413-784-1056
Email: assistanttochairman@state.ma.us

Xafiiska Worcester:

484 Main Street
Qolka 320
Worcester, MA 01608
Telefoon: 508-453-9630
Faks: 508-755-3861
Email: assistanttochairman@state.ma.us

Xafiiska Cusub Bedford:

800 Purchase Street
Qolka 501
New Bedford, MA 02740
Telefoonka: 508-990-2390
Faks: 508-990-4260
Email: assistanttochairman@state.ma.us

ama Adeegyada Hubinta Tayada Brograamka (Program Quality Assurance Services), Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee Massachusetts (Massachusetts Department of Elementary and Secondary Education) ee laga helo:

75 Pleasant Street, Malden, MA 02148-4906
Telefoon: 781-338-3700
Faks: 781-338-3710
TTY: Laliska N.E.T. 1-800-439-2370
Email: compliance@doe.mass.edu

ama

Waaxda Waxbarashada Mareykanka (United States Department of Education), Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights) ee laga helo:

5 Post Office Square, 8th Floor
Boston, MA 02109
Telefoon: 617-289-0111
Faks: 617-289-0150
TDD: 1-800-877-8339
Email: OCR.Boston@ed.gov

Mararka qaar, dabeecadda laga soo ashtakooday waxay ahaan kartaa kadeedka jinsiga sida hoos timaado Cutubka IX iyo hawsha dambiga. Haddii aad aaminsan tahay in dhaqanka uu yahay dambi, waxaad xaq u leedahay in aad waqti kasta soo gudbisid ashtako la xariirta dambiga inta ay socoto baaritaanka dugsiga ku wado ashtakadaada.

5.6 Sifeynta Takoorka iyo Kadeedka

"Takoorka" iyo "Kadeedka" waxaa lagu sifeyaa sida dhaqanka aan la soo dhaweynin, ha ahaado afka ama jirka, kuna saleysan iisirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada. Takoorka iyo/ama Kadeedk a waxaa ka mid ah, balse kuma eka:

a. Muujinta ama wareejinta qoraalo ama sawiro oo hoos u dhiga qofka ama koox da sida kor lagu sharaxay.

b. Ku xadgudubka afka ama aflagaadada ku saabsan, loo jeediyo, ama la sameeyo mar uu joogo qofka ama kooxda lagu sifeyay kor.

c. Talaabo kasta ama hadal oo in ku filan adag, ama (i) farageliya ama xaddida awoodda qofka ama kooxda u leedahay (sida ku sharaxan kor) in ay ka qeybgasho ama ka fa'iideysato shaqada ama brograamka ama hawsha Dugsiyada Dadweynaha Cambridge; ama (ii) abuurta jawi ku dhisan handadaad, cabsi ama ku xadgudub lana xariira waxbarashada ama shaqada.

Qaabab badan oo kadeed iyo takoor ayaa loo aqoonsaday in ay jebiyaan sharciyada xuquuqda madaniga [sida Qeybta 504 Sharciga Hagaajinta (Rehabilitation Act) 1973], Cutubka VI iyo Cutubka IX] ay ku shaqeyaan maxkamadaha federaalka, maxkamadaha gobolada, Guddiga Fursadda Sinaanta Shaqada Mareykanka (U.S. Equal Employment Opportunity Commission), Waaxda Waxbarashada Mareykanka (U.S. Department of Education), Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights), iyo Guddiga Ka Soo Horjeedo Takoorka Massachusetts (Massachusetts Commission Against Discrimination).

5.7 Sifeynta Kadeedka Jinsiga

"Kadeedka jinsiga" waxaa lagu sifeyaa baaqyada jinsiga aan la soo dhaweynin, codsiyada axsaanka jinsiga, iyo dhaqanka afka ama jirka ee la xariira jinsiga marka:

a. Ogolaashada ama diidmada soo jeedinta noocaas, codsiyada, ama dhaqanka loo sameeyo toos ama si dadban lagu daro ama lagu xero shardiga shaqada, heerka aqoonta , fursadaha la xariira dugsiga ama aasaas looga dhigo go'aanada shaqada.

b. Soo jeedinta, codsiyada, ama dhaqan waxay ujeedadooda tahay ama waxaa ka dhasha in si aan macquul ahayn loo farageliyo aqoonta qofka ama shaqado uu qabto qofka

taasi oo abuurta
jawi ku dhisan handadaad, colaad, yasniin, ama jinsi ahaan shaqo ku dhisan gaf.

5.8 Sida hoos timaado sifeynta kore, codsiyada tooska iyo kuwa dadban uu soo jeediyo macalin, kormeere ama qof kale oo shaqo ka haaya ama awood ka haysta dugsiga, si uu u helo axsaanka jinsiga kuna badasho shaqo dhab ah ama ballan qaad ama manaafacaadka dugsiga sida fiirin u roon, kordhinta mushaarka, horumarin, kordhinta manaafacaadka, shaqo sii socota, darajooyin fiican, talooyin fiican ama waxyaabo kale oo u roon qofka, waxay u dhigmaan kadeedka jinsiga. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxaa toos looga mamnuucay in ay arday la yeeshaan xariirka jinsiga. Lama ogola dhaqanka noocaas, si kasta ha ahadeen daruufaha, iyadoo aan la fiirinin da'da ardayga bacdamaa xariirka noocaas loo arko in ay yahiin dagaalka jinsiga, haddii dabeecadda qofka weyn tahay mid aan la rabin ama mid la rabo.

Kadeedka jinsiga kana mid ah falalka dagaalka jinsiga, sida balse ku ekeen falalka jinsiga jirka ee loo geysto qofka kana soo horjeedo rabitaanka qofka ama marka qofka uusan awood u lahayn in uu bixiyo ogolaasho taasoo ugu wacan isticmaalka dhibanaha ka sameeyo mukhadaraadka ama qamrada, ama uusan awoodin in uu bixiyo ogolaasho taasoo ugu wacan itaal darrida garashada ama itaal darri kale. Waxaa jir dhowr falal kala duwan oo soo gala qeybta dagaalka jinsiga, kana mid ah kufsiga, weerarka jinsiga, garaaca jinsiga iyo jujuubka jinsiga. Dhamaan falalka noocaas ee la xariira dagaalka jinsiga waa qaabab la xariira kadeedka jinsiga ee lagu soo qaado Cutubka IX.

Inkastoo aysan ahayn suurtogal in la qoro dhamaan liiska dhamaan daruufaha loo qaadan karo in ay yahiin kadeedka jinsiga, kuwa soo socdo waa tusalooyin ku saabsan dhaqanka aan habboon iyo bacdamaa, ay yahiin kuwo aan la soo dhaweynin, waxaa loo qaadan karaa in ay yahiin kadeedka jinsiga. Kiis kasta, go'aanka noocaas wuxuu ku xernaan doonaa daruufaha guud, sida dhaqanka u darran yahay iyo sida loogu adkeystay. Kadeedka jinsiga waxaa ka mid ah, balse kuma koobna:

- Baaqyada jinsiga aan la rabin haddii ay ku lug leeyahiin ama aysan ku lug lahayn taabashada jirka

- Indha saarka aan la soo dhaweynin, foorida, ku rugashada jirka, dhaqdhaqaaqa jinsiga, faalo ku dhisan baaq ama aflagaado

- Aflagaadada jinsiga, kaftanka, tixraaca dhaqanka jinsiga oo qoran ama afka laga sheego, faalada ku saabsan jirka qofka, faalada ku saabsan jinsiga qofka, waxyaabaha ka maqan, ama kartida qofka

- Wadahadalka ku saabsan hawlaha jinsiga ee u gaarka ah qofka ama su'aalaha loo jeediyo jinsiga dadka kale waayaha

● Muujinta waxyaabaha la xariira jinsiga, sawirada, kartoonka

Sifeeynta takoorka, kadeedka iyo kadeedka jinsiga waa balaaran tahay. Tusaalooyinka kore waxaa dheeraad ku ah, dhaqanka kale aan la soo dhaweynin, haddii lagu talogalay ama haddii kale, taasoo saamayn ku leh in ay jawiga ama shaqada ku abuurto cadaawad, gaf, cabsi gelin, ama yasniin u geysata labka, dhedigga ama ardayda aan midna ahayn ama shaqaalaha oo la kulma takoor, kadeed iyo/ama kadeedka jinsiga. "Shaqo" ama "dugsi" waxaa ka mid ah munaasabadaha bulshada dugsiga-kafaalo qaaday, safarada gaaban, munaasabadaha isboortiga, safarada la xariira shaqada ama munaasabadaha la midka ah ee la xariira dugsiga ama shaqada, kana mid ah iyadoo aan la xadidin, hawlaha ka baxsan manhajka iyo atleetikada iyo brograamyada, safarka lagu tago loogana soo noqdo dugsiga ama safarka dibadda uu dugsiga kafaalo qaaday.

5.9 Lama ogola in laga daba qaato ama aar gudasho loo geysto shaqaalaha ama arday daacad ka ah hawsha, ashtakada, ha ahaato hab rasmi ah ama ahayn, ama si un uga qeybgala hababka ashtakada. Lama ogola in aar gudasho ama in laga daba qaato arday kaasoo, si daacad ah, ka marqaati furay, kaalmeeyay ama si kasta uga qeybqaatay baaritaan, dacwad, ama dhageysi ku saabsan ashtako ama si kale uga qeybqaatay ashtakada dacwadahaan. Lama ogola in macalinka, sarkaalka dugsiga ama shaqaale ka tirsan dugsiga in uu sinna isugudayo in uu cabsi geliyo ama ka niyad jebiyo arday in uu iskudayo in uu racfaan u gudbiyo saraakiisha sare ee Waaxda Dugsiga lana xariira ashtakooyin iyo diidmo. Iskudayidda noocaas waxaa isla markiiba loo sheegi doonaa Guddiga Dugsiga yo Maamulaha.

5.10 Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

5.11 Celcelinta Jirka

Waa siyaasadda u dagsan Guddiga Dugsiga Cambridge in la horumariyo goob ammaan ah oo lagu shaqeeyo iyo jawi waxbarasho la siiyo shaqaalaha iyo ardayda, iyo si loo hubsado in arday kasta oo ku jiro Dugsiyada Dadweynaha Cambridge uu ka madax banaan yahay isticmaalka celcelinta jirka sida qilaafsan sharciyada Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare ee Massachusetts, iyo in celcelinta jirka loo adeegsado oo keliya si taxadir leh sida qorshaha ugu dambeeyo xaaladaha degdegga, kaddib marka lagu fashalo talooyinka kale ee sharciga waafaqsan balse aan gudaha u gelin ama loo arko in aysan ku habbooneyn. Shaqaalaha dugsiga waxay adeegsan doonaan celcelinta jirka marka ugu dambeyso marka loo baahdo si loo badbaadiyo arday iyo/ama xubin ka tirsan bulshada dugsiga in aan loo geysanin waxyeelo, culus, kuna soo socda. Marka loo baahan in la adeegsado celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waxay raadi doonaan in ay ka hortagaan ama yareyaan waxyeelada soo gaara ardayga, taasoo ka dhalata isticmaalka celcelinta jirka. Siyaasaddaan waa in aan loo qaadanin in ay soo koobto badbaadinta la siiyo ardayda laga maal geliyo dadweynaha sida hoos

timaado sharciyada federaalka iyo gobolka, kana mid ah sharciyada laga helo xuquuqda ay leeyahiin ardayda xaqa u yeeshay in ay qaataan adeegyada waxbarashada khaaska. Intaas kaddib, siyaasaddaan looma qaadan doono in ay ka hor istaagto macalin, shaqaale ama wakiil ka tirsan brograamka waxbarashada dadweynaha in uu isticmaalio xoog loo baahan yahay oo macquul ah si loo badbaadiyo ardayda, dadka kale ama iyaga naftooda in aan jirkooda loo geysanin weerar ama waxyeelo culus oo degdeg ah.

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge wuxuu qoray habab iyo tilmaamo la xariira siyaasaddaan ee lagu soo dhajiyay bogga internetka dugsiga lagana heli karo xafiiska agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, oo tilmaama: (i) jawaabo ku habboon dabeecadda ardayga ee laga yaabo in isla markiiba la farageliyo; iyo (ii) habab kale oo loo baahan yahay in loo adeegsado marka hore marka la raadinaayo in laga hortago dagaalka ardayga, dabeecadda dhaawaca uu qofka isu geysto iyo/ama xassilinta halista dabeecadda ka dhax dillaacda kooxaha ardayda ama lala galo arday keligii, sida hababka kale ee la xariira xaaladaha degdegga si leysaga ilaaliyo in la adeegsado celcelinta jirka.

Hababka Celcelinta Jirka

*Sifeynta*

"Ogolaasho" waxaa loola jeedaa heshiiska ay gaaraan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee sida buuxdo loo ogeysiiyay dhamaan macluumaadka munaasabka u ah hawsha loo raadiyo heshiiska, luqadooda dhalladka ama siyaabo kale oo lagu xariiro, ay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka fahamsan yahiin iyo ku heshiyeen qoraal ahaan ilaa fullinta hawsha, iyo fahamsan in heshiiska uu yahay wax uu qofka iskiisa u galay lagana yaabo in laga noqdo. Heshiiska wuxuu sharaxaa hawsha iyo wuxuu soo taxaa diiwaanada (haddii ay jiraan) ee la kashifi doono iyo cidda loo diri doono.

"Celcelinta" waxaa loola jeedaa soo koobida dhaqaaqa jirka ardayga lana isticmaal xoog ka soo horjeedo diidmada ardayga.

“Celcelinta Jirka” waxaa loola jeedaa xariirka toos loola sameeyo jirka oo ka hortaga ama si muuqata u xayirta xorriyada ardayga u leeyahay dhaqaaqa. Erayga celcelinta jirka kuma jiraan celcelinta ku-haynta dhulka, celcelinta makaanikada, ama celcelinta daweynta. Intaas kaddib, celcelinta kama mid ah jirka oo istaabta, xoog la'aan, si loo ilaaliyo ammaanka ardayga ama loo yareeyo dabeecadda qofka naftiisa u geysto, hoggaaminta jirka ama u baaqidda marka la tababaraayo xirfad, dib u siinta digniin, dajinta, ama wehlinta jirka.

“Wehlinta qofka" waxaa loola jeedaa taabashada ku meel gaarka ama qabashada, iyadoo aan xoog, gacanta, kala goyska gacanta, garabka, ama dusha loo

adeegsanin in lagu hoggaamiyo cunugga qalqalay in uu socod ku tago meel ammaan ah.

"Celcelinta makaanikada" waxaa loola jeedaa isticmaalka qalab lagu xayiro dhaqaaqa arday ama dhaqaaqa ama sida caadiga uu u shaqeeyo qeyb ka mid ah jirka ardayga. Qalab loogu talogalay badbaadinta ama dajinta kaasoo uu dalbay takhtarka looma qaadan doono in uu yahay celcelinta makaanika. **Isticmaalka cecelinta makaanikada waa mamnuuc haddii aan ogolaasho laga soo qaadanin takhtar, kaddibna qoraal ahaan aysan soo ogolaanin waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga.**

“Seclusion” waxaa loola jeedaa marka ardayga la geliyo qol keligiis ama meel marka ardayga jir ahaan laga ilaaliyo, ama sida macquulka ah aaminsan yahay in ardayga laga ilaalin doono, in uu ka tago. Soocidda kama mid ah waqtiga-dibadda sida u sifeysan6.03 CMR 46.02 **Waa mamnuuc isticmaalka celcelinta xakameynta.**

"Soocidda" (Time-out) waxaa loola jeedaa xiilad lagu taageero dabeecadda marka ardayga si ku meel gaar ah laga sooco waxbarashada fasalka, ha ahaato wax uu doorto ama marka ay ku amraan shaqaalaha, ujeedadana tahay in la dajiyo. Waqtiga dibadda, ardayga waa in aan meel lagu xabbisin haddii uusan rabin iyo waa in si joogto ah kor ka fiiriyo xubin ka tirsan shaqaalaha. Shaqaalaha waxay la joogi doonaan ardayga ama waxay mar kasta dhakhso diyaar u ahaan doonaan ardayga. Waqtiga-dibadda waxay dhamaan doontaa isla marka ardayga uu daggo ama marka ay dhamaato soddon daqiiqo (30), hadba dhacdada soo hor marta. Rabitaanka waa in waqtiga-dibadda lagu fulliyo gudaha fasalka. Boos kasta oo loo adeegsado waqtiga-xayiraadda (time-out) oo dibadda ka ah fasalka, waa in ogolaasho laga soo qaato Xafiiska Adeegyada Ardayga ka hor inta aan la adeegsanin.

"Daweyn" waxaa loola jeedaa siinta daawo, ujeedadana waxay tahay in si ku meel gaar ah loo kantaroolo dabeecadda. **Waa la mamnuucay isticmaalka daawada haddii uusan si toos ah u soo ogolaanin takhtar, lana helin ogolaashao qoran oo laga soo qaado waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga**

"Ku celinta dhulka" ("prone restrain") waxaa loola jeedaa marka ardayga loo jeediyo dhulka kaddibna culeys la saaro jirka cunugga si ardayga loogu haayo dhulka. **Waxaa toos loo mamnuucay isticmaalka celcelinta marka jirka cunugga lagu haayo dhulka loona jeediyo dhulka.**

"Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga" waxaa loola jeedaa hoggaamiyaha tababarka brograamka waxbarashada dadweynaha ama cidda loo xil saaray.

<u>Isticmaalka Celcelinta</u>

Haddii lagu guul dareysto dhamaan talooyinka kale aan qodqodin qofka sida sharciga ogol yahay ama loo arko in aysan ku habbooneyn ka hortagga dagaalka ardayga, dabeecadda qofka naftiisa gaarsiiyo waxyeelo iyo/ama xassilinta dabeecadda halista sida suurtogalka ah ee ka dhex dhacda kooxaha ardayda ama lala yeesho arday, waxaa dhici karto in la adeegsado celcelinta jirka sida tallada ugu dambeyso. Marka lagu sheego erayo kale, celcelinta jirka waxaa la adeegsan karaa oo keliya sida talada ugu dambeyso marka lagu sugan yahay xaalad degdeg ah marka dabeecadda ardayga cabsi degdeg ah oo u culus u geysato waxyeelada jirka ardayga ama dadka kale, kaddibna ardayga uusan ka jawaabin erayada afka looga sheego ama faragelinta sharciga iyo faragelinta dabeecadda aan gudaha u gelin, ama faragelinta nooca loo arko in aysan ku habbooneyn daruufaha. Celcelin kasta oo loo geysto jirka waa in lagu soo koobo isticmaalka xoog macquul ah sida lagama maarmaanka ah, waqtiga ugu yar ee loo baahan yahay, si ardayga ama xuhin kale oo ka tirsan bulshada dugsiga looga badbaadiyo weerar ama waxyeelo culus, degdeg ah, oo soo gaara jirka. Celcelinta jirka waxaa adeegsan karaa oo keliya shaqaalaha dugsiga ee sida wanaagsan loo tababaray xagga isticmaalka celcelinta jirka.

Waxyaabaha Kale ee ka Reeban Isticmaalka Celcelinta

Toos ayaa loo mamnuucay dhaqanka soo socdo: (i) isticmaalka celcelinta aan waafaqsaneyn qodobada ku qoran kor; (ii) isticmaalka celcelinta si loo fulliyo dishibiliin ama ciqaab, si looga jawaabo burburinta loo geysto hantida ama carqaladeynta nidaamka dugsiga, ama si looga jawaabo diidmada ardaga in uu u hoggaansamo sharciga dugsiga ama ammarka shaqaalaha, ama cabsi gelinta laga soo jeediyo afka marka falalka noocaas aysan ahayn kuwa cabsi geliya in lala kulmi doono waxyeelo degdeg loo geysto jirka, culus; (iii) isticmaalka celcelinta ku haynta dhulka, (iv) isticmaalka celcelinta makaanikada; (v) isticmaalka daawo uusan soo ogolaanin takhtar iyo ogolaashada, qoran, ee laga helo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka; (vi) isticmaalka celcelinta marka ardayda muujiyaan in aysan neefsan karin ama u muuqdaan in ay ku sugan yahiin dhibaato darran (sida balse kuma eka: dhibaato xagga neefsiga, oohin aan kala go' lahayn ama qufac).

Qasab ma aha in celcelinta lagu darro sida jawaab qorsheysan oo laga bixiyo brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP). Hase ahatee, ardayda la timaado ku celcelinta dabeecadaha dhaawacyada soo gaara naftooda, agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiyada waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka u soo jeedin doonaan heshis qoran oo gaar ah in si degdeg ah loo isticmaalo celcelinta muddo kooban oo la cayimay. Marka lala kulmo kiisaska noocaas, qorshaha waa in lagu darro warbixin tafatiran oo loo diro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kuna saabsan soo-noqnoqoshada iyo isticmaalka iyo muudada ay qaadato celcelinta, iyo muddada la yareyn doono isticmaalka cecelinta jirka lana soo afjari doono. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu ogolaasho qoran ka

qaato waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka xagga qorsha ka hor inta aan la fullinin.

Sida Wanaagsan ee loo Fulliyo Celcelinta Jirka

**Shaqaalaha dugsiga ee la soo tababaray keliya ayaa fullin doono celcelinta jirka.** Shaqaalaha dugsiga ee la tababaray waa kuwa soo qaatay tababar qoto dheer, ama soo qaatay tababarka aasaasiga ee loo baahan yahay sida lagu tafatiray hoos. Mar kasta ay suurtogal tahay, maamulka celcelinta jirka waxaa la joogi doono ugu yaraan hal qof oo qaangaar ah kaasoo aan ka qeybgelin celcelinta jirka. Marka la fullinaayo celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waa in ay adeegsadaan oo keliya qiyaasta xoogga loo baahan yahay si loo badbaadiyo ardayga iyo dadka kale in aysan soo gaarin dhaawac. Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga ee maamula celcelinta jirka waxay adeegsan doonaan habka ugu ammaanka badan ee la heli karo kuna habboon xaaladda sida waafaqsan sharuudaha ammaanka ee ku tafatiran hoos, iyo waxay joojin doonaan celcelinta sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Waa in la soo gabagabeeyo dhamaan celcelinta jirka isla marka ardayga uusan halis degdeg ah ku ahayn ardayga ama dadka kale, ama ardayga sheego in uusan neefsan karin, ama haddii la arko in ardayga uu ku jiro dhibaato darran, sida dhibaatada neefsiga ama ooyo ama qufaco muddo dheer. Hase ahatee, waa in la xasuusto in sharuudahaan tababarka aysan macalinka, shaqaalaha ama wakiilka dugsiga ka reebin in uu isticmaalo xoog macquul ah oo loo baahan yahay si ardayda, dadka kale ama naftooda looga badbaadiyo weerar ama in waxyeelo culus oo darran loo geysto jirkooda.

Sharuudaha Ammaanka

**Lama ogola in celcelinta loo fulliyo hab ardayga ka hor istaagto in uu neefsado ama hadlo.** Inta la fullinaayo celcelinta, shaqaalaha dugsiga waxay si joogto ah ula socon doonaan xaaladda jirka ardayga, sida midabka maqaarka, heerkulka iyo neefsiga. Celcelin kasta ama dhamaan celcelinta waa la sii deyn doonaa islamarkiiba marka shaqaalaha dugsiga ee fulliya celcelinta ogaadaan in ardayga uusan ku jirin halista in uu sabab u yahay waxyeelada jirka ee soo gaara ardayga ama dadka kale. Intaas kaddib, celcelinta waxaa loo fullin doonaa si looga hortago ama loo yareeyo waxyeelada soo gaara jirka. **Haddii, waqti kasta inta ay socoto celcelinta jirka, ardayga muujiyo dhibaato xagga neefsiga ama dhibaato ka soo gaarto jirka, kana mid ah balse ku ekeen, dhibaato xagga neefsiga ama qufac ama oohin muddo dheer socda, ardayga waa in isla markiiba laga sii daayo celcelinta, kaddibna shaqaalaha dugsiga waa in ay qaadaan talaabooyin ay ku raadiyaan kaalmo caafimaad.** Shaqaalaha dugsiga waxay fiirin doonaan iyo waxay tixgelin doonaan waxyaabaha la ogsoon yahay ee soo kooba caafimaadka ama madaxa iyo/ama qorshooyinka faragelinta dabeecadda ee ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka ee lagu sameeyo ardayga iyo taariikhda xanuunka la tuhunsan yahay ama la ogsoon yahay. Waqti kasta inta ay socoto celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waxay raadin doonaan in ay la xariiraan kuwa ku takhasusay dabeecadda ee Xafiiska Adeegyada Dugsiga

(Office of Student Services), ama Kooxda Faragelinta Shiddada (Crisis Intervention Team), ama waxay qaadi karaan talaabooyin ay ku raadiyaan kaalmada caafimaadka haddii ay muuqato in ardayga uu muujiyo dhibaatada jirka.

Hababka La Sii Socoshada iyo Sharuudaha Warbixinta

Waqti ku habboon kaddib marka ardayga laga sii daayo celcelinta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu fullin doonaa hababka dabagalka ku qoran hoos:

a. fiirinta celcelinta iyo ardayga si wax looga qabto dabeecadda dhallisay celcelinta;

b. in dhacdada lala fiiriyo shaqaalaha dugsiga ee siiyay celcelinta si looga hadlo haddii la raacay hababka celcelinta ku habboon; iyo

c. dabagalka waa in uu dhaco iyadoo ay joogaan ardayda arkay dhacdada, kana mid ah warbixinta la siiyo macalinka, warbixinta la siiyo la-talliyaha ama isticmaalka dhaqanka soo celinta caddaaladda ; iyo

d. ogeysiis qoran oo ku saabsan celcelinta waa in loo diro Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) iyo kormeeraha ugu dhaw agaasimaha, madaxa qeybta sare dugsiga.

Kuwa soo socda waa sharuudaha warbixinta uu dugsiga raaco:

a. Isticmaal kasta oo laga sameeyo celcelinta jirka waa in lagu soo daro magaca ardayga la celceiyay, waa in la soo qoro, loona jeediyo Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) iyo mormeeraha ugu dhaw ee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

b. The school staff member who administers a physical restraint that results in an injury to a student shall verbally inform the principal/head of upper school or designee of the restraint as soon as possible and no later than the close of the school day in which the restraint was administered. Waxaa la dhamaystiri doonaa warbixin qoran kaddibna la siin doono agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga in ay fiiriyaan isticmaalka celcelinta ugu dambayn maalinta xigta ee la shaqeeyo kaddib marka la saaro celcelinta. Haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga uu fulliyay celcelinta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay diyaarin doonaan warbixinta kaddibna waxay u gudbin doonaan Maamulaha si ay u fiiriso kooxda uu Maamulaha u xilsaaray.

c. Agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga waxay hayn doonaan diiwaanka dhamaan dhacdooyinka celcelinta jirka.

d. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu waxay afka ka ogeysiin doonaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga sida ugu dhakhsiyaha badan balse ka dambaynin labaatan iyo afar (24) saac kaddib marka la adeegsado celcelinta, iyo warbixin qoran oo boostada lagu soo diro ugu dambayn saddax (3) maalin dugsiyeed kaddib marka la isticmaalo celcelinta jirka. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka siin doonaan fursad ay faalo ka bixiyaan, qoraal ahaan, xagga isticmaalka celcelinta iyo macluumaadka ku jira warbixinta qoran.

e. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu Xafiiska Maamulaha siin doonaa koobiga warbixinta laga qoray celcelinta jirka marka celcelinta noocaas dhallisay dhaawac ku yimaada arday iyo koobi laga samayay diiwaanka socda oo ku saabsan dhamaan dhacdooyinka la soo sheegay celcelinta jirka muddada 30ka maalin ee ka horeyay celcelinta jirka la soo sheegay. **Qoraalkaan waa in la siiyo Xafiiska Maamulaha ugu dambayn hal (1) maalin la shaqeeyo kaddib marka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga helaan warbixinta qoran.** Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu isu keeni doonaa kooxda taageerada ardayga si ay u sameyaan qiimeynta baahida ardayga u gaarka ah haddii ardayga la celceliyay labo (2) jeer muddo todobo (7) maalin ama saddax (3) jeer muddo saddon (30) maalin gudahooda. Xubnaha kooxda heerka darajada iyo shaqaalaha ka shaqeeyo brograamka noocaas sida agaasimaha/madaxa qebta sare dugsiga waxay gaari karaan go'aan, waxay ka qeybgeli doonaan qiimeynta. Xubin kasta oo ka tirsan kooxda taageerada ardayga wuxuu akhrin doonaa warbixin qoran oo ku saabsan celcelinta iyo faalo kasta ay ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka bixiyaan warbixinta noocaas iyo isticmaalka celcelinta. Fiirinta iyo ka wadahadalka warbixinta noocaas ee kooxda taageerada ardayga kaddib, qiimeynta waxaa ku jira falanqeyn ku saabsan daruuaha u horseeday celcelin kasta, kana mid ah qodobada sida waqtiga maalinimada, maalinta todobaadka, dhacdooyinka ka horeyay, iyo dadka ku lugta yeeshay. Qiimeynta waxaa lagu soo gabogabeyn doonaa qorshe wax looga qabto qodobada laga yaabo in ay ku biiriyeen ka sii daridda dabeecadda, tixgelinta talooyinka kale ee loo adeegsan karo celcelinta, sida fasamooyinka xassilinta iyo faragelinta suurtogalka ah, iyo xiiladaha iyo go'aanada kale, hadba sida ku habboon, ujeedadana tahay in la yareeyo ama meesha laga saaro in aan mustaqbalka la isticmaalin celcelinta. Haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ay toos uga qeybgaleen celcelinta, qofka aqoonta leh uu u xilsaaray Maamulaha ayaa hoggaamin doono wada hadalka kooxda taageerada ardayga. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay hubin doonaan in kooxda taageerada ardayga haayso diiwaanka fiirinta arday kasta loona diyaariyo in ay fiiriso Waaxda Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare ee Massachusetts marka ay soo codsato.

f. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu fullin doonaa in uu bil kasta fiiriyo xogta ku saabsan celcelinta ka jirta dugsiga oo idil. Fiirintaan waxay tixgelin doontaa sassaanka isticmaalka celcelinta marka leys barbardhigo waqtiga maalinta todobaadka, ama dadka ku lugta leh; tirada iyo muddada ay socoto celcelinta jirka ee dugsiga oo idilk iyo qof ahaanta ardayga; muddada ay socoto celcelinta; iyo tirada iyo nooca dhaawacyada, haddii ay jiraan, ee ka dhasha isticmaalka celcelinta. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu go'aan ka gaari doonaa haddii loo baahan yahay ama haddii ay habboon tahay in wax laga baddalo ka-hortagga celcelinta dugsiga iyo dhaqanka maamulka iyo hababka, la fulliyo tababarka shaqaalaha oo dheeraad ah kuna saabsan yareynta celcelinta/xiiladaha istraatijiyada, sida tababrka ku saabsan faragelinta dabeecadda wanaagsan iyo taageerada, ama in uu qaado talaabo kale hadba sida loogu baahdo ama sida ay ugu habboon tahay si loo yareeyo ama loo joojyo celcelinta.

Sharuudaha Tababarka Dagmada

A. Ku Socoto Dhamaan Shaqaalaha Brograamka

Bisha kowaad sannad dugsiyeed kasta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu dhamaan shaqaalaha brograamka siin doonaa tababar ku saabsan ka hortagga celcelinta iyo taageerada dabeecadda, sharuudaha marka la adeegsado celcelinta iyo siyaasaddaan. Intaas kaddib, xagga dhamaan shaqaalaha dugsiga ee cusub lana shaqaaleyay kaddib uu bilowday sannad dugsiyeedka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay bisha kowaad shaqadooda siin doonaan shaqaalaha cusub tababar ku saabsan siyaasaddaan. Tababarka wuxuu ka kooban yahay waxa soo socda: (a) siyaasaddaan iyo hababka la xariira iyo tilmaamaha uu dhaqan geliyay Maamulaha; (b) faragelinta laga yaabo in ay ka reebaan baahida loo qabo celcelinta, sida xassilinta dabeecadaha qalifsanwax yaabo kale oo ka duwan celcelinta xagga daruufaha degdegga, sida isticmaalka ka-saaridda (time-out) oo lagu taageero dabeecadda strategy distinct from seclusion; (c) when behavior presents as emergency that requires physical restraint, the types of permitted physical restraints and related safety considerations, including information regarding the increased risk of injury to a student when any restraint is used, in particular a restraint of extended duration; (d) administering physical restraint in accordance with known medical or psychological limitations and/or behavioral intervention plans applicable to an individual student, including known or suspected trauma history; and (e) the role of the student, staff and family in preventing use of restraint; and (f) identification of program staff who have received in-depth training pursuant to 603 C.M.R. 46.03(3) in the use of physical restraint. *Fiiri* 603 C.M.R. 46.03(2).

B. Shaqaalaha Loo Fasaxay in ay Ahaadaan Ilaha ku Baahsan Dugsiga xagga Celcelinta Jirka

Bilowga sannad dugsiyeed kasta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga dugsi kasta wuxuu aqoonsan doonaa shaqaalaha brograamka ee loo ogolaaday in ay u

adeegaan sida ilaha ku baahsan dugsiga si ay kaalmo uga geystaan hubinta maamulka ku habboon celcelinta jirka. Waxa ku jira tababarka qotada dheer waxay ku saleysnaan doonaan kartida iyo ugu yaraan muddo toban iyo lex (16) saac. Dadka noocaas waxay ka qeybqaadan doonaan ugu yaraan hal koorso oo xasuusin ah sanooyinka xiga dugsiga taasoo aan ka yareen sideed (8) saacadood. Tababarka waxaa ka mid ah, balse kuma eka: (a) habab ku habboon ka hortagga isticmaalka celecelinta jirka, sida xassilinta dabeecadda qalifsan, xariirinta iyo isticmaalka siyaabo habab kale oo lagu fulliyo celcelinta; (b) sharaxaadda iyo aqoonsiga dabeecadaha halista xagga ardayda taasoo u horseedi karta isticmaalka celcelinta jirka iyo hababka lagu qiimeeyo halista waxyeelada ka dhasha xaaladaha qaar si loo ogaado haddii loo baahan yahay isticmaalka celcelinta; (c) tijaabinta waayaha siinta iyo qaadashada celcelinta jirka, tilmaanta ku saabsan saamaynta waxyeealada (waxyeelooyinka) loo geysto qofka la celceliyo, sida tilmaanta ku saabsan kormeerka calaamadaha dhibaatada ka muuqda jirka iyo helitaanka kaalmadaha caafimaadka; (d) tilmaanta ku saabsan warqadaha iyo sharuudaha warbixinta iyo baaritaanka dhaawacyada iyo ashtakooyinka; (e) tilmaanta ku saabsan saamaynta celcelinta jirka ku leedahay ardayga iyo qoyska, aqoonsiga in falka celcelinta laga dhaxlo saamayn, sida, balse kuma eka waxyeelada cilmu nafsiga, sida jirka u shaqeeyo iyo waxyeelada ka dhasha arrimaha bulshada-caatifadda; iyo (f) muujinta ka-qeybgaleyaasha in ay aqoon u leeyahiin siinta celcelinta jirka *Fiiri* 603 C.M.R. 46.03(3) iyo 46.03(4).

<u>Hababka Ashtakada</u>

A. Go'aanka aan Rasmiga Ahayn ee laga Gaaro Isticmaalka Celcelinta Jirka
Ka hor inta aan la bilaabin habka ashtakada rasmiga ah, ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga wax ka qaba isticmaalka celcelinta jirka, wuxuu raadsan karaan in uu xalliyo arrimahaan ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka marka uu arrinta ku soo qaado agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga. Ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa in ay arrimahooda ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka u diraan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga muddo toban (10) maalin gudahooda laga bilaabo marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka helaan warbixin qoran oo ka socoto dugsiga kor lagu sheegay. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu iskudayi doonaa, ilaa inta awoodooda tahay, in ay la shaqeyaan qofka si dhakhso iyo si xaq ah, loo xalliyo ashtakada. Haddii ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka aysan ku qanacsaneyn go'aanka, ama haddii ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga aysan dooranin go'aan aan rasmi ahayn, markaas ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay ku dhaqaaqi karaan habka ashtakada rasmiga ee hoos lagu tafatiray.

B. Go'aanka Rasmiga ee laga gaaro Arrinta Ku saabsan Celcelinta Jirka

Ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga, ee wax ka qaba celcelinta sida gaarka ah loo adeegsado, waxay raadsan karaan in wax laga qabto walwalkaan ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka iyaga oo ashtako qoran u soo gudbiya Xafiiska Maamulaha (Office of Superintendent). Ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga waa in ay warqadaan u gudbiyaan Xafiiska Maamulaha muddo labaatan (20) maalin gudahooda laga bilaabo marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga ay warbixin qoran ka helaan dugsiga sida lagu tafatiray kore. Ashtakada qoran waxaa ka mid ah (a) magaca ardayga; (b) magaca dugsiga meesha ay ka dhacday celcelinta jirka ee la soo sheegay; (c) magaca dadka ku lugta leh celcelinta jirka la soo sheegay; (d) aasaaska ashtakada ama arrinta; iyo (e) talaabada lagu saxo ee la soo raadsaday.

Xafiiska Maamulaha (Office of the Superintendent), iyadoo adeegsaneyso kuwa ay u xilsaartay, waxay baaritaan isla markiiba baaritaan ku samayn doontaa ashtakada kaddib marka ay hesho ashtakada. Inta uu socdo baaritaanka, Xafiiska Maamulaha iyo/ama cidda loo xil saaray waxay la xariiri doonaa dadka lagu tilmaamay in ay hayaan macluumaad muhiim oo la xariira ashtakada. Waqti go'an looma dajin karo fullinta baaritaanka maxaa yeelay daruufaha jira waa kala duwan yahiin. Xafiiska Maamulaha iyo/ama cidda loo xilsaaray waxay hubsan doonaan in ashtakada looga shaqeeyo sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Kaddib marka la dhamaystiro baarista rasmiga, Xafiiska Maamulaha wuxuu la xariiri doonaa qofka soo gudbiyay ashtakada arrinta ku saabsan natiijada ka soo baxda baaritaankeeda iyo go'aanka ay gaartay hadddi loo baahan yahay dhaqan celin.

Sidoo Kale Hababka Ashtakada la Heli Karo

Waa in la xasuusto in qodobada ku jiro qeybtaan aysan ardayga ka saarin in uu adeegsado habka ashtakada ee ku qoran qeybta "Siyaasadda Aan Takoorka Lahayn iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga" (“Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment” si loo raadiyo xalka ashtakooyinka takoorka ama kadeedka ee ku saleysan sifo uu sharciga badbaadiyo sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada. Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada ku jira qeybtaan aysan ka reebin ardayga in uu isticmaalo habka ashtakada ku qoran Qeybta 23.0 *Buuggaan* in uu raadsado in xal laga gaaro ashtakooyinka la xariira marka ardayga laga xayuubiyo xuquuqda ku qoran *Buuggaan*.

5.12 Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay xil iska saareen in la abuuro jawi ammaan ah oo ku dhisan daryeel, xushmad iyo waxbarasho la siiyo dhamaan ardayda, waxay si adag u hirgelisaa mamnuuca ka soo horjeedo gardareysiga, laguna soo koobin, gardareysiga internetka ay dadka qaar u geystaan qaar ka mid ah ardaydeeda, iyo waxay si adag u hirgelisaa mamnuuca ka soo horjeedo aar gudashada loo geysto qof kasta oo soo sheego gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama arka ama haaya macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan gardareysiga.  Qorshooyinka ku shaqeeyo bogga, ay wadajir uga shaqeyeen maamulka dugsiga iyo shaqaalaha, ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada waxay ku dadaali doonaan in:  (1) uu ku kaalmeeyo ardayda, dhamaan da' kasta iyo awood kasta, in ay helaan ammaan, u dhaqmaan si xikmad ku jirto, iyo in ay isku kalsoonadaan; iyo (2) in dadka waaweyn lagu kaalmeeyo in ay si wanaagsna uga jawaabaan warbixinta ardayda iyo fikradahooda.

Gardareysiga waxaa lagu sifeyaa isticmaalka lagu celceliyo uu geysto hal arday ama ka badan, ama xubin kar tirsan shaqaalaha dugsiga sida, balse kuma eka, tababare, maamule, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, ilaaliyaha, wadaha baska, tababaraha atleetikada, la-talliyaha hawsha ka baxsan manhajka ama farsamo yaqaanka soo jeedinta qoran, laga sheego afka ama elataroonig ah ama fal laga sameeyo jirka ama dhaqaaq ama isu keenidooda, loona jeediyo dhibane: (i) taasoo waxyeelo u geysata jirka ama caatifadda dhibanaha ama burbur u geysata hantida dhibanaha; (iii) dhibanaha gaarsiisa cabsi in loo geysto waxyeelo naftooda ama burburinta hantidooda; (iii) abuurto jawo ku dhisan cadaawad loo geysto dhibanaha; (iv) u gafta xuquuqda dhibanaha jooga dugsiga; ama (v) maadiyan iyo dhab ahaan carqaladeyso hawsha waxbarashada ama nidaamka hawsha ka socoto dugsiga.  Sida waafaqsan sharciga gobolka, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay aqoonsan yahiin in ay jiraan arday u nugul in loo geysto gardaro ama kadeed taasoo ku saleysan sifooyinka loo arko ama dhab ahaan jira ee kala duwanaanta, sida: isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada, xaaladda bulsho-dhaqaale, guri la'aanta, xaaladda aqoonta, muuqaalka jirka, ama xaaladda waalidnimada, ama xariirka lala leeyahay qof qaba ama loo arko in uu qabo mid (1) ama ka badan sifooyinkaan.  Xagga siyaasaddaan, gardareysiga waxaa ka mid ah gardareysiga internetka.

Gardareysiga internetka waxaa kaloo loo sifeyaa sida gardareysiga marka la isticmaalo farsamada ama isgaarsiinta elataroonigga, kana mid ah, balse ku ekeen, wareejinta ama calaamadaha, baaqyada, qoraalka, sawirada, dhawaaqyada, xogta ama sirta nooc kasta oo si dhamaystiran ama qeyb ahaan lagu gudbiyo fiilo, raadiyo, elettromaqnatiis, slsawirka elatraroonk ama sawirka siistemka muraayadda, kana mid ah, balse ku ekeen, warqadaha elataroonigga, isgaarsiinta internetka, fariimaha degdegga ama isgaarsiinta fakska.  Gardareysiga internetka waxaa kaloo ka mid ah (i) abuurista bogga internetka ama blog halkaas uu

abuuraha u qaato aqoonsiga qof kale ama (ii) leyska dhigo qof kale sida qoraha qoraalka la soo geliyay amafariinta, haddii abuuraha iskadhigidda abuurto xaaladaha ku qoran weedha (i) ilaa (v), ee la xariira xaaladda gardareysiga. Gardareysiga internetka waxaa kaloo ka mid ah qeybinta loo adeegsado hababka isgaarsiinta elataroonigga marka lala xariiro in ka badan hal qof ama marka qoraal la soo geliyo habka elataroonigga taasoo ay heli karaan hal qof ama ka badan, haddii qeybtinta ama soo gelinta abuurto xaaladaha ku qoran weedha (i) ilaa (v) ee ka tirsan sifeynta gardareysiga.

Qofka soo qaada dagaalka ama fulliyaha waxaa lagu sifeyaa in uu yahay arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga sida, balse kuma eka, tababaraha, maamulaha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, haayaha, wadaha baska, tababaraha atleetikada, la-talliyaha hawsha ka baxsan manhajka ama farsame yaqaanka, qof iskaa wax u qabso ugu shaqeeyo dugsiga ama iibiye, qandaraasle ama qof kale oo ku shaqeeyo heshiis uu la galay dugsiga dagmada oo ka kaca gardareysi, gardareysiga internetka, ama aar gudasho.

Jawi ku dhisan cadaawad, sida uu ku sifeeyo M.G.L. c. 71, § 37O, waa xaalad ay gardareysiga sabab u tahay in jawiga dugsiga ku faafo handadaad, jeesjees, ama aflagaado aad u xun in ku filan ama ku baahsan ilaa heer ay ka baddasho xaaladaha waxbarashada ardayga.

Aar gudashada waxaa lagu sifeyaa foom ka mid ah cabsi gelinta, aar gudashada, ama kadeedka loo geysto ardayga soo sheego gardareysiga, bixiya macluumaad inta uu socdo baaritaanka gardareysiga, ama marqaati ka ah ama haaya macluumaad leysku hallen karo oo ku saabsan gardareysiga.

Shaqaalaha waxaa lagu sifeyaa, balse kuma eka, macalimiinta, maamuleyaasha, la-talliyeyaasha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, ilaaliyeyaasha, wadeyaasha baska, kooxaha atleetikada, la-talliyeyaasha hawlaha ka baxsan manhajka, shaqaalaha taageerada, ama aqoonyaanada farsamada.

Bartilmaameedka ama Dhibanaha waxaa lagu sifeyaa ardayga ama qaangaarka loo geystay gardareysiga, gardareysiga internetka, ama loo geystay aar gudashada.

Gardareysiga waxay qaadan kartaa qaabab badan iyo waxay ka dhici kartaa xaalad kasta. Gardareysiga waxaa ka mid noqon kara, balse kuma eka, cabsi gelin sida qofka oo magacyo loogu yeero ama handadaad, fogeynta sida inkiraadda ama faafinta xanta; ama weerarka jirka sida dagaalka lagu qaado ama weerarka loo geysto hantida ardayga. Gardareysiga wuxuu dhamaan xubnaha bulshada dugsiga ku abuuri karaa jawi ku dhisan cabsi. Waxay kaloo abuuri kartaa murugo aan loo baahneyn lana rabin oo saameysa awoodda ardayga u leeyahay in uu tago dugsiga, wax ku barto dugsiga, socdo suramada dugisiga, wax ku cuno makhaayadda qaxwada, ku cayaaro deydka dugsiga ama meelaha lagu nasto, ka qeybgalo ama tago hawlaha khaaska ama hawlaha ka baxsan manhajka ama tago kana soo noqdo dugsiga. Gaar ahaan, "jawiga cadaawada" waxaa lagu sifeyaa

xaalad uu gardareysiga sabab u yahay in jawiga dugsiga laga buuxiyo cabsi, jees-jees ama aflagaado oo in ku filan culus ama lagu adkeysto si wax looga baddalo xaaladha waxbarashada ardayga. Dabeecadaha gardareysiga aan laga hadlin waxay u horseedi karaan waxyeelo oo burbur u keeno dhallinta, sida murugada, ku dhicidda shaqada dugsiga iyo imaashada. Ku fashilidda in wax laga qabto dabeecadaha gardareysiga waxay ardayda kale u dirtaa fariinta in lagu dhaqaaqi karo dabeecadaha xunxun.

Sharciga wuxuu mamnuucay gardareysiga loo geysto ardayda ee ka dhaca dugsiyada, mana u dul qaadan doonaano Dugsiyada Dadweynaha Cambridge. Xagga siyaasaddaan, "dugsiga" waxaa ka mid ah dugsiyada, xerada dugsiga, tagidda iyo ka soo noqoshada dugsiaga iyo/ama munaasabadaha uu dugsiga kafaalo qaado iyo xafladaha, hantida ku dhinac taal xerada dugsiga, hawlaha dugsiga kafaalo qaado ama la xariira dugsiga, xafladaha, brograamyada haddii ay ka socdaan xerada dugsiga ama ay dibadda ka yahiin xerada dugsiga (sida munaasabadaha bulshada, safarada, munaasabadaha isboortiga, ama munaasbadaha la midka uu dugsiga kafaalo qaaday iyo xafladada), meesha baska joogsado, marka baska la saaran yahay ama baabuur kale uu leeyahay, la soo kireeyay ama dugsiga dagmada isticmaalo ama dugsiga, marka loo socdo ama laga soo noqdo dugsiga ama isticmaalka farsamada ama qalab elataroonig uu dugsiga leeyahay, la soo kireeyay ama uu dugsiga dagmada isticmaalo ama dugsiga iyo meel, hawl, xaflad ama brograamaan la xariirin dugsiga ama uu isticmaalo dugsiga dagmada ama dugsiga, haddii falka jawi cadaawad uu abuurto dhibanaha ama marqaatiyada, farageliso xuquuqda dhibanaha ama marqaatiyada jooga dugsiga ama maadiyan iyo dhab ahaan u carqaladeyso hawsha waxbarashada ama nidaamka hawsha ka socoto dugsiga.

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay si culus u qaadan doonaan eedeynta gardareysiga, waxayna isla markiiba jawaab ka bixin doontaa ashtakooyinka iyo eedeynta gardareysiga. Intaas kaddib, waa la mamnuucay aar gudashada ka soo horjeedo qofka soo sheega gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baarista gardareysiga ama arka ama haaya macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga.

Haddii uu jiro arday, waalidiin/ilaaliyeyaal/bixiyeyaasha daryeelka ee arday, xubin ka tirsan shaqalaha ama xubin kale oo ka tirsan bulshada aaminsan yahay in loo geystay gardaro, ama aar gudasho bacdamaa ay soo sheegeen gardareysi, bixiyaan macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama marqaati ka noqdaan ama hayaan macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga, waa in ay xaajada u soo jeediyaan agaasimaha dugsiga/mada qeybta sare dugsiga uu ardayga tago. Tani waxaa laga sheegi karaa afka ama qoraal ahaan. Warbixinta ku saabsan gardareysiga iyo/ama warbixinta ka aar gudashada gardareysiga, bixinta macluumaad la xariira gardareysiga ama in qofka uu arko ama haayo macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan gardareysiga waxaa si aan la ogaan karin loo gudbin karaa agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga uu ardayga tago. Fadlan xasuuso: hase ahatee, in talaabo dishibiliin aan

laga qaadi doonin ardayga maxaa yeelay waxaa la helay warbixin aan la aqoonin cidda soo dirtay.

Dhamaan shaqaalaha dugsiga (kana mid ah, balse ku ekeen, tababareyaasha, maamuleyaasha, la-talliyeyaasha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda qaxwada, haayeyaasha, wadeyaasha baska, tababareyaasha atleetikada, la-talliyeyaasha hawlaha ka baxsan manhajka, shaqaalaha taakuleynta ama farsameyaqaanada) waxaa la tababaraa sannadka oo idil xagga Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Prevention and Intervention Plan) Waajibaadka iyo mas'uuliyadda saaran shaqaalaha waxaa lagu bandhigay Qorshaha Ka Hortagga iyo Faragelinta Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Bullying Prevention and Intervention Plan) iyo Tilmaanta Siyaasadaha Loogu Talogalay Shaqaalaha (G*uide to Policies for Staff)*. Hase ahatee, waxaa muhiim ah in la xasuusto in dhamaan shaqaalaha dugsiga loo baahan yahay in ay isla markiiba soo sheegaan dhacdo kasta oo gadareysi ah ama aar gudasho iyaga arkeen ama ogaadaan una soo sheegaan agaasimaha/madaxa qeybga sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray lana isticmaalo foomka Warbixinta Gardareysiga CPS (lagana heli karo bogga internetka dugsiga). Shardiga in loo sheego agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray ma soo koobi karto awoodda xubinta shaqaalaha in uu ka jawaabo dhacdooyinka dabeecadda ama dishibiliinka ee waafaqsan siyaasadaha iyo hababka u dagsan dugsiga dagmada xagga maamulka dabeecadda iyo dishibiliinka.

Marka la helo ashtakada, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu islamarkiiba ogeysiin doonaa:

- Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la soo sheegay
- Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka ama qofka lagu eedeyay weerarka haddii uu yahay xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga
- Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu isla markiiba fullin doonaa baaritaanka ashtakada soo gaartay.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu la tashan doonaa Sarkaalka Ilaha Dugsiga (School Resource Officer) balse lama qeybsan doono macluumaadka aqoonsiga qofka ay quseeyso ama qofka geystay weerarka.

Xagga ogeysiinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka bartilmaameedka iyo qofka geystay weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay u hoggaansamaan sharuudaha qarsoodiga sharciyada Diiwaanka Ardayga Massachusetts (Massachusetts Student Record), 603 C.M.R. 23.00, iyo Sharciga Federaalka ee ku saabsan Asturnaanta iyo Xuquuqda

Waxbarashada Qoyska and the (Federal Family Educational Rights and Privacy Act regulations), 34 C.F.R. Qeybta 99, sida ku qoran 603 C.M.R. 49.07. Gaar ahaan, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ma siin karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, macluumaadka laga soo qaaday diiwaanka ardayga oo ku saabsan qofka la bartilmaameedsaday ama qofka soo qaada weerarka haddii macluumaadka uusan ahayn mid ku saabsan cunugga waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu kashifi karaa go'aanka laga gaaray gardareysiga ama aar gudashada loo geysto wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka sida hoos timaado 603 C.M.R. 49.06 iyadoo aan la haysanin ogolaashada ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka hase ahatee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay saraakiisha hirgelinta sharciga kala xariiri doonaan siyaabaha loo badbaadiyo asturnaanta bartilmaameedyada, marqaatiyada ardayga, iyo kuwa soo qaaday weerarka ilaa inta suurtogalka ah marka la fiiriyo daruufaha. Intaas kaddib, haddii qofka soo qaaday uu xubin ka yahay shaqaalaha dugsiga, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu qaadi doonaa talaabo dishibiliin, oo gaarta ilaa kana mid ah ka-joojinta shaqada. Intaas kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga go'aan ku gaaro in ay jirto cabsi gelin degdeg ah oo muuqata kuna timaada ammaanka ardayga ama dadka kale, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay kashifi karaan macluumaadka diiwaanka ardayga ee ku saabsan qofka loo geystay weerarka ama qofka soo qaaday weerarka dhinacyada ku habboon iyo hirgelinta sharciga sida la xariirta degdegga caafimaadka ama amaanka ardayga ama dadka kale sida ku qoran 603 C.M.R. 23.07(4)(e) iyo 34 C.F.R. 99.13(a)(10) iyo 99.36. Xaaladaan dambe, kashifaadda waxay ku kooban tahay muddada degdegga iyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxaa looga baan yahay in ay qoraal ka reebaan kashifaadda iyo asbaabta ka dambeyso go'aanka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga in ay jirto degdegga caafimaad iyo degdeg ku saabsan ammaanka.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu koobiga Siyaasadda Takoor La'aanta Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (*Cambridge Public Schools Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment*) iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (*Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) siin doonaa* dhamaan dhinacyada, kana mid ah qofka soo jeediyay ashtakada, ardayga loo geystay waxyeelada, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga loo geystay waxyeelada, qofka soo qaaday weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga loo geystay waxyeelada, qofka geystay weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka geystay weerarka, haddii qofka geystay weerarka uu yahay arday.

<u>Baaritaanka Ashtakada</u>

Marka Dugsiyada Dadweynaha Cambridge soo gaarto ashtako ku saabsan gardareysi ama aar gudasho la xariirta soo sheegidda gardareysiga, macluumaad la siiyo baarista gardareysiga ama la arko ama la haaysto macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay isla markiiba baari doonaan eedeynta, si xaq iyo si degdeg ah. Baaritaanka waxaa loo fullin doonaa iyaabo lagu dhowro qarsoodiga ilaa inta suurtogalka ah marka la fiiriyo daruufaha iyo si qofka soo sheega gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama arko ama haaya macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan falka gardareysiga.

Baaritaanka waxaa ka mid ahaan kara wareysi lala yeesho ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, xubinta shaqaalaha ama xubinta bulshada soo jeedisay ashtakada, ardayga loo haysto in uu yahay dhibanaha gardareysiga ama aar gudashada, ardayga (ardayda) ama xubinta (xubnaha) shaqaalaha loo haysto in ay geysteen gardareysiga ama aar gudashada, marqaatiyada dhacdooyinka la soo sheegay ama dadka kale hadba sida dugsiga u garto. Kaddib marka la go'aansado in gardareysi ama aar gudasho dhacday, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray wuxuu arrintaan iyo hababka looga jawaabo, dhakhso u ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la bartilmaameedsaday iyo qofka soo qaaday weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka, haddii qofka soo qaaday weerarka yahay arday. Waxaa jiri karaa daruufo uu agaasimaha, madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray ula xariiri karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka hor inta aan la fullinin baaritaan. Ogesiinta waxay waafaqsanaan doontaa sharciyada u dagsan gobolka ee laga helo 603 C.M.R. 49.00. Xagga ogeysiinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka bartilmaameedka iyo qofka geystay weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay u hoggaansamaan sharuudaha qarsoodiga sharciyada Diiwaanka Ardayga Massachusetts (Massachusetts Student Record), 603 C.M.R. 23.00, iyo Sharciga Federaalka ee ku saabsan Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska and the (Federal Family Educational Rights and Privacy Act regulations), 34 C.F.R. Qeybta 99, sida ku qoran 603 C.M.R. 49.07. Gaar ahaan, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ma siin karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, macluumaadka laga soo qaaday diiwaanka ardayga oo ku saabsan qofka la bartilmaameedsaday ama qofka soo qaada weerarka haddii macluumaadka uusan ahayn mid ku saabsan cunugga waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu kashifi karaa go'aanka laga gaaray gardareysiga ama aar gudashada loo geysto wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka sida hoos timaado 603 C.M.R. 49.06 iyadoo aan la haysanin ogolaashada ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka hase ahatee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay saraakiisha hirgelinta sharciga kala xariiri doonaan siyaabaha loo badbaadiyo asturnaanta bartilmaameedyada, marqaatiyada ardayga, iyo kuwa soo qaaday weerarka ilaa inta suurtogalka ah marka la fiiriyo daruufaha. Intaas kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga uu go'aan ku gaaray in ay jirto cabsi gelin degdeg ah oo muuqata xagga caafimaadka

ama ammaanka ardayga ama dadka kale, agaasimaha/madaxa qeybga sare dugsiga wuxuu kashifi macluumaadka diiwaanka ardayga ku saabsan qofka la bartilmaameedsaday ama qofka geystay weerarka u kashifi karaa dhinacyada ku habboon iyo hirgelinta sharciga taasoo la xariirto degdegga caafimaadka ama ammaanka haddii ogaanta macluumaadka loo baahan yahay si loo badbaadiyo caafimaadka ama ammaanka ardayga ama dadka kale sida ku qoran 603 C.MR. 23.07(4)(e) iyo 34 C.F.R. 99.13(a)(10) iyo 99.36. Xaaladaan dambe, kashifaadda waxay ku kooban tahay muddada degdegga iyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxaa looga baan yahay in ay qoraal ka reebaan kashifaadda iyo asbaabta ka dambeyso go'aanka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga in ay jirto degdegga caafimaad iyo degdeg ku saabsan ammaanka. Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la bartilmaameedsaday waxaa la ogeysiin doonaa natiijadaha ka soo baxay baarista iyo talaabooyinka la qaadi doono si looga hortago falalka dheeraadka ah ee ku saabsan gardareysiga ama aar gudashada haddii la ogaado in lala kulmay dhaqanka noocaas.

Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka iyo qodobada Qoraalka Isfahamka (Memorandum of Understanding) ee ka dhexeeyo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools) iyo Waaxda Boliiska Cambridge (Cambridge Police Department), haddii la ogaado in ay meesha ka dhacday gardareysi ama aar gudasho, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, lana shaqeeyo Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga (Director of Safety and Security).

- Ogeysii Sarkaalka Ilaha Dugsiga haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga leeyahay aasaas macquul ah uu ku aamino in eedeynta dambiga lala dabageli karo qofka soo qaaday weerarka ama go'aan ku gaaray in ay jirto cabsi gelin muuqata oo degdeg u soo food saartay caafimaadka ama ammaanka ardayga ama dadka kale.
- Qaad talaabo dishibiliin ku habboon sida waafaqsan *Buuggaan*
- Ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka (weerarada) haddii qofka soo qaaday weerarka uu yahay ardayg ama ogeysii qofka soo qaaday weerarka haddii u yahay xubin ka tirsan shaqaalaha.
- Ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka (dadka) la bartilmaameedsaday, ilaa heer waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka iyo xeerka, ogeysii iyaga talaabada la qaaday si looga hortago falal dheeraad ah oo la xariir gardareysiga ama aar gudashada.

Intaas kaddib, haddii dhacdada gardareysiga ama aar gudashada ku lug leedahay arday ka socota in ka badan hal dugsi, dugsiga dadweynaha ee madax banaan, dugsiga aan u adeegin dadweynaha, dugsiga maalinlaha la ogol yahay ee gaarka loo leeyahay ama dugsiga meelaha la daggan yahay ama dugsiga iskaashiga, dugsiga dagmada ama dugsiga marka kowaad la ogeysiiyay gardareysiga ama aar gudashada waxay, sida waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka, isla markiiba ogeysiin doonaan maamulaha ku habboon ee dugsiga kale dagmada ama dugsiga si labadaba u qaadan talaabada ku habbboon.

Waqti kasta, kaddb marka la helo warbixinta gardareysiga ama aar gudashada, kana mid ah baarista, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray uu qabo aasaas macquul ah uu ku aamino in la dabageli doono eedeynta dambiga ka soo horjeedoi qofka soo qaaday weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, lana xariiro Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga, wuxuu ogeysiin doonaa ciidanka hirgelinta deegaanka. Ogeysiinta waxay waafaqsanaan doontaa sharuudaha 603 C.M.R. 49.00 iyo qodobada Memorandumka Isfahamka (Memorandum of Understand) ee dhexmaray Dugsiyada Dadweynaha Cambridge iyo Waaxda Boliiska Cambridge (Cambridge Police Department). Kaddib, haddii dhacdada gardareysiga ka dhacdo xerada dugsiga kuna lug leedahay arday hore oo ka yar 21 sanno kaasoo aan weli lagu qorin dugsiga dagmada deegaanka, dugsiga dadweynaha ee madax banaan, dugsiga aan ka mid ahayn dugsiyada dadweynaha, dugsiga maalinlaha ee la ogol yahay ama dugsiga deegaanka ama dugsiga iskaashiga, dugsiga dagmada ama dugsiga la ogeysiiyay gardareysiga ama aar gudashada waxay la xariiri doonaan hirgelinta sharciga sida waafaqsan sharciga gobolka ama federaalka iyo xeerka. Si uu u gaaro go'aankaan, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu, sida waafaqsan Qorshaha, sida waafaqsan siyaasadaha iyo hababka dugsiga dagmada iyo qodobada Memorandumlka Isfahamka (Memorandum of Understanding) ee dhexmaray Dugsiyada Dadweynaha Cambridge iyo Waaxda Boliiska Cambridge, la tashan doonaa sarkaalka ilaha dugsiga iyo dad kale uu agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama loo xilsaaray u garto in ay habboon tahay.

Falalka Dishibiliinka/Jawaabta Laga Bixiyo Gardareysiga

Ujeedada Dugsiyada Dadweynaha Cambridge xagga dishibiliinka waxay tahay in la abuuro jawi ay ardayda ku bartaan sida loo hagaajiyo khasaarada loo geystay bulshada oo idil marka xubnaha shakhsi ahaan ay waxyeelo isgaarsiiyaan. Haddii la ogaado in ay la geystay gardareysi ama dhaqan kale aan habbooneyn, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay qaadi doonaan talaabo ku habboon daruufaha. Talaabada dishibiliinka la qaaday waxay miisaan u noqon doontaa baahida loo qabo xisaabtanka iyo baahida loo qabo in la hagaajiyo khasaarada loo geystay bulshada dugsiga, isla markaasna la baro dabeecadda ku habboon. Isticmaalka nidaamka caddalaadda bulshada sida habboon, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu fullin doonaa xiilado ku habboon oo laga badbaadiyo gardareysiga ama ka aar gudashada arday oo soo sheegay gardareysiga ama aar gudashada, arday arkay gardareysiga ama aar gudashada, arday macluumaad bixiya inta ay socoto baaritaanka, ama arday haaya macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan fal la soo dheegay oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho.

Ka hor inta aan si buuxdo loo baarin eedeynta gardareysiga ama aargudashada, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu qaadi doonaa talaabooyin lagu qiimeeyo baahida loo qabo in qofka la bartilmaameedsaday loo soo celiyo dareenka ammanka iyo/ama laga badbaadiyo in aan loo geysanin dhacdooyin dheeraad ah. Jawaabaha lagu horumariyo ammaanka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, abuurista qorshaha amaanka qofka; horay u qeybinta kuraasta ay ku fadhiistaan qofka la

bartilmaameedsaday iyo/ama qofka soo qaaday weerarka gudaha fasalka, qadada, ama gudaha baska; aqoonsiga xubin ka tirsan shaqaalaha oo u adeegi doono sida "qofka qaabilsan ammaanka" qofka la bartilmaameedsaday; iyo baddalaadda loo geysto jadwalka qofka soo qaaday weerarka iyo la xariirka qofka la bartilmaameedsaday. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay qaadi doonaan talaabo dheeraad ah si loo horumariyo ammaanka inta ay socoto baarista iyo kaddib, hadba sida loogu baahdo.

Waxaa jira fursado badan oo qofka lagu baro dabeecadda ku habboon sida: siinta kullamada dhismaha-xirfadaha ku kooban qofka; sida loo sameeyo model iyo isticmaalka dhaqanka wada tashiga; siinta hawlaha waxbarashada la xariira ama kooxaha ardayda, la tashiga la talliyeyaasha dugsiga iyo shaqaalaha kale ee ka tirsan dugsiga in ay ardayga ku kaalmeyaan taageerada dabeecadda wanaagsan ee la xariirta aqoonta iyo midda aan aqoonta la xariirin si ardayda loogu kaalmeeyo in ay fahmaan siyaabaha raacsan bulshada loona gaaro ujeedooyinkooda; lala kulmo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay helaan taageero iyo si loo xoojiyo ka hortagga gardareysiga iyo hawlaha dhismaha xirfadaha bulshada guriga; ku dhaqanka qorshooyinka dabeecadda laguna daro in xoogga la saaro horumarinta xirfadaha bulshada.

Talaabada laga qaado ardayda lagu helo in ay ka qeybgaleen gardareysi waxaa ka mid ah in qofka qaaday weerarka uu la shaqeeyo shaqaalaha dugsiga si loo hagaajiyo dabeecadda; kala la tallinta, adeegyada taageerada ama faragelin kale oo lagu daweeyo ardayga iyo xubnaha qoyska ku habboon ee ardayga; ciqaabta dishibiliinka la siiyo ardayga ilaa kana mid ah ku lug yeelashada maxkamadda; ama dishibiliinka la xariira dugsiga sida waafaqsan *Buuggaan* ilaa kana mid ka-joojinta, ka-saaridda iyo/ama ku lug yeelashada maxkamadda.

Dhamaan ardayda la ogaado in ay ka qeybgaleen gardareysi waxaa loo sheegi doonaa sida aar gudashada u tahay mamnuuc iyo fal kasta oo aar gudasho ah dhallin doono talaabo dishibiliin.

Marka go'aan laga gaaro in lala kulmay dhaqan aan habbooneyn, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay dhakhso ku dhaqaaqi doonaan in ay tirtiraan dhaqanka iyo waxay qaadi doonaan talaabo lagu saxo hadba sida loogu baahdo, taasoo u dhexeyso in gafaha laga dalbado in uu shaqaalaha dugsiga kala dhaqeeyo dabeecadda wanaagsan, tallada siinta la-tallin ama adeegyo kale oo la xariira daweynta iyo/ama talaabo dishibiliin meesha ay ku habboon tahay, ilaa kana mid ah ka-joojin, ka-saaridda dugsiga iyo/ama ku lug yeelashada maxkamadda. Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka, haddii go'aan lagu gaaro in ay meesha ka dhacday gardareysi ama aar gudasho, Agaasimaha/madaxa qeybga sare dugsiga, lana xariira Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga (Director of Safety and Security, waxay (i) ogeysiin doonaan hirgelinta sharciga deegaanka haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga aaminsan yahay in loo adeegsan doono qofka ku adkeysta jebinta; (ii) la qaado talaabo dishibiliin ku habboon iyo (iii) ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyha daryeelka qofka geystay jebinta; iyo (iv) ogeysiiyo

waalidiinta/ilaaliyeyaasha/daryeelka dugsiga dhibanaha, iyo ilaa her waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka, la ogeysiiyo iyaga talaabada la qaaday si looga hortago falal kale oo dheeraad ah oo ku saabsan gardareysiga ama aar gudashada. Intaas kaddib, haddii la ogaado in ardayga, isaga oo ogsoon, uu soo jeediyay eedeyn been ah oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho, ardayga waxaa la saari doonaa dishibiliin sida waafaqsan qodobada ku jira buugaan.

Horumarinta Ammaanka la Siiyo Qofka ay Quseeyso iyo Dadka Kale

Si loo soo celiyo dareenka ammaanka ardayga loo geystay gardareysiga lana qiimeeyo baahida uu dhibanaha u qabo badbaadin, waxaa shir lala geli doonaa ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga, iyo shaqaalaha dugsiga ee ku habboon (macnaha agaasimaha dugsiga, madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ardayda, ku-takhasusaha ammaanka iyo/ama sarkaalka ilaha dugsiga). Ujeedada shirkaan waxay ahaan doontaa in laga hadlo horumarinta iyo fullinta qorshaha ammaanka ardayga, kana mid ah shaqaalaha laga yaabo in ardayga siiyo warbixin haddii ay soo baxaan arrimo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay ku tallin doonaan, hadba sida ku habboon, la-tallin, adeegyada taageerada ama faragelinta daweynta la siiyo ardayga iyo xubnaha qoyska ardayga ee ku habboon.

Muddo macquul ah gudaheeda kaddib marka go'aan laga gaaro kaddibna ammar lagu bixiyo toosinta iyo talaabada dishibiliinka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray waxay la xariiri doonaan qofka la bartilmaameedsaday si loo ogaado haddii mar kale ay soo noqotay dabeecadda la mamnuucay iyo haddii loo baahan yahay taageero dheeraad ah. Haddii ay sidaas tahay, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu la shaqeyn doonaa shaqaalaha dugsiga ee ku habboon si loo fulliyo isla markiiba.

Haddii uu jiro ammarka ka-celinta, hal ujeedo uu shirka leeyahay waxay ahaan doontaa in la fiiriyo sida ay u saamayso ammarka ka-celinta iyo hababka loo gudbiyo warbixinta haddii la jebiyo ammarka ka-celinta. Haddii ammarka celcelinta uu ka soo horjeedo arday kale ama shaqaale, waa in shir gaar ah lala galo qofkaas si loo fiiriyo ammarka celcelinta iyo waxa ka dambeeyo, waxa laga filaayo iyo ciqaabta ka dambeyso jebinta ammarka.

Beenta Eedeynta/Aar Gudashada

Haddii go'aan lagu gaaro in arday uu isaga ama iyada oo ogsoon jeedisay eedeyn been abuur ah oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho, ardayga waxaa la saari doonaa dishibiliin sida waafaqsan qodobada *Buuggaan*.

Dhamaan ardayda waxaa la siin doonaa badbaadin isla mid ah iyadoo aan la fiirinin xaaladooda sida sharciga hoos timaado.

Fiirinta Falalka ku Saleysan-Dugsiga

Haddii qofka soo jeediyay ashtakada ku saabsan gardareysiga, qofka loo geystay gardareysiga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka loo geystay gardareysiga aysan awood u yeelanin in ay xalliyaan arrimahooda kaddib marka si daacad ah leysugu dayo in la adeegsado habka aan rasmiga ahayn ee kor lagu tafatiray, lala shaqeyay Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, waxaa ashtako qoran loo gudbin karaa Maamulaha ama Sarkaalka Hawlwadeenka Sare. Ashtakada qoran waxay sheegi doontaa arrimaha iyo waxaa ku jiri karaa oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada iyo wax qabashada la soo codsaday.

Muddo todobo (7) maalin kaddib marka la helo ashtakada qoran, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay soo diri doonaan ogeysiis ku qoran taariikhda iyo waqtiga la qaban doono shirka looga hadlo arrimaha. Shirka kaddib, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay gaari doonaan go'aan haddii gardareysi ama dhaqan kale aan habbooneyn uu dhacay, talaabada ku habboon ee laga qaaday, si loo hubsado in gardareysiga ama dhaqanka kale aan habbooneyn joogsado iyo haddii loo baahan yahay talaabooyin kale oo lagu taageero. Warqad ka hadleyso xaajadaan iyo falalka kale ee dheeraadka ah uu dugsiga dagmada soo qaadi doono si wax looga qabto arrimaha la soo qaaday waxaa la soo saari doonaa muddo shan (5) maalin gudahooda laga bilaabo shirka.

Haddii qofka ku hawlan in uu soo gudbiyo ashtako ku saabsan gardareysiga, qofka loo bartilmaameedsaday gardareysiga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka loo bartilmaameedsaday gardareysiga uusan weli awood u lahayn in uu xalliyo arrimaha iyo fikradaha laga qabo, kaddib marka lala shiro Maamulaha ama qofka loo xilsaaray, waxaa codsiga fiirinta loo gudbin karaa Guddiga Dugsiga. Guddiga Dugsiga, hadba sida uu u garto, wuxuu dhageysan karaa marqaatiyada, wuxuu qaban karaa caddeyn dheeraad ah, iyo wuxuu fiirin karaa natiijadaha iyo talooyinka la soo jeediyay heerka dugsiga iyo sidoo kale natiijadaha iyo talooyinka uu soo jeediyo Maamulaha ama shirka fib u fiirinta qofka loo xilsaaray. Muddo shan (5) maalin gudahooda laga bilaabo marka la fulliyo fiirinta, Guddiga Dugsiga wuxuu soo saari doonaa go'aan qoran kaasoo xaqiijin doono, go'aan ka gaari doono ama baddala natiijadaha iyo talooyinka uu soo jeediyo Maamulaha, sida wax ka qabasahada, haddii ay jiraan, falal dheeraad ah uu dugsiga dagmada qaadi doono si looga hadlo arrimaha la soo qaaday.

Hababka Kale Ashtakada la Heli Karo

Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada hababkaan kore ee ku jira qeybtaan iyo Siyaasadda Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta (Bullying Prevention and Intervention Plan) kama saaraan arday in uu adeegsado habka ashtakada ee ku qoran "Siyaasadda Takoor La'aanta iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga" ("Non Discrimination Policy and Prohibition Againsta Sexual Harassment Policy") lana raadiyo xallinta ashtakooyinka takoorka

ama kadeedka ee ku saleysan sifo uu sharciga badbaadiyo sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada. Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada ku jira qeybtaan aysan ka reebin ardayga in uu isticmaalo habka ashtakada ku qoran Qeybta 23.0 Buuggaan in uu raadsado in xal laga gaaro ashtakooyinka la xariira marka ardayga laga xayuubiyo xuquuqda ku qoran *Buuggaan*.

<u>Xariirka uu la Leeyahay Sharciyada Kale</u>

Sida waafaqsan sharciyada u dagsan federaalka iyo gobolka iyo sharciyada iyo siyaasadaha dugsiga dagmada, lama ogola in qofna la takooro xagga u ogolaashada dugsiga dadweynaha ee magaalo kasta ama tuulo kasta ama helitaanka fa'iidada, axsaanka iyo koorsooyinka waxbarashada dugsiga dadweynaha noocaas xagga isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiinada, diinta, da'da, itaal darrida, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofka, aqoonsiga jaadka qofka, jinsiga qofka, xaamilonimada, ama xaalad la xariirto xaamilonimada. Ma jiro wax ku jiro qeybtaan Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta (Bullying Prevention and Intervention Plan) oo dugsiga ama dugsiga dagamada ka reebta in ay qaadaan talaabo si ay u saxaan takoorka ama kadeedka ku saleysan ka tirsanaanta qofka koox sharci ahaan la badbaadiyo sida hoos timaado sharciga deegaanka, gobolka ama federaalka ama siyaasadaha dugsiga dagmada. Ma jiro wax ku jiro Qorshaha Faragelinta iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Ka Hortagga Gardareysiga ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy and Bullying Prevention and Intervention Plan oo loo samayay ama lagu talogalay in lagu yareeyo awoodda dugsiga ama dugsiga dagmada in uu qqaado taaabo dishibiliin sida hoos timaado M.G.L.c. 71, qeybaha 37H iyo 37H 1/2, sharciyada kale ee lagu dabaqi karo, ama siyaasadaha u dagsan dugsiga xaafadda ama deegaanka kana jawaaba dabeecadda dagaalka, waxyeelada ama carqaladeynta, iyadoo aan la fiirinin haddii qeybtaan ama Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga iyo/ama Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy and/or Bullying Prevention and Intervention Plan) quseyaan dabeecadda.

5.13 <u>Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Dagaalka Ballamada Dhallinta</u>

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay ballan qaadeen in ay bixiyaan jawi wax lagu barto, halkaas aan loo dul qaadan doonin ballamada jinsiga. Sida waafaqsan siyaasadaan, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay ballan qaaday in ay horumariso jawi ka madax banaan dagaalka ballaminta. Sidaas darteed, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay raadisaa in ay kordhiso dareenka dagaalka ballaminta dhallinta kana geysato kaalmo ku saabsan sida looga jawaabo baahida dhibaneyaasha iyo caruurta marqaatiga ka ah dagaalka noocaas.

Waa sharci darro in la ballamiyo dhallinta, meel kasta ha lagu ballamiyo, mana loo dul qaadan doono dagaalka ballaminta ka dhaca gudaha dugsiga. Intaas kaddib, lama ogolaan doono in laga aargutto qof ka soo ashtakooday dagaalka ballanka loo dhigay qof dhallin yar ama la shaqeyay baaritaan la xariira dagaalka ballan loo dhigay qof dhallin yar. Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay ka jawaabi doonaan ashtakooyinka iyo warbixinta dagaalka ballaminta ama aar gudashada, waxaana laga qaadi doono talaabo dhaqan celin meesha looga baahdo, sida talaabo dishibiliin meesha ay ku habboon tahay.

**Dagaalka Guriga/Dagaalka Ka Dhexeeyo Shakhsiyaadka** Dagaalka Guriga waa saasaanka dabeecadda jujuubka hakaas uu hal qof iskudayo in uu kantaroolo qof kale una adeegsado hanjabaad ama dhab ahaan isticmaalo qorshe laga yaabo in ay ka mid yahiin kuwa soo socdo: jirka, jinsiga, afka, maaliyadda, ku xadgudubka cilmu nafsiga iyo/ama isticmaalka farsamada (sida gardareysiga internetka).

Dagaalka guriga wuxuu saameyaa bulsho kasta waddanka, iyadoo aan la fiirinin jinsiyadda, hiddaha, ama noloshii hore kooxda. Dadka da' kasta, heerarka dakhliga, diinta, jinsiga qofka, jaadka qofka, iyo heerarka aqoonta waxay la kulmaan dagaalka guriga.

***Dagaalka Ballaminta Dhallinta:*** Dagaalka ballaminta (ama xariirka ku xadgugubka) waa sasaan uu qofka u adeegsado in uu ku kantaroolo saaxiibta gabarta ama saaxiibka wiilka. Dagaalka ballaminta wuxuu qaadan karaa wijiyo badan, sida ku xadgudubka madaxa/caatifadda, ku xadgudubka jirka, iyo ku xadgudubka jinsiga ilaa isticmaalka farsamada (macnaha gardareysiga internetka). Qofka wuxuu mutteysan karaa dagaalka ballaminta xattaa haddii aysan jirin ku-xadgudubka jirka. Taasi waxay ka dhici kartaa xaaladaha ballaminta aan lagu talogelin iyo xariirka muddada dheer ee dhabta ah.

Cunugga Marqaatiga/Ku Dhawaashada Dagaalka Guriga In cunugga uu arko dagaal waxay saamayn kartaa dhinac kasta nolosha cunugga, koriimadiisa, iyo horumarkiisa. Ku dhawaashada waxaa ka mid ah fiirinta ama maqalka xad gudubka, ogaashada waxyeelada xadgudubka (dhaawacayada soo gaara waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, ama jebinta furnitureka, iwm.) iyo/ama dhaawac/waxyeelo ka soo gaaro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka oo laga difaaco dabeecadda ku xadgudubka.

***Dagaalka Qoyska**:* Dagaalka qoyska waa sifeyn balaaran, waxaana ka mid ah ku xadgudubka loo geysto cunugga, ku xadgudubka loo geysto waayeelka, iyo falal kale sida dagaalka dhexmara xubnaha qoyska.

**Dibanaha/Badbaadahy**: erayo leysku baddali karo oo tixraaca qofka la gaarsiiyay waxyeelo, lagu xadgudbay ama lagu cabsi geliyay waxyeelo, haddii ay meesha ka jirto ama haddii aysan ka jirin waxyeelo dhab aan loo geystay jirka.

**Ku Xadgudbaha/Geystaha/Garaacaha**, erayo leysku baddali karo oo la xariira qofka geysto ku xadgudbaha kaddibna dhalliya waxyeelo, haddii ay jiraan ama haddii aysan jirin waxyeelo dhab ahaan soo gaara jirka.

Intaas kaddib, dhaqanka noocaas waxaa loo arki karaa in uu yahay kadeed, nooc ka mid ah takoorka, uu sharciga federaalka iyo gobolka mamnuuco; iyo/ama dhaqanka wuxuu noqon karaa gardareysi, kana mid ah, lana xadidin, gardareysiga internetka, kaasoo uu mamnuuco sharciga gobolka. Siyaasadda Takoo-La'aanta Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca ka soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) Siyaasadda ka soo Horjeedo Dagaalka Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Violence Policy) iyo Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy).

Calaamadaha dabeecadda ku xadgudubka: in laga maseer haddii saaxiibka ardayga la hadlo dad kale, leyskudayo in la maamulo waxa qofka kale loo baahan yahay in uu sameeyo, qilaafaadka oo la buunbuuniyo, si joogto ah loo cabsi geliyo qofka kale in laga tagi doono, carro afka laga soo jeediyo, qofka kale lagu eedeeyo dhibaatooyinka u gaarka ah, iyo jir ahaan iyo niyad ahaan waxyeelo la gaarsiiyo saaxiibka ama falalka gardareysiga internetka.

Calaamadaha dhibaateynta waxaa ka mid ah: in si joogto ah loo joojiyo qorshaha laguna saleeyo asbaab aan u muuqanin in ay sax yahiin, mar kasta laga walwalo in ay ka xanaajiyaan qofka ay sharaakada la yahiin, in laga sabro waxyaabo qofka muhiim u ah, calaamadaha ku xadgudubka jirka oo muuqda, sida nabaro ama jeex, qofka oo culeys la saaro si loola sameeyo jinsi ama la dareensiiyo in ay yahiin shay jinsi, la yeesho qof laga rabo in uu diyaar ahaado mar kasta, iyo qofka oo laga ilaaliyo qoyska ama asxaabta ama loo geysto gardarrada internetka.

<u>Habka Warbixinta Dagaalka Ballaminta Dhallinta</u>

Ardayga aaminsan in uu yahay dhibane loo geystay dagaalka ballaminta dhallinta, aaminsan in uu ku jirto halista dagaalka ballaminta dhallinta, ama ammarka celcelinta ka qaatay qof, wuxuu arrinta gaarsiin karaa mid ka mid ah dadka soo socda: (1) agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, (2) kaaliyaha agaasimaha, (3) madaxa, (4) macalinka ama (5) kalkaaliyaha dugsiga.

Qofka la gaarsiiyo warbixinta waa in uu isla markiiba ogeysiiyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

Intaas kaddib, shaqaale kasta oo arka dhacdada ballaminta dhallinta gudaha hantida dugsiga ama munaasabo la xariirta dugsiga, waa in isla markiiba ogeysiiyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu isla markiiba sameeyo waxa soo socda: (1) ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka dhibanaha, iyo (2) ogeysii Xafiiska Ammaanka iyo Sekuritiga (Office of Safety and Security).

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga u diro Siyaasadda Takoor La'aanta Dugsiyada Dadweynyaha Cambridge (Cambridge Public Schools Non-Discrimination Policy iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) ee wax ka qabta hababka xallinta aan rasmiga ahayn iyo gudbinta ashtakooyinka rasmiga iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) iyo in uu koobi ka siiyo warqadahaas marka la codsado.

Marka la helo warbixinta dagaalka ballaminta dhallinta, haddii dhacdada ka dhacday meel ka baxsan hantida dugsiga ama ka dhacday hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga yimaado dugsiga ama la joogo munaasabo oo la xariirto dugsiga, ama jebinta ammarka celcelinta mar lagu sugan yahay hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga yimaado ama la joogo munaasabo la xariirta dugsiga, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay dhakhso ogeysiin doonaan madaxda ku habboon dhacdada la soo sheegay. Soo sheegidda dhacdada noocaas waxaa loo fullin doonaa si loo dhowro qarsoodiga <u>ilaa inta la fullin karo</u> marka la fiiriyo xaaladda.

Waxaa muhiim ah in macluumaadka dhinaca saddaxaad la siiyo culeys marka ay quseeyso ballamada dhallinta. Waxaa lagu talliyaa in xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga oo horay sida habboon loo tababaray in uu u tago ardayga iyo in uu kala hadlo waxa la maqlay iyo waxa suurtogalka ah. Haddii la aqoonsado in ay jirto ku-xadgudub, waa in laga shaqeeyo "qorshaha amaanka" iyo talo jeedin iyo qeybsiga tixraacinta la-tallinta, kooxaha taageerada, iyo kaalmada booliiska/maxkamadda.

Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga waa in ay xasuustaan in ay u hoggaansamaan dhamaan waajibaadka ka saaran waajibka warbixinta marka la tuhunsan yahay ku xadgudub iyo dayac (warbixinta 51A). Gudbinta ashtakooyinka 51A waa in la sameeyo lana raaco Tilmaamaha Warbixinta Ku Xadgudubka iyo Dayaca Cunugga ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Child Abuse and Neglect Reporting Guidelines) kana mid ah ogeysiinta agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ku xadgudubka iyo dayaca la tuhunsan yahay, Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga waa in ay xasuustaan in ay dhamaan dambiyada u sheegaan boliiska. Shaqaalaha waa in ay ogeysiiyaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaasoo ogeysiin doono Agaasimaha Amaanka iyo Nabadgelyada, iyo iskuduwi doono ogeysiiska la siiyo boliiska. Soo sheegidda dhacdada noocaas waxaa loo fullin doonaa si loo dhowro qarsoodiga ilaa inta la fullin karo marka la fiiriyo xaaladda.

Hababka Marka Dugsiga la Siiyo Koobiga Ammarka Celcelinta

Marka ardayga uu ammarka celcelinta ka qaato qof kaddibna keeno uu dugsiga la yimaado koobiga ammarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay la shiraan shaqaalaha ama ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga in ay fiiriyaan ammarka ka-celinta iyo macnaha ay leedahay.

Waa in laga shaqeeyo "qorshaha ammaanka" si wax looga qabto baahida dhibanaha iyo arrimaha, kana mid ah shaqaalaha uu ardayga siin doono warbixin haddii ay soo baxaan arrimo ama la jebiyo ammarka celcelinta inta ardayga ama shaqaalaha ku sugan yahay xerada dugsiga ama munaasabo la xariirta dugsiga. Haddii ammarka celcelinta uu ka soo horjeedo xubin kale oo ka tirsan bulshada dugsiga, waa in la shir gaar ah lala galo qofka si loogu noqdo ammarka celcelinta iyo waxa ka dhallan karo, waxa laga filaayo iyo ciqaabta ka dambeeyso jebinta ammarka. Horumarinta "qorshaha ammaanka" waxaa loo fullin doonaa hab dhowra qarsoodiga ilaa inta suurtogalka ah iyo sida hoos timaado daruufaha.

Talaabada Dishibiliinka

Haddii go'aan lagu gaaro in la geystay dhaqan aan habbooneyn, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay ka qaadi doonaan talaabada noocaas sida ay u aragto in aysan habbooneyn. Falka noocaas wuxuu u dhexeeyaa la-tallin iyo/ama dishibiliin ilaa, kana mid ah, ka-joojin ama ka saaridda dugsiga.

Waxyaabaha Kale ee Laga Qaban Karo

Soo sheegidda dhacdada dagaalka ballaminta dhallinta kaddib marka la joogo hantida dugsiga, marka loo socdoama laga soo noqdo dugsiga, ama la joogo munaasabo la xariirta dugsiga sida waafaqsan hababka kore, ardayda aaminsan in ay ahayeen dhibaneyaal xagga dagaalka ballaminta dhallinta ee ka dhacday hantida dugsiga, mar loo socdo ama laga yimaado dugsiga, ama la joogo munaasabo la xariirto dugsiga waxay kaloo soo gudbin karaan ashtako ku saabsan kadeedka iyo/ama gardareysiga sida waafaqsan hababka ku qoran Siyaasadda Takoor La'aanta Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) iyo/ama Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy). Intaas kaddib, ardayda aaminsan in ay ahayeen dhibaneyaal la xariira dagaalka ballaminta dhallinta ee ka dhacday xerada ka baxsan dugsiga iyo/ama saacadaha aan dugsiga la joogin waxay boliiska u sheegi karaan dhacdada la soo seegay.

Ardayda aaminsan in ay ku jiraan halis waxay kaloo raadsan karaan ammarka celcelinta si ay qofka uga badbaadiyaan xanuunka jirka ama dhaawac ama cabsi

gelinta xanuunka ama dhaawac marka ay ammarka celcelinta ka dalbadaan maxkamadda deegaanka.

## 6.0 XORIYADDA HADALKA

6.1 Ardayda waxay ka heli doonaa qaar ka mid ah xuquuqda dastuurka sida maxkamadaha u sifeyaan marka laga hadlo dugsiyada. Ardayda waxay xaq u yeelan doonaan in ay sheegaan waxa ay qabaan iyagoo hadla, qora, qaata ama muujiya calaamadaha sida battanada, teesaraha, calaamadaha iyo suunka gacanta, ama hab kasta ama qaab kasta oo wax lagu soo jeediyo. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay u samayn karaan nidaam haddii uu jiro aasaas, xaqiiqo, lagu aamino in habka wax loo sheego sabab u noqon doono ama sabab u yahay carqaladeyn la taaban karo oo degdeg ugu dhici doonto hawlaha dugsiga (tusaale, shay ceyb ah, aflagaado, ama fadeexeyn; taageera isir raaca, qaawanaan, si ula kac u kiciya dadka kale in ay jebiyaan sharciyada shaqeya ee dugsiga, iwm.)

6.2 Ardayda waxay xaq u yeelan doonaan in ay qeybiyaan iyo in ay suugaan ku haystaan xerada dugsiga iyo gudaha dhismooyinka dugsiga, sida balse ku ekeen wargeysyada, majalaadka, warqadaha iyo bamfledka; marka laga reebo in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray mamnuuci karo qeybinta gudaha dhismooyinka dugsiga hal soo-saarid oo ka tirsan daabacaad gaar ah haddii ay jirto aasaas xaqiiqo la taaban karo oo lagu aamino milkiyadeeda ama qeybinta waxay sabab u noqon doontaa ama sabab u tahay carqaladeyn la taaban karo hawlaha dugsiga (tusaale, taageerada la siiyo isir raaca, taageerada la siiyo hawlaha sharci darrada, horumarinta ku xadgudubka maadada, iwm.).

6.3 Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama macalin kasta, sarkaal ka tirsan dugsiga ama shaqaale ka tirsan dugsiga wuxuu u baahan doonaa in suugaanta, sida daabacaadda dugsiga kafaalo qaado, loo gudbiyo ogolaasho ama ogolaasho ka hor inta aan qeybinin. Waxaa la filan doonaa in dhamaan daabacaadda ardayga in ay u hoggaansamaan sharciyada wargeyska mas'uulka ah. Tan macnaheeda waxay tahay in wararka aflagaadada; dacwadaha aan aasaaska lahayn iyo eedeynta; sharaf darrada loo geysto dadka; wararka been abuurka, qoraalada u dooda fikradaha qaladka, kadeedka ama takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada; cadaawad; jebinta sharciyada iyo sharciyada u dagsan dugsiga; ama waxyaabaha loo samayay in lagu carqaladeeyo hawsha waxbarashada, in aan la ogolaan doonin.

Soo jeedin kasta, ha ahaato nooc kasta, ay fulliyaan ardayda, marka ay adeegsadaan xuquuqda soo jeedinta, ma aha in loo qaadan doono sida oraah ka tirsan siyaasadda rasmiga ah ee dugsiga. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay u baahan yahiin in aan suugaan la wareejinin ilaa koobi loo diro

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray waqtiga la bilaabo qeybinta.

6.4 Waqtiga, goobta iyo habka ardayda u qeybiso suugaanta waxaa dhici karto in uu si aan macquul ahayn u habeeya Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, hase ahatee sharciyada noocaas waa in:

a. Si siman loogu dabaqo dhamaan noocyada suugaanta;

b. Aysan hor istaagin qeybinta waqtiyada ama goobaha ha ahaato gudaha ama dibadda dhismaha dugsiga aan loo haynin xaqiiqo aasaasi ah si loo gaaro in lala kulmi doono faragelin;

c. Waa in ay gaar u yahiin meelaha iyo waqtiyada meelaha laga mamnuucay in lagu qeybiyo; iyo

d. Aysan hor istaagin qofna xaqa uu u leeyahay in uu ogolaado ama diido suugaanta la qeybiyo sida waafaqsan sharciyada.

6.5 Ma jiro arday lagu qasbi karo in uu salaamo callanka ama in uu ku biiro Ballanka Adeeca (Pledge of Allegiance). Ardayga doorto in uusan ka qeybgelin wuu iska aamusi doonaa si sharaf leh.

6.6 Lama ogola in tabelooyin, xayaysiin ama waxyaabo la soo dhajiyo haddii aan ogolaasho laga haysanin Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama cidda loo xilsaaray.

6.7 Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

## 7.0 XORIYADDA KULLANKA

7.1 Ardayda waxay leeyahiin xaqa Dastuuriga ee la xariira xoriyadda isu imaashada. Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay si madax banaan iyo si nabad ah ugu kulmaan dhulka dugsiga si ay u soo jeediyaan aragtidooda iyo fikradahooda. Shir kasta ay ardayda soo qorsheyaan waxaa la qaban doonaa waqti uu horay u soo ogolaado agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, mana aha in loo diidi doono si aan macquul ahayn.

7.2 Ardayda waxay casumi karaan oo gudaha dugsiga ku dhageysan karaan dadka qudbadaha soo jeediya ee dibadda ka yimaada. Saraakiisha dugsiga waxay sida macquulka ah sharci u samayn doonaan waqtiga iyo goobta laga soo jeedin doono qudbadaha, waxaana dhici karto in loo baahdo in horay ay u soo sheegaan si leysaga ilaaliyo qilaafka si loo hubsado in sida habboon loo badbaadiyo bulshada

dugsiga. Ardayda waxaa looga baahan yahay in ay magacyada af hayeenada dibadda u gudbiyaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama Kaaliyaha Agaasimaha si ay u helaan ogolaasho hore. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama Kaaliyaha Agaasimaha waxay ogolaan doonaan qof dibadda ka yimaada oo soo jeediya qudbad haddii aysan jirin xaqiiqo aasaasi ah oo loo aamino in qofka qudbadda soo jeediyo uu sabab u noqon karo carqalad loo geysto hawlaha dugsiga.

7.3 Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

## 8.0 ISTICMAALKA DHISMOOYINKA DUGSIGA

8.1 Saraakiisha dugsiga waxay takoor la'aan iyo sida macquulka iyo takoor la'aan diyaarin doonaan dhismooyinka dugsiga in dhaaan ardayda ku kulmaan, ku shiraan, iyo ku diyaarsadaan iyo ku faafiyaan daabacaadyada, si ardayda loogu suurtogeliyo in ay ku dhaqmaan xuquuqda ku qoran *Buuggaan*. Saraakiisha dugsiga waxay u baahan karaan in ardayda isticmaasha dhismooyinkaan in ay dugsiga u celiyaan kharashka macquulka ah ee ku baso alaabta ay ardayda isticmaalaan iyo kharashka kale ama khasaarada la galay marka la adeegsado dhismooyinka noocaas uu dugsiga bixin lahayn.

Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

## 9.0 XEERKA LABISKA

9.1 Ardayda waxaa loo ogol yahay in ay u soo labbistan sida waafaqsan xeerka labbiska, hab waafaqsan aqoosigooda jinsiga. Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay soo qaataan labbiska iyo nooca tinta ay doortaan hase ahatee waa ardayda waa in ay la kulmaan mas'uuliyadda labbiska iyo ishagaajinta hab sida macquulka ah lana ogolaan karo waafaqsan heerarka caafimaadka, ammaanka iyo nadaafadda, aysan sabaab u noqonin carqaladeynta hawsha waxbarashada, aan ahayn mid u gafta iyo/ama halis gelisa caafimaadka, ammaanka iyo maslaxadda ardayga ama dadka kale. Cagaha waa in la daboolo (la geliyo kabaha) mar kasta.

9.2 Ardayda waxaa laga mamnuucay in ay labbistaan dhar, dahab iyo/ama alaab lagu soo qoray hal qabsi, faalo ama handaso oo ku dheehan ceyb, fadeexo ama aadaab darro; lagu toosiyo ama loogu talo galay in lagu waxyeeleey, kadeedo, cabsi geliyo, handado ama lagu yaso doodaha ama shakhsiyaadka taasoo ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka

waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada; iyo/ama xayaysiinta cabbitaanka qamrada, tubaakada ama mukhadaraadka sharci darrada.

9.3 Ardayda waa in aysan ku imaanin dugsiga shaati la'aan, sarwaal la'aan ama kabo la'aan. Dhamaan ardayda u labbisan sida waafaqsan siyaasadda waa in aysan la kulmin cadaadiska ardayda ama shaqaalaha taasoo la xariirto labbiskooda iyadoo aan la fiirinin sida dharkooda u waafaqsan yahay nooca jirkooda, isirka, midabka, asal qaran, jinsiyad, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidadmada, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofku yahay, aqoonsiga jaadka qofka, jinsiga, xaamilonimada, ama xaaladda la xariirto xaamilonimada.

9.4 Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa la ogeysiin doonaa haddii ardayga uu dugsiga ku yimid labbis aan ku habbooneyn dugsiga, iyo ardayga waxaa la siin doonaa shay ku habboon dugsiga uuna labisto (tusaale funaanad, shaati gacmo gaab oo laga soo qaaday dukaanka dugsiga) inta ay socoto maalin dugsiyeedka, laga codsaday in gudaha labbiska loo jeediyo dibadda, loo diro guriga si ay u baddalaan labbiskooda ama labbiska ka amaahdaan saaxiib ka mid ah fasalka inta ay socoto maaling dugsiyeedka.

9.5 Ardayda waxaa laga filaa in ay raacaan dhamaan sharciyada dugsiga xagga qaadashada dharka badbaadinta, muraayadaha ammaanka ama qalabka kale ee loo adeegsadao badbaadinta ama ammaanka ee laga yaabo in loo baahan yahay si looga qeybgalo brograamyada khaaska.

9.6 Waa in la fududeeyo wada hadalada ku saabsan labbiska ardayga bacdamaa labada dhinac leeyahiin cod isla'eg. Wada hadalada noocaas waa in aan lagu qabanin fasalka hortiisa ama ardayda kale hortooda.

9.7 Maamulaha wuxuu fari doonaa agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiyada in ay shaqaalaha baraan siyaasadaan si loo hubsado in si siman oo iswaafaqsan loogu dhaqmo siyaasadaan. Dishibiliin kasta oo loo baahan yahay in la saaro bacdamaa la jebiyay siyaasaddaan waxaa fullin doono agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan*.

9.8 Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

## 10.0 XORIYADDA DIINTA

10.1 Ardayda waxay xaq u yeelan doonaan in ay diidaan in ay ka qeybgalaan ama tagaan qaab kasta oo ka mid ah hawlaha diinta.

10.2 Ma aha in waxyaabaha ku jiro sharciyadaan loo qaato in lagu mamnuuco ama lagu niyad jebiyo wada hadalada laga yaabo in ay la xariiraan mowduucyada diinta ama garaaca muusikada diinta sida qeyb ka tirsan manhajka dugsiga caadiga, hase ardayga diida wuxuu xaq u yeelan doonaa in uu diido in uuka qeybgalo.

## 11.0 GUURKA ARDAYGA IYO XAAMILONIMADA

11.1 Ardayda xaamilada ah, waalidiinta ama kuwa guursaday waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay sii wataan dugsiga. Ardayda noocaas waxaa loo ogol yahay in ay ku jiraan fasaladooda waxbarashada caadiga iyo ardayda kale kala qeybgalaan hawlaha ka baxsan manhajka. Intaas kaddib, ardayda xaamilada ah, kaddib marka ay dhalaan, waxaa loo ogol yahay in ay ku soo noqdaan fasaladooda waxbarashada iyo hawlaha dheeraadka ku ah manhajka sida ka hor inta aysan dhallin. Ma jirto ardayad xaamilo ah, waalid ama guursaday oo loo diidi karo tababarka fasalka ama hawlaha ka baxsan manhajka, ama laga joojin doono, la saari doono, laga reebi doono ama haddii kale la saari doono dishibiliin taasoo ugu wacan guur, xaamilonimo ama waalidnimo.

11.2 Jebin kasta uu qofka u geysto xuquuqda ku qoran *Buuggaan* waxay aasaas u noqon doontaa in laga qaato racfaan sida waafaqsan sharciyada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugaan*.

## 12,0 DAWLADDA ARDAYGA

12.1 Ardayda waxay xaq u leeyahiin qaab madax banaan, dimoqraati ah ay isku xakumaan. Dhamaan ardayda wanaagsan waxay xaq u yeelan doonaan in ay bixiyaan codkooda iyo in ay raadsadaan iyo in ay qabtaan xafiis. Dawladda ardayga waxaa la dooran doonaa sannadkii hal mar.

12.2 Dhamaan magacaabidda iyo hababka doorashada xafiiska ardayga waa la dajin doonaa, waxaana fullin doono ardayda iyadoo aan lagu soo faragelinin, hase ahatee hoos yimaada kormeerka sarkaal ka tirsan dugsiga ama shaqaale ka tirsan dugsiga.

12.3 Dhamaan musharaxiinta xafiiska ardayga waxay xaq u leeyahiin in ay fulliyaan olole iyo waxay si siman u heli doonaan dhismooyinka dugsiga.

12.4 Habeynta, hababka iyo awoodda dawladda ardayga waxaa lagu soo qori doonaa dastuurka ay soo habeyeen kaddibna dhaqan geliyeen ardayda, hase ahatee, loo baahan yahay in dastuurka ay soo diyaarisay dawladda ardayga mas'uul ka tahay in ay maqasho kooxaha laga tirada badan yahay iyo maslaxadaha gaarka taasoo hubisa in kooxaha noocaas la mattalo gudaha dawladda ardayda.

## 13.0 SIYAASADDA DISHIBILIINKA IYO HABABKA

### 13,1 Siyaasadda Guud

Waa siyaasadda u dagsan Guddiga Dugsiga iyo dhamaan shaqaalaha dugsiga in ardayda lagu kaalmeeyo xallinta dhibaatooyinka iyadoo aan loo baahanin in la qaado talaabo dishibiliin xag jir ah. Ka-joojinta dugsiga waa talaabada ugu dambeyso oo lagu talliyo. Si loo gaaro taas, shaqaalaha dugsiga waxaa lagu dhiiri geliyay in ay daba galaan kaddibna soo af jaraan dhamaan falalka dishibiliinka ku habboon lana heli karo si ay u horumariyaan waxbarashada iyo asluubta wanaagsan ee ardayga ka hor inta aan lagu dhaqaaqin ka-joojin. Tusaalooyinka ku saabsan noocyada faragelinta la isticmaali karoka hor inta aan loo gudbin ka-joojinta ardayga waxaa ka mid ah, balse kuma eka, kuwa soo socda: raali gelin, magta, tixraacinta/adeegyada bulshada, dhexdhexaadinta qilaafka, sixidda hawsha magta, la-tallinta, ka reebidda hawlaha dugsiga, xayiraadda qadada, tixraacinta dishibiliinka xafiiska, waqtiga fogeynta dibadda fasalka, xariirinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka luminta axsaanka, heshiiska ardayga, tixraacinta la-tallinta hoggaaminta, tixraacinta heerka darajada ama maamulaha dhismaha, tixraacinta Kooxda Taageerada Ardayga (Student Support Team) (SST) xagga faragelinta, heshiiska dabeecadda ardayga, qorshaha taageerada dabeecadda, shirka macalinka la leeyahay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo shirka ardayga macalinka ee lala yeesho waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, iyo shirka macalinka, ardayga ee lala yeesho ardayga, iyo/ama digniinta. Hase ahatee, waa in la xasuusto in liiskaan faragelinta uusan ahayn mid dhamaystiran in faragelin kasta oo la soo qoray loo adeegsado xaalad kasta, baddelkii, faragelinta la adeegsado la xariiraan cuslaanta jebinta.

### 13.2 Falalka Kale ee Toos Ugu Habboon Dishibiliinka

Si looga hortago dabeecad laga yaabo in ay dhalliso ka-joojin, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo kuwa loo xilsaaray waxaa lagu dhiirigelinaa loona ogol yahay in ay qaadaan talaabo kasta si loo horumariyo waxbarashada iyo dabeecadda wanaagsan ee ardayga, sida balse kuma eka mid kasta oo ka mid ah kuwa soo socdo:

a. Lala shaqeeyo ardayga hal-ilaa-hal, leyskudayo in la xaqiijiyo meesha ay ka socoto dhibaatada, kaddibna lagu talliyo talo kale.

b. Kala xariir waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka (booqashad guriga, haddii loo baahdo), ama saaxiib (asxaab), haddii loo baahdo.

c. Tixraac la-talliyaha dugsiga ama takhtarka cilmu nafsiga.

d. Tixraac wakaaladaha bulshada ee ku yaal dibadda.

e. La hadal qaar ka mid ah ama dhamaan inta kor ku qoran.

f. Tixraac Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Upper School).

g. Qareenka qof ahaan ama marka uu la joogo koox arday.

h. Ku qor tababare dheeraad ku ah fasalada caadiga.

i. Sii shaqo dheeraad ah.

j. Dalbo shaqo dheeraad ah, saacadaha caadiga kaddib.

k. Waxaad ardayga u dirtaa qiimeyn sida cunug u baahan waxbarashada khaaska sida waafaqsan habka ku qoran sharciyada iyo xeerka u dagsan gobolka iyo federaalka ee lagu dabaqi karo.

l. isticmaalka xiiladaha ku saleysan caddeynta iyo brograamyada sida dhexdhexaadinta, xallinta qilaafka, waanwaanta, iyo faragelinta habboon iyo taageerada.

13.3 Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo dadka loo xilsaaray, waxay raadsan karaan kharashka ku baxa khasaarada loo geystay hantida dugsiga, haddii ay tahay siligga, kanjelooyinka, geedaha, dhirta gaagaaban, dhismooyinka ama qeyb kasta oo ka tirsan, dariishadaha, buugaagta, qalabka, aalada ama furnitureka, uu ardayga geysto, haddii khasaarada noocaas ahayd burbur aan lagu talogelin ama haddii kale.

13.4 Haddii dhacdo ku lug yeelato mukhadaraad, hub, weerar loo geysto shaqaalaha dugsiga ama la geysto dambi la xariira jebinta sharciga, hababka ku qoran Qeybta 19 *Buuggaan* ayaa la hirgelin doonaa, kana mid ah, iyadoo aan la soo koobin, waxa soo socda:

a. Xubinta shaqaalaha ee ku lugta leh ayaa la soo xariiri doonto Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama Kaaliyaha Agaasimaha.

b. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Head of Upper School) waxay ogeysiin doonaan:
   i. Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Geliyada (Director of Safety and Security);
   ii. waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka lagula xariiro telefoon, loo raaciyo warqad, iyo haddii loo baahdo, loo diro warqad la xaqiijiyay; iyo
   iii. Sarkaalka Hawlgalka Sare (Chief Operating Officer).

c. Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Director of Safety and Security) wuxuu Maamulaha ama qofka loo xilsaaray u diri doonaa warbixinta dhacdada.

d. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay fullin doonaan dacwadda dishibiliinka sida ku saleysan hababka lagu dabaqi karo sida ku tafatiran *Buugyaraha*.

## 14.0 KA-JOOJINTA

14.1 Waa siyaasadda u dagsan Waaxda Dugsiga Cambridge (Cambridge School Department) in dadaal kasta la sameeyo si ardayda loogu kaalmeeyo in ay xalliyaan dhibaatooyinka iyada aan adeegsanin talaabo dishibiliin xag jir ah Hase ahatee, kiisaska marka dabeecadda ardayga ay carqalad ku abuurto dugsiga, xumaan ku dhallisa ardayga ama dadka kale ama ka-qeybgasho hawlo ay mamnuucaan sharciyada Commonwealth of Massachusetts, markaas waxaa dhici karto in loo baahdo ka-joojin.

14.2 Ka hor inta aan la bilaabin in la qaado talaabo dishibiliin, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xilsaaray wuxuu qaadi doonaa talaabadaha soo socdo si dhamaan ardayda loo siiyo xuquuqdooda nidaamka:

a. Ka Joojinta Gudaha-Dugsga
Ka hor inta aan la saarin ka-joojinta hawlaha fasalka caadiga balse aysan ku jirin xerada dugsiga ilaa toban (10) maalmo dugsiyeed isku xiga ama muddo aan ka badneyn toban (10) maalin dugsiyeed marka leysku darro xagga jebinta badan ee la geysto sannadka oo idil, ardayga waxaa loo sheegi doonaa:

i. Gafka la xariiro dishibiliinka;

ii. Aasaaska eedeynta; iyo

iii. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu ku jawaabo.

Isla maalinta la gaaro go'aanka ka-joojinta gudaha dugsiga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu qaadi doonaa dadaal macquul ah uu afka ku ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida ugu dhakhsiyaha badan gafka dishibiliinka, asbaabta loo gaaray gabogabada in ardayga uu geystay jebinta iyo muddada ka-joojinta gudaha dugsiga iyo wuxuu kaloo ku casumi doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka shir looga hadlo hawsha uu ardayga ka qabta waxbarashada iyo dabeecadda, xiiladaha loo adeegsado ka-qeybgalka ardayga, iyo jawaabaha suurtogalka ah ee laga

bixiyo dabeecadda. Shirka noocaas waxaa la qaban doonaa maalinta ka-joojinta, haddii ay suurtogal tahay, iyo haddii aysan ahayn, isla marka la hirgelin karo waqtigaas kaddib. Fiiri Qeybta 16.1 xagga hababka Shirka Ka-Joojinta Gudaha-Dugsiga.

Haddii ardayga lagu meeleeyo dugsiga ama laga joojiyo dugsiga in ka badan toban (10) maalin, oo isku xiga ama marka leysku daro inta lagu dhex jiro sannad dugsiyeedka, ka-joojinta noocaas waxaa loo qaadan doonaa in ay tahay ka-joojinta muddada dheer xagga sida nidaamku yahay, xagga racfaanka iyo ujeedooyinka warbixinta. *Fiiri Qeybaha* 14.3 iyo 16.3 ee ku saabsan Hababka Shirka Ka-Joojinta Muddada Dheer (Long Term Suspension Conference Procedures). **Fadlan xasuuso:** Ardayda la siiyo Qorshooyinka Waxbarashada ku Kooban Qofka (Individualized Education Plans) waxaa lagu dabaqaa habab dheeraad ah iyo waa in la raaco hababka dheeraadka ee ku qoran Qeybta 18.0 ka hor inta aan la qaadin talaabo dishibiliin.

b. <u>Ka Joojinta Muddada-Gaaban</u>

Ka hor inta aan laga joojinin adeegyada gaadiidka dugsiga ama dugsiga ilaa toban (10) maalin dugsiyeed isku xiga, ama loo diro xabsi, sida ciqaabta ka dambeyso gaf la xariira dishibiliinka, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga waxaa la siin doonaan ogeysiis ku qoran Ingiriisi iyo luqadda aasaasiga guriga haddii ay ka duwan tahay Ingiriisi ama hab kale oo lagula xariiro kuna habboon, kuwa soo socda:

i. Gafka la xariiro dishibiliinka;

ii. Aasaaska eedeynta;

iii. Muddada suurtogalka ah ee ardayga laga joojiyo dugsiga;

iv. Fursad uu ardayga dhageysi kula galo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga kuna saabsan ka-joojinta la soo jeediyay iyo in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka soo qeybgalaan.

v. Taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qaban doono dhageysiga;

vi. Xaqa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga u leeyahiin adeegyada turjubaanka inta dhageysiga socdo haddii loo baahan yahay in ay yimaadaan.

Hadba sida ay u gartaan "Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga" waxay ardayga u ogolaan doonaa in uu ka shaqeeyo ka-joojinta muddada gaaban gudaha dugsiga.

*Fiiri Qeybta* 16.2 xagga hababka Shirka Muddada Gaaban.

Haddii ardayga lagu meeleeyo dugsiga ama laga joojiyo dugsiga in ka badan toban (10) maalin, oo isku xiga ama marka leysku daro inta lagu dhex jiro sannad dugsiyeedka, ka-joojinta noocaas waxaa loo qaadan doonaa in ay tahay ka-joojinta muddada dheer xagga sida nidaamku yahay, xagga racfaanka iyo ujeedooyinka warbixinta. *Fiiri Qeybaha* 14.3 iyo 16.3 ee ku saabsan Hababka Shirka Ka-Joojinta Muddada Dheer (Long Term Suspension Conference Procedures). **Fadlan xasuuso:** Ardayda la siiyo Qorshooyinka Waxbarashada ku Kooban Qofka (Individualized Education Plans) waxaa lagu dabaqaa habab dheeraad ah iyo waa in la raaco hababka dheeraadka ee ku qoran Qeybta 18.0 ka hor inta aan la qaadin talaabo dishibiliin.

c. Ka Joojinta Muddada-Dheer

Ka hor inta aan ardayga laga joojinin dugsiga in ka badan toban (10) maalin dugsiyeed isku xiga, sida ciqaab la xariirta gaf dishibiliin, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa afka iyo qoraal ahaan loo siin doonaa ogeysiis ku qoran Ingiriisi iyo luqadda aasaasiga guriga haddii luqadda ay ka duwan tahay Ingiriisi, ama hab kale oo lagu gaarsiiyo oo ku habboon, waxa soo socda:

i. Gafka la xariiro dishibiliinka;

ii. Aasaaska eedeynta;

iii. Muddada suurtogalka ah ee ardayga laga joojiyo dugsiga;

iv. Fursad uu ardayga dhageysi kula galo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga kuna saabsan ka-joojinta la soo jeediyay iyo in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka soo qeybgalaan.

v. Taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qaban doono dhageysiga;

vi. Xaqa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga u leeyahiin adeegyada turjubaanka inta dhageysiga socdo haddii loo baahan yahay in ay yimaadaan.

vii. Ka hor inta aan la gaarin dhageysiga, xaqa in la siiyo fursad uu ku fiiriyo diiwaanka ardayga iyo warqadaha uu Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga laga yaabo in ay isku haleyaan si ay go'aan uga gaaraan in ardayga laga joojiyo ama haddii kale;

viii. Xaga in uu ku mattalo qareen ama qof caadi ah uu ardayga soo doorto, kharashkkana uu ardayga bixiyo ama harashka ay bixiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka.

ix. Xaqa loo leeyahay in la keeno marqaatiyo taageera ardayga iyo in la soo bandhigo sharaxaadda ardayga ka bixiyo dhacdada lagu soo dacwooday hase ahatee qasab ma aha in la qasbo ardayga in uu sidaas sameeyo;

x. Xaqa loo leeyahay in si su'aalo dadban la weydiiyo marqaatiyada uu dugsiga la yimaado;

xi. Xaqa lagu codsado in dhageysiga uu duubo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo in ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka la siiyo wixii la duubay.

xii. Xaqa loo leeyahay in racfaan laga qaato Agaasimaha/go'aanka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare loona jeediyo Maamulaha

Agaasimeyaasha/Madaxda qeybta sare dugsiga wuxuu ardayga u ogolaan karaa in uu dugsiga ku qaato ka-joojinta muddada-dheer.

*Fiiri Qeybta 1*6.3 Hababka Shirka Ka-Joojinta Muddada Dheer.

**Fadlan xasuuso:** Ardayda la siiyo Qorshooyinka Waxbarashada ku Kooban Qofka (Individualized Education Plans) waxaa lagu dabaqaa habab dheeraad ah iyo waa in la raaco hababka dheeraadka ee ku qoran Qeybta 18.0 ka hor inta aan la qaadin talaabo dishibiliin.

d. Xaalad kasta oo lagu dhex jiro, ogeysiisyada ka-joojinta iyo dhageysiga waa in la qabto ka hor inta ardayga aan la weydiinin in uu ka tago dugsiga, marka laga reebo marka ardayga uu handadaad degdeg ah u gudbiyo saraakiisha dugsiga, arday kale, shaqaale iyo/ama naftooda ama si cad halis u geliyo jawiga dugsiga. Fiiri qeybta 15.0 si aad u aragtid hababka la xariira Ka-Saaridda Degdegga (Emergency Removal). Kiiskaan, waxaa dhici karto in dhageysiga gadaal loo dhigo hase ahatee waa in lagu qabto muddo macquul ah gudaheeda.

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ku dadaali doonaan sida macquulka ah in ay ogeysiiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay afka iyo qoraal ahaan sheegaan fursadda ay ku tagaan dhageysiga. Si loo fulliyo dhageysi lana haynin waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay qoraal ka reebi doonaan dadaalka macquulka ah ee la sameyay si loola xariiro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha. Waxaa

loo qaadan doonaa in dadaal macquul ah la sameyay haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uu diray ogeyssis qoran kana reebay qoraal in uu iskudayaya ugu yaraan labo (2) in uu la xariiro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka si loo gaarsiiyo ogeysiis degdeg ah. Ogeysiis qoran oo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka laga saaro gacanta, loogu diro boostada darajada kowaad ama boostada caadiga, ama loogu diro email ay keenaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka xagga xariirka ay la yeeshaan dugsiga, ama hab kale oo loogu geeyo uu Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka.

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xilsaaray waa in uu ka taxadiraa fiirinta daruufha iyo in uu isticmaalo garasho aqoon wanaagsan xagga go'aanka ka-joojinta. Waxaa la tixgelin doonaa xaaladaha ka sii darra ama yareeya ka hor inta aan la gaarin go'aan go'aanka ka-joojinta.

14.3 Hadba sida dhacdada u darran tahay, waxaa dhici karto in ardayga dugsiga looga joojiyo jebinta sharciyada dugsiga kana dhaca inta lagu sugan yahay dhismaha dugsiga, xerada dugsiga, inta loo socdo ama laga soo noqdo dugsiga ama inta ay socoto hawsha dugsiga ee la ogol yahay ha ka dhacdo xerada dugsiga ama meel ka baxsan haddii loo arko in uu haysto, kana mid ah balse ku ekeen:

a. *Weerarka iyo Garaaca/Waxyeelada Jirka/Cabsi Gelinta*

i. loo adeegsado ama leyskudayo in loo adeegsado dagaal, xoog, jujuub, cabsi gelin, handadaad ama dhaqan kale oo la mid ah.

ii. la farageliyo ama leyskudayo in la farageliyo shaqaalaha dugsiga ama ardaga marka uu adeegsado cabsi gelin, kadeed ama jujuub ama carqaladeeyo ama carqaadeeyo hawsha dugsiga, ha isticmaal xoog ama yuusan isticmaalin xoog ama dagaal.

iii. waxyeelo la gaarsiiyo ama leyskudayo in la gaarsiiyo shaqaale ka tirsan dugsiga ama qof kale loona adeegsado hub ama shay khatar ah.

iv. weerar loo geysto, sida weerarka jinsiga ama weerar iyo garaac loo geysto shaqaale ka tirsan dugsiga ama qof kale, ama leyskudayo in la geysto weerar, sida weerarka jinsiga ama weerar iyo garaac loo geysto shaqaale ama qof kale.

v. sabab loo noqdo ama leyskudayo in sabab loo noqdo dhaawaca jirka ee loo geysto shaqaale ka tirsan dugsiga. ama qof kale.

vi. halis la geliyo ammaanka jirka qof kale marka la adeegsado xoog ama dagaal ama cabsi gelin loo adeegsado xoog ama dagaal ama leyskudayo in halis la geliyo ammaanka jirka qof kale loona adeegsado xoog ama dagaal ama cabsi gelinta xoog ama dagaal. Cabsi gelinta xoogga ama dagaalka waa ficil qarsoon oo sida macquulka ah dhibanaha geliso cabsi in loo geysto dhawaca jirka. Gafkaan waxaa ka mid ah kadeedka iyo/ama dagaalka ballaminta dhallinta.

vii. ka qeybgalay ama iskudayo in uu ka qeybgalo dagaalka ballaminta dhallinta.

viii. ka qeybgalay ama iskudayay in uu ka qeybgalo farsamo atleetiko halis ah iyo aan macquul ahayn oo khatar gelisa caafimaadka ama ammaanka qofka, sida isticmaalka koofida birta ama qalabka kale isboortiga ee loo isticmaalo sida hub.

ix. kiciyay, horumariyay ama ku dhiirigeliyay ama iskudayay in uu kiciyo, horumariyo ama ku dhiiri geliyo dagaal, xoog, jujuub, cabsi gelin, handadaad, waxyeelo, weerar, dhaawaca jirka, dagaalka ballaminta dhallinta ama isticmaalk farsamo atleetiko halis ah aan macquul ahayn oo khatar gelisa caafimaadka ama ammaanka qofka ama dhaqan kale oo la barbar dhigi karo. Tani waxaa kaloo ka mid ah dhicid ama in la diido in laga tago agagaarka muranka ama dagaalka kaddib marka shaqaalaha dugsiga ka codsadaan qofka in uu ka tago meesha.

x. ka qeybgalay ama iskudayay in uu ka qeybgalo mruan ama dagaal (ha ahaado afka ama jirka) ama weerar ama garaac leys dhaafsado.

b. *Haysashada Hubka Xabbadda, Hubka Halista ah, Waxyaabaha Halista*

i. horay u haystay ama haaysto qorayga xabbadda ka dhacdo ama hub.

ii. horay u haystay ama haaysto middi ama hub halis ah.
sida hub sharciga mamnuuco.

iii. isticmaalay shay hab halis ah oo dadka cabsi geliya.

c. *Maadooyinka la Kantaroolo, Qamrada iyo Tubaakada*

i. haystay ama haaysto ama soo qaatay maado la kantaroolo ama qamro.

ii. iibiyay, qeybiyay ama haystay ama haaysto, ujeedadana tahay in uu iibiyo ama qeybiyo maado la qoray ama aan la qorin oo la kantaroolo ama mukhadaraadka "paraphernalia" gudaha dugsiga, xerada dugsiga ama meelaha hoos yimaada awoodda dugsiga, sida hawha ama munaasabad dugsiga kafaalo qaado ama la saaran yahay gaadiid uu bixiyay dugsiga.

iii. haystay ama haaysto ama isticmaalo maado la kantaroolo lana qorin, mukhadaraadka lagu mirqaamo, mukhadaraadka lagu waasho, amphetamine, barbiturate, hashiis, cabbitaanka qamrada ama nooc kasta mirqaamiyaha.

iv. lagu arkay isticmaalka maadooyinka tubaakada inta uu ku sugan yahay dugsiga, xerada dugsiga, ama uu hoos yimaado awoodda dugsiga, sida, hawlaha ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaado ama inta uu saaran yahay gaadiidka dugsiga bixiyo.

v. muujiyay, isticmaalay ama haysto maado la kantaroolo ama qamro inta uu u sugan yahay dugsiga, xerada dugsiga ama inta uu hoos yimaado awoodda dugsiga, sida hawl ama munaasabo uu dugsiga kafaalo qaaday inta uu ku sugan yahay gaadiidka dugsiga bixiyay.

vi. ka qeybqaatay iibinta, qeybinta, isticmaalka ama haysashada maado la kantaroolo, maado la kantaroolo lana qorin, mukhadaraadka lagu mirqaamo, mukhadaraadka lagu waasho, amphetamine, barbiturate, hasiish, cabbitaanka qamrada ama nooc kasta mirqaamiyeyaasha iyadoo la joogo xerada dugsiga ama la hoos yimaado awoodda dugsiga, sida hawsha ama munaasabd uu dugsiga kafaalo qaado ama inta uu ku sugan yahay gaadiidka dugsiga' bixiyay.

vii. muujiyay, isticmaalay ama haaysto qalabka lagu sameeyo mukhadaraadka inta uu ku sugan yahay dugsiga, xerada dugsiga ama hoos yimaado awoodda dugsiga, sida hawsha ama munaasabadda uu dugsiga kafaalo qaado ama inta uu ku sugan gaadiid uu dugsiga bixiyay.

viii ka qeybgalay iibinta, qeybinta, isticmaalka ama haysashada qalabka lagu sameeyo nooc kasta mukhadaraadka inta uu ku sugan yahay xerada dugsiga ama hoos yimaado awoodda dugsiga, sida hawl ama munaasabo uu dugsiga kafaalo qaaday ama inta uu ku sugan yahay gaadiid uu dugsiga bixiyay.

ix. ku sugnaa mana samaynin dadaal uu kaga tago agagaarka meesha lagu iibiyo, qeybiyo, isticmaalo ama lagu haysto maado la kantaroolo, maado la kantarool loona qorin, mukhadaraadka

maandooriyaha, mukhaadaraadka lagu waasho, amphetamne, barbiturate, hashiish, cabbitaanka qamrada ama saqradda nooc kasta ama iibinta, qeybinta isticmaalka ama haaysashada qalabka mukhadaraadka nooc kasta oo lagu haysto xerada dugsiga ama inta la hoos yimaado awoodda dugsiga.

d. *Agaasimaha, Takoorka, Gardareysiga Internetka iyo Jebinta Xuquuqda Madaniga*

i. jebiyay xuquuqda madaniga dadka kale.

ii. ka qeybgalay falalka kadeedka ama takoorka, sida falalka kadeedka jinsiga.

iii. adeegsaday aflagaado, caay ama luqad ku dhisan fadeexo si ku celcelis ah iyo/ama hab ku dhisan xumaan.

iv. ka qeybgalay hawl kasta oo jebisa sharciga Massachusetts mamnuuca dhaqanka kadeedka (M.G.L. c. 269, §§17-19).

v. cabsi geliyay, kadeeday ama handaday qof kasta inta uu ku sugnaa xerada dugsiga ama hawl dugsiga leeyahay ama ka baxsan dhulka dugsiga.

vi. isticmaalay luqad iyo/ama dhaqaaq, oo ku dhisan ceyb, aan habbooneyn, oo ku dhisan liidid iyo/ama gaf inta uu ku sugan yahay dhulka dugsiga, hawl dugsiga leeyahay ama munaasabo la xariirta dugsiga.

vii. ka qeybgalay hawl kasta oo jebisa sharciga Massachusetts mamnuuca gardareysiga (M.G.L.c. 71, §37O).

viii. ka qeybgalay hawl jebisa sharciga Massachusetts ee mamnuuca gardareysiga internetka (M.G.L.c. 71, §37O).

e. *Xattooyo, Burburin iyo Dab Shidid*

i. shiday dab ama iskudayay in uu shido dab ama burburiyay ama iskudayay in uu burburiyo dhismaha dugsiga ama hanti.

ii. halis geliyay ammaanka dadka kale ama iskudayay in uu halis geliyo ammaanka dadka kale kaddib marka uu dab ku shiday hantida dugsiga, hawl uu dugsiga kafaalo qaaday ama inta uu ku sugan yahay gaadiid uu bixiyay dugsiga.

iii. shiday qalabka digniinta nooca dugsiga isagoo ogsoon aysan jirin degdegga dabka ama degdegga boliiska.

iv. burbur u geystay ama iskudayay in uu burbur u geysto ama wax xado ama iskudayo in uu xado hantida dugsiga leeyahay ama hantida gaarka loo leeyahay.

v. iskudayay in uu adeegsado xoog ama cabis gelinta xoogga si uu u xado hanti dugsiga leeyahay ama hanti gaar loo leeyahay.

vi. khasaariyay ama xaday hanti uu gaar u leeyahay qof kale ama lagu arkay in uu haysto alaab laga soo xaday qof leeyahay inta uu joogo dugsiga.

vii. sababay ama iskudayay in uu sababo burburka loo geysto hantida dugsiga, wuxuu xaday ama
iskudayo in uu xado hantida dugsiga.

viii. sababay ama iskudayay in uu sabab u noqdo carqaladeynta dugsiga ama munaasabad la xariirto dugsiga ama hawl marka uu ka dhawaajiyay ama iskudayay in uu ka dhawaajiyo qeylada digiinta beenta.

ix. halis geliyay ammaanka dadka kale marka uu ka dhawaajiyay ama iskudayay in uu ka dhawaajiyo digniin been ah.

x. samayay ama cabsi geliyaya in uu samayo handadaadka bamka ama handadaad kale oo been ah ama qalalaaso la mid ah.

xi. shidday ama iskudayay in uu abaabulo ama shido digniin been ah, sida iyadoo aan la soo koobin, cabsida bamb shididda salka la soo jiido, soo jiididda sanduuqa dabka ama cabsi gelin kasta ama dhiddo oo been ah inta uu ku sugan yahay xerada dugsiga ama hawsha dugsiga ama munaasabo la xariirta dugsiga.

f. *Carqaladeyn Kale*

i. wuxuu hor istaagay ama iskudayay in uu hor istaago isagoo adeegsaday xoogga jirka, isu keenidda ama shaqada sii socoto ee dugsi kasta ama shir kasta oo macquul ah oo lagu qabto hantida.

ii. ku fashilay in uu u hoggaansamo ammarada ay bixiyaan shaqaalaha dugsiga oo u shaqeeyo sida sharciga waafaqsan, fullinaaya awoodooda rasmiga, taasoo dhallisa in ay carqaladeyso waxbarashada ardayda kale.

iii. wuxuu ka shaqeyay hawl kasta uu sharciga Barwaaqa Sooranka Massachusetts mamnuucay oo u dhigma carqaladeynta hawsha dugsiga.

iv. ka qeybgalay hawl kasta oo si muuqata u carqaladeyso dugsiga, fasalka ama hawsha ka socoto fasalka ama waxyeelo gaarsiisa qof kale.

v. ka qeybqaata dhaqan jebiya M.G.L.c. 71, §§37H & 37H½.

vi. ka qeybgalay hawl ama keenay hantida dugsiga ama hawl kale uu dugsiga kafaalo qaaday, ama dhacdo aan isticmaali macquul ah lahayn xagga xaaladda dugsiga

vii. sababay ama iskudayay in uu sababo cargaladeynta dugsiga, fasalka ama hawsha fasalka marka dugsiga la keeno shay aan isticmaal macquul ah lahayn marka uu ku sugan yahay xaaladda dugsiga

g. *Ku Celcelinta Jebinta*

i. wuxuu ku celceliyay jebinta mid ama ka badan sharciyada iyo mas'uuliyadda ku qoran *Buuggaan.*

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu xaq u leeyahay in uu fiiriyo xaqiiqadaha iyo heshiiska lagu gaaray dhageysiga ka-joojinta iyo wuxuu xaq u leeyahay in uu fidiyo ka-joojinta la sheegay.

Inta uu ku sugan yahay ka-saarid, ardayga waa in uusan u dhawaanin dugsiga iyo in uusan xaq u yeelanin in uu ka qeybgalo ama tago munaasabadaha dugsiga ama hawlaha.

14.4 Weerarka Ardayga, Dagaalada

Shakhsiyaadka ka qeybgala dagaal ama sinna u dhiirigeliya waxaa degdeg looga qaadi doonaa talaabo dishibiliin adag. Hubaal, looma dulqaadan doono dabeecadda carqaladeynta noocaan. Ciqaabta la xariirto dabeecadaan aan la ogolaan karin waa hal-ilaa-toban-maalin oo ka joojin ah taasoo ku xeran heerka ku lug yeelashada, qeybta, tirarda gafafka iyo/ama cuslaanta dhacdada. Waa in la xasuusto in weerarka ama weerarka iyo garaaa loo geysto qofka tahay dambi, iyo in boliiska la ogeysiiyo dhamaan weerarka jirka, iyo in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka la ogeysiiyo xaqa ay u leeyahiin in ay ashtako u gudbiyaan maxkamadda dagmada Middlesex County Court. Sida ku xeran daruufaha, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay, iskeeda, ashtako la xariirto dambiga u gudbin kartaa Maxkamadda Dagmada Middlesex xagga dagaalka iyo/ama weerarka iyo garaaca. Ardayda waa ogsoon

yahiin goorta ay la kulmaan qilaaf, waxaana laga filaa in ay raadsadaan kaalmo haddii loo baahdo in qilaafka lagu xalliyo nabad. Ardayga wuxuu mas'uul ka yahay in uu iska ilaaliyo dagaalka iyo in uu xaaladda gaarsiiyo sarkaal kasta oo ka tirsan dugsiga. Dhexdhexaadiyeyaasha ardayga-kulliyadda waxaa laga heli karaa Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Office of Safety ana Security) waqti kasta si ay u xalliyaan qilaafaadka.

Go'aanka qeybta gaarka ah iyo heerka dishibiliinka la xariira shanta qeyb ee lagu sifeeyay hoos waxaa samayn doono maamulaha mas'uulka ka ah, sida ku saleysan daruufaha kiis kasta oo gaar ah, iyo maamulaha wuxuu u gudbi karaa heer sare qeybta dishibiliinka xagga gafka kowaad ama mid labaad haddii dhacdooyinka ama daruufaha u baabdaan in laga qaado talaabo aad u culus, gaari karta kana mid ah ka saaridda dugsiga.

QEYBTA KOWAAD:

Kiciyaha / Buunbuuniyaha / Dulmiilaha:

Ardayga laga cosdaday in uu ka tago agagaarka goobta muranka iyo qaska ka dhacay ama dagaal ee diida in uu sidaas sameeyo, wuxuu hoos yimaada qeybtaan.

| | |
|---|---|
| Gafka Kowaad: | Ilaa saddax maalin oo laga joojiyo dugsiga. Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka la ogeysiiyay. |
| Gafka Labaad: | Ka-joojinta dugsiga muddo saddax ilaa shan maalin. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. |
| Gafka Saddaxaad: | Ka joointa dugsiga muddo shan ilaa toban maalin. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. Dhageysiga ka-saaridda ee lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. |

QEYBTA LABAAD:

Weerarka iyo Garaaca Loo Geysto Qofka:

Weerarka lagu qaado qofka iyo weerarka iyo garaaca loo geysto qofka waa dambi. Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxaa waajib ku ah in ay soo sheegaan dhamaan dambiyada ka dhaca gudaha hantida dugsiga, basaska dugsiga, ama munaasadaha la xariira dugsiga iyo/ama dugsiga ka yahay mas'uul iyo in la ogeysiiyo boliiska. Dhibbaneyaasha waxaa lagula tallin doonaa xaqa ay u leeyahiin in ay soo gdubiyaan ashtako dambi iyo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools) waxay ashtako dambi ka soo gudbin karaan qofka geystay dambiga.

| | |
|---|---|
| Gafka Kowaad: | Saddax maalin ilaa shan maalin ka-joojinta dibadda dugsiga. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Dareyeelka |
| Gafka Labaad: | Shan maalin ilaa toban maalin ka joojinta dibadda dugsiga. Dhageysiga ka-saaridda ee lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. |

QEYBTA SADDAXAAD:

Dagaalka/Weerarka Leys Dhaafsado iyo Garaaca:

Weerarka lagu qaado qofka iyo weerarka iyo garaaca loo geysto qofka waa dambi. Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxaa waajib ku ah in ay soo sheegaan dhamaan dambiyada ka dhaca gudaha hantida dugsiga, basaska dugsiga, ama munaasadaha la xariira dugsiga iyo/ama dugsiga ka yahay mas'uul iyo in la ogeysiiyo boliiska. Dhibbaneyaasha waxaa lagula tallin doonaa xaqa ay u leeyahiin in ay soo gdubiyaan ashtako dambi iyo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools) waxay ashtako dambi ka soo gudbin karaan qofka geystay dambiga.

| | |
|---|---|
| Gafka Kowaad: | Ilaa saddax maalin oo laga joojiyo dugsiga. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadinta kaddib marka lagu soo noqdo dugsiga. |
| Gafka Labaad: | Saddax ilaa shan maalin oo dugsiga laga joojiyo. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadin marka lagu soo noqdo dugsiga. |
| Gafka Saddaxaad: | Ka-joojinta dugsiga muddo shan ilaa toban maalin. Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. |

QEYBTA AFARAAD:

Dagaalka/Weerarka leys dhaafsado iyo garaaca gudaha fasalka, makhaayadda, meelaha leysugu yimaado, suramada, waqtiga haasaawaha, ama dheesha dugsiga, iwm. Muranka (ha ahaado jirka ama yuusan ahayn) wuxuu gudaha jawiga dugsigena ku abuuraa xaalad aan dagganeyn marka ay soo buttaacaan marka ay joogaan tiro badan oo ka tirsan dadka. Dabeecadaan ku dhisan carqaladeynta iyo waxyeelada waxaa loo baahan yahay in laga qaado talaabo dishibiliin adag. Tusaalooyin: waqtiga qadada gudaha makhaayadda, waqtiga kala dirista ama marka la soo gelaayo dhismaha, dheesha, munaasabadaha isboortiga ama isu imaasho kasta oo lagu qabto dugsiga ama munaasab la xariirto.

| | |
|---|---|
| Gafka Kowaad: | Ilaa saddax maalin oo laga joojiyo dugsiga. |

| | |
|---|---|
| | Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadinta kaddib marka lagu soo noqdo dugsiga. |
| Gafka Labaad: | Ka-joojinta dibadda dugsiga saddax maalin ilaa shan maalin. Shirka Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadin marka lagu soo noqdo dugsiga. |
| Gafka Saddaxaad: | Ka-joojinta dugsiga muddo shan ilaa toban maalin. Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. |

14.5 Kicinta Digniin Been ah

Ardayga geysto digniin been ah (macnaha cabsi gelinta bambka, jiididda stashanada, jiididda sanduuqa dabka ama cabsi gelin kasta ama shiddo kasta) taasoo carqaladeysa xerada dugsiga ama hawl ka socoto dugsiga ama munaasbo la xariirto dugsiga loona baahan yahay in ay ka jawaabaan waaxda booliiska iyo/ama waaxda dabka, waxaa la marin doonaa dishibiliin.  Ma aha in dabeecadda noocaas ay sabab u tahay carqaladeynta loo geysto dugsiga keliya, balse waxay kaloo halis gelin kartaa dadka ku sugan dugsiga iyo shaqaalaha ka jawaabo dabka iyo waaxda boliiska.  Sida waafaqsan, looma dul qaadan doono dhaqanka noocaas.

| | |
|---|---|
| Gafka Kowaad: | Shan maalin ilaa toban maalin oo laga meeleeyo ka-joojinta dibadda dugsiga. Dhageysiga Ka-saaridda ee lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. |

14.6 Siyaasadda Meelaha ka Madax Banaan Tubaakada

Sida waafaqsan Sharciga Baddalaadda Waxbarashada Massachusetts 1993, Qeybta 37H:  "Maamulaha dugsi kasta oo ka tirsan dugsiyada dagmada wuxuu daabici doonaa siyaasadaha dagmada ee la xariira dhaqanka macalimiinta iyo ardayda.  Siyaasadaha noocaas waxay mamnuuci doonaan isticmaalka maadooyinka tubaakada, gudaha dhismooyinka dugsiga, qeybaha dugsiga iyo ama gudaha xerada dugsiga ama basaska dugsiga, uu geysto qof kasta, kana mid ah shaqaalaha dugsiga. Mamnuuc ayay ka tahay in shaqaalaha, ardayda iyo xubnaha dadweynaha ay sigaar ku cabbaan, calaajiyaan ama is kale u isticmaalaan maadooyinka tubaakada, dhamaan dhismooyinka dugsiga dagmada.  Erayga "maadooyinka tubaakada" waxaa loola jeedaa tubaakada qaab kasta ha noqoto, kana mid ah balse kuma eka sigaarka, sigaarka buuran, tubaakada la jiido, tubaakada la calaajiyo, sigaarka-e, uumiyaha nikotiinka, maadooyinka tubaakada aan qiiqin iyo maadooyinka kale ee la midka ah.  Siyaasadaan waxay la xariirtaa dhamaan munsaasabadhaa dugsiga kafaalo qaado iyo/ama kuwa la xariiro dugsiga, sida cayaaraha atleetikada, haddii munaasabadahaas ka dhacaan xerada

iyo hantida dugsiga dagmada. Hantida dugsiga iyo/ama dhulka waxaa lagu sifeyaa dhamaan dhulka ilaa dhinacyada lagu socdo ee ku wareegsan dugsi kasta. Gaar ahaan, xerooyinka Cambridge Rindge iyo Latin School waxaa ka mid ah dhulka uu ku fadhiyo Maktabka Dadweynaha Cambridge ee loo haysto in ay yahiin dhulalka dugsiga xagga dhamaan siyaasadaha quseeyo ardayga. Sida ku saleysan daruufaha gaarka ee u saabsan jebinta sharuudahaan, waxaa dhici karto in ardayga lagu qaado dishibiliin iyo waxaa dhici karto in loo diro brograam magaalada u dagsan oo ku habboon aqoonta caafimaadka/brograamka aqoonta caafimaadka oo ku saabsan kaalmada tubaakada iyo/ama ku xadgudubka maadada.

## 15.0 KA-SAARIDDA DEGDEGGA

15.1 Ka Saarid Degdegga

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xilsaaray waxay si ku meel gaar ah ardayga uga saari doonaan dugsiga marka ardayga lagu soo eedeeyo gaf dishibiliin iyo joogitaanka sii socda ardayga ay halist ku tahay dadka ama hantida, ama maadiyan iyo si muuqata ay carqalad ku tahay nidaamka dugsiga, iyo hadba sida agaasimaha/madaxa qeybga sare dugsiga u gartaan, ma jirto talo kale oo la heli karo oo lagu yareeyo carqaaladda.  Fogeynta degdegga kama badan karo labo (2) maalin dugsiyeed, kuna xiga maalinta fogeynta degdegga, muddadaas agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay raaci doonaan habka ku qoran hoos Qeybta 15.2 Buugga.

15.2 Ogeysiinta Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka iyo Ardayga Ka Saaridda Degdegga

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xilsaaray ee soo ogolaada ka-saaridda degdegga wuxuu:

a. Isla markiiba ku dadaali doonaa sida macquulka ah in uu la xariiro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo in uu afka ka ogeysiiyo ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka degdegga ka-saaridd, baahida loo qabo degdegga ka-saaridda iyo dhamaan arrimaha kale ee ku qoran Qeybta 14.2(b)(i) – (vi) *Buuggaan*.

b. Ensure that no student is removed from school on an emergency basis for a disciplinary offense until adequate provisions have been made for the student’s safety and transportation.

c. Waxaad ogeysiis qoran siisaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga sida ku qoran kor Qeybta 14.2(b)(i)-(vi) Buugyarahaan.

d. In ardayga la siiyo fursad ay ku dhageystaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga sida waafaqsan qodobada Qeybta 16.2 ama 16.3 ee *Buuggaan* hoose, hadba sida loogu dabaqi karo, kaddibna la siiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka fursad ay ku tagaan dhageysiga ka hor inta aysan dhamaanin shanta (5) maalin dugsiyeed, haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga aysan ku heshiinin dheereynta waqtiga dhageysiga.

e. Afka oo laga soo saaro go'aan isla maalinta dhageysiga, iyo qoraal ahaan ugu dambeyn maalin dugsiyeedka ku xiga.

## 16.0 SHIRKA KA-JOOJINTA

16.1 Shirka Ka-Joojinta ee Lagu Qabto Gudaha Dugsiga

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ayaa ogeysiin doono ardayga dishibiliinka gafka iyo aasaaska eedeynta, kaddibna ardayga waxaa la siin doona fursad uu ku jawaabo. Haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga go'aan ku gaaro in ardayga uu geystay gafka dishibiliinka, agaasimaha wuxuu ogeysiin doonaa ardayga dhererka ka-joojinta gudaha dugsiga ee ardayga. Isla maalinta sida go'aanka ka-joojinta gudaha dugsiga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu sida macquulka ah ugu dadaali doonaa in uu afka ka ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah gafka dishibiliinka, asbaabta loo adeegsaday gabogabada in ardayga geystay jebinta sharciga, iyo muddada ka-joojinta gudaha-dugsiga. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu kaloo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ku soo dhaweyn doonaa shir si looga hadlo hawsha waxbarashada iyo dabeecadda ardayga, xiiladaha ka qeybgelinta ardayga, iyo jawaabaha suurtogalka ah ee laga bxiyo dabeecadda. Kullankaas waxaa la qaban doonaa maalinta la siiyay ka-joojinta haddii ay suurtogal tahay, iyo haddii aysan ahayn, ilaa sida suurtogalka ah kaddib. Haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uusan awoodin in uu la xariiro waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kaddib marka uu sameeyo kana reebo qoraal ugu yaraan labo (2) iskudayid in uu sidaas samayay, iskudayidda noocaas waxaa loo qaadan doonaa sida dadaal macquul ah in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka afka looga sheegay ka-joojinta gudaha-dugsiga.

Agaasimahyea/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay kaloo ogeysiis u diri doonaan ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka arrinta ku saabsan ka-joojinta dugsiga, kana mid ah sababta iyo dhererka ka-joojinta gudaha dugsiga, iyo in waalidiinta/ilaaliyeyaasha lagu soo dhaweeyo shir si looga hadlo shaqada uu ardayga ka qabtay aqoonta iyo dabeecadda, xiiladaha loo adeegsado ka-qeybgelinta ardayga, iyo jawaabaha suurtogalka ah ee laga bixiyo dabeecadda, haddii shirka noocaas uusan weli horay u dhicin. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay adeegsan doonaan warqadaha la diiwaan la xaqiijiyay,

warqadaha darajada kowaad, emailka laga haayo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka loona adeegsado isgaarsiinta dugsiga ama hab kale oo lagu gaarsiiyo, kana yahiin raali Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka. Muddada ka-joojinta, ardayga waxaa fursad loo siin doonaa in uu shaqeysto buundooyin, hadba sida lagu dabaqi karo, in uu gadaal ka sameeyo hawlaha, imtixanaadka, warqadaha la qoro, iyo shaqooyinka kale ee laga qabo dugsiga hadba sida loogu baahdo si uu u sameeyo horumarka waxbarashada muddada ka-joojinta gudaha dugsiga.

Sida waafaqsan sharciyada gobolka, ka-joojinta gudaha dugsiga muddo toban (10) maalin ama ka yar, isku xiga ama leysku daro muddo hal sanno dugsiyeed, looma qaadan doono sida ka-joojinta muddada gaaban. Hase ahatee, haddii ardayga la siiyo ka-joojinta gudaha dugsiga in ka badan toban (10) maalin, ka-joojinta noocaas waxaa loo qaadan doonaa ka-joojinta muddada dheer xagga habka fullinta, racfaanka iyo ujeedooyinka warbixinta.

16.2 Shirka Ka-Joojinta Muddada Gaaban

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ardayga ogeysiin doonaan gafka dishibiliinka iyo aasaaska eedeynta iyo macluumaadka kale ee munaasabka ah. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu kaga jawaabo iyo in uu soo bandhigo macluumaad, sida daruufaha yareeya, loona baahan yahay in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga tixgeliyo si uu u ogaado haddii ardayga uu geystay jebinta dishibiliinka iyo, haddii ay taasi jirto, ciqaabta ka dambeyso jebinta, kana mid ah waxyaabaha loo baahan yahay in laga qabto ee laga yaabo in ay ku habboon tahay. Sida ku saleysan macluumaadka la heli karo, kana mid ah yareyna daruufaha, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ogaan doonaan haddii ardayga uu geystay gafka dishibiliinka, iyo haddii ay sidaas tahay, sixitaanka ama ciqaabta la saari doono.

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ogeysiin doonaa go'aanka la gaaray iyo asbaabta ka dambeyso, iyo, haddii ardayga laga joojiyo, nooca iyo muddada ay socon doonto ka-joojinta. Muddada ka-joojinta, ardayga waxaa fursad loo siin doonaa in uu shaqeysto buundooyin, hadba sida lagu dabaqi karo, in uu gadaal ka sameeyo hawlaha, imtixanaadka, warqadaha la qoro, iyo shaqooyinka kale ee laga qabo dugsiga hadba sida loogu baahdo si uu u sameeyo horumarka waxbarashada muddada ka-joojinta gudaha dugsiga.
. Waa la soo qori doonaa go'aanka.

Haddii ardayga uu ku jiro brograamka ka horeeyo dugsiga ama darajooyinka xanaanada ilaa darajada saddaxaad, Agaasimaha wuxuu koobiga go'aanka oo qoran u diri doonaa Maamulaha, wuxuuna u sharaxi doonaa asbaabta loo saaray ka-joojinta dibadda dugsiga, ka hor inta aan la hirgelinin ka-joojinta

16.3 Shirka Ka-Joojinta Muddada Dheer

Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ardayga ogeysiin doonaan gafka dishibiliinka iyo aasaaska eedeynta iyo macluumaadka kale ee munaasabka ah. Ardayga waxaa la siin doonaa fursad uu kaga jawaabo iyo in uu soo bandhigo macluumaad, sida daruufaha yareeya, loona baahan yahay in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga tixgeliyo si uu u ogaado haddii ardayga uu geystay jebinta dishibiliinka iyo, haddii ay taasi jirto, ciqaabta ka dambeyso jebinta, kana mid ah waxyaabaha loo baahan yahay in laga qabto ee laga yaabo in ay ku habboon tahay. Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga joogaan, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka siin doonaan fursad ay kaga hadlaan dhaqanka ardayga iyo macluumaadka kale, sida daruufaha yareeya, ee loo baahan yahay in agaasimaha tixgeliyo ciqaabta la siiyo ardayga.

Intaas kaddib, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka wuxuu xaq u leeyahay, inta aan la gaarin dhageysiga, in uu helo fursad uu ku fiiriyo diiwaanka iyo warqadaha ardayga oo laga yaabo in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare isku haleeyo si uu u gaaro go'aanka ka-joojinta ardayga ama ka-joojin la'aanta ardayga; xaqa in uu mattalo qareen ama qof caadi ah uu ardayga soo xusho, kharashkana bixiyaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka; xaqa in uu la yimaado marqaatiyo iyo in uu soo bandhigo sharaxaad ku saabsan dhacdada la soo sheegay hase ahatee ardayga laguma khasbi karo in uu sidaas sameeyo; xaqa in uu su'aalo dadban weydiiyo marqaatiyada uu dugsiga la yimaado; iyo xaqa uu ku codsado in dhageysiga uu duubo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo in ardayga la siiyo koobiga maqalka ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka marka ay soo codsadaan. Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama ardayga codsadaan in la duubo dhageysiga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay dhamaan ka-qeybgaleyaasha ogeysiin doonaan ka hor inta aan la gaarin dhageysiga in la duubi doono dhageysiga iyo in koobi la siin doono ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kaddib marka ay soo codsadaan.

Sida ku saleysan caddeynta, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ayaa go'aan ka gaari doono haddii ardayga uu geystay gafka dishibiliinka, iyo haddii as sidaas tahay, kaddib marka la tixgeliyo xaaladaha yareeya iyo talooyinka ka-joojinta, toosinta ama ciqaabta loo baahan yahay in la saaro, baddelkii ama dheeraad ku ah ka-joojinta muddada dheer. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ogeysiin doonaa go'aanka la gaaray iyo asbaabta ka dambeyso, iyo, haddii ardayga laga joojiyo, nooca iyo muddada ay socon doonto ka-joojinta. Muddada ka-joojinta, ardayga waxaa fursad loo siin doonaa in uu shaqeysto buundooyin, hadba sida lagu dabaqi karo, in uu gadaal ka sameeyo hawlaha, imtixanaadka, warqadaha la qoro, iyo shaqooyinka kale ee laga qabo dugsiga hadba sida loogu baahdo si uu u sameeyo horumarka waxbarashada muddada ka-joojinta gudaha dugsiga. Waa la soo qori doonaa go'aanka. Go'aanka qoran waxaa loo diri doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, waxaana loogu

geyn doonaa gacanta, hubinta warqadaha lagu diro boostada, warqadaha lagu diro heerka kowaad, email ku socdo cinwaan ay keeneen waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka loona adeegsado isgaarsiinta dugsiga ama hab kale oo lagu geeyo kuna heshiyeen Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka.

Haddii go'aanka yahay in la siiyo ka-joojinta muddada dheer, go'aanka qoran wuxuu ku qornaan doonaa Ingiriisi iyo luqadda aasaasiga guriga haddii ay ka duwan tahay Ingiriisi, ama hab kale oo lagu gaarsiiyo, meesha ay ku habboon tahay, kaddibna wuxuu:

i. aqoonsan doonaa gafka dishibiliinka, taariikhda marka dhageysiga la qabtay, iyo ka qeybgaleyaasha dhageysiga.

ii. dajin doonaa xaqiiqada muhiimka ah iyo gabogabada uu gaaray Agaasimaha/Madaxa Sare Dugsiga;

iii. aqoonsan doonaa dhererka iyo taariikhda laga bilaabo ka-joojinta, iyo taariikhda lagu soo noqdo dugsiga;

iv. ku dari doontaa ogeysiis ku saabsan fursadda ardayga haysto in uu helo adeegyada waxbarashada si uu u horumar u gaaro muddada ka-joojinta;

v. ogeysiin doonaa ardayga xaq uu u leeyahay in uu racfaan ka qaato go'aanka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga una gudbiyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray kaddib marka uu soo gudbiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan racfaan muddo shan (5) maalin la shaqeeyo gudahooda laga bilaabo taariikhda fullinta ka-joojnta muddada dheer iyo in ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay codsan karaan kana heli karaan Maamulaha dheereynta waqtiga la gudbiyo ogeysiiska qoran ilaa todobo (7) maalin la shaqeeyo oo dheeraad ah iyo in ka-joojinta muddada dheer sii socon doonto haddii iyo ilaa Maamulaha ka baddalo go'aanka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga marka laga qaato racfaan.

Haddii ardayga ku jiro brograamka ka horeeyo dugsiga ama uu ku jiro xanaano ilaa darajada saddaxaad, Agaasimaha wuxuu koobi qoran oo ku saabsan go'aanka la gaaray u diri doonaa Maamulaha, wuxuuna u sharaxi doonaa asbaabta loo siiyay ka-joojinta dibadda dugsiga, ka hor inta aan la hirgelinin ka-joojinta.

Haddii shirka uu la xariiro ka-joojinta ilaa muddo aan la cayimin sida hoos timaado sharciyada M.G.L.c. 71, §37H½, kaddibna waa in la raaco hababka Qeybta 20.0.

## 17.0 RACFAANKA LAGA QAATO KA-JOOJINTA

17.1 Ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay codsan karaan racfaanka ka-joojinta marka ay soo gudbiyaan ogeysiis qoran oo ku saabsan racfaanka laga qaato Maamulaha ama qofka loo xilsaaray muddo shan (5) maalmaha kalendarka laga bilaabo taariikhda ka-joojinta iyo in ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay codsan karaan iyo waxay Maamulaha ka heli karaan waqti dheereen oo la xariira gudbinta ogeysiiska qoran ilaa todobo (7) maalmaha kalendarka oo dheeraad ah iyo in ka-joojinta sii shaqeyn doonto haddii iyo ilaa Maamulaha baddalo go'aanka Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga lacagana qaato racfaan. Haddii racfaanka aan la gudbinin waqti munaasab ah, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay diidi karaan racfaanka, ama waxay ogolaan karaan racfaanka, hadba sida ay u gartaan, haddi ay jirto sabab wanaagsan.

Haddii ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka codsadaan racfaan, waxaa la fullin doonaa muddo saddax (3) maalin gudahooda laga bilaabo codsiga, haddii ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka aysan codsanin dheereyn ilaa todobo (7) maalin dheeraad ah, markaas Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay siin doonaa dheereynta.

Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay si daacad ah ugu dadaali doonaan in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka lagu daro dhageysiga, waxaana loo qaadan doonaa in Maamulaha ama qofka loo xilsaaray si daacad ah ugu dadaalay haddii Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ku dadaalay in uu maalin iyo waqti u qabto dhageysiga u ogolaan doono Maamulaha ama qofka loo xilsaaray iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay ka soo geybgalaan. Maamulaha ama qofka uu u xilsaaray waxay ogeysiis qoran u diri doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qaban doono dhageysiga.

Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay fullin doonaan dhageysiga si loo ogaado haddii ardayga uu galay gafka dishibiliinka ee ardayga lagu soo eedeyay, iyo haddii ay sidaas tahay, waxa ciqaabta noqon doonto. Maamulaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu isku soo dabaridi doonaa duubitaanka dhageysiga, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha waxaa la siin doonaa koobi marka ay codsadaan. Maamulaha wuxuu ogeysiin doonaa dhamaan ka-qeybgaleyaasha in la duubi doono dhageysiga iyo in koobi la siin doono ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka kaddib marka ay codsadaan.

17.2 Fiirinta Caddeynta

a. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay marka hore la hadli doonaan Maamulaha iyo/ama qofka loo xilsaaray kaddibna waxay soo koobi doonaan caddeynta lagu soo bandhigay dhageysiga. Ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka

iyo/ama wakiilka (kana mid ah qareenka) wuxuu markaas weydiin karaa Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray su'aalo ku saabsan caddeynta iyo habboonaanta ciqaabta.

b. Ardayga wuu joogi doonaa inta dhageysiga socdo, waxaa lala socodsiin doonaa eedeynta, iyo wuxuu dhageysan doonaa dhamaan caddaynta la soo bandhigay ee ka soo horjeedo ardayga, marka laga reebo ardayga lana haysto ogolaashada waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama wakiilka waqtiyada marka dhibatooyinka cilmu nafsiga ama caatifadda laga hadlo.

c. Ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama wakiilka waxaa loo ogolaan doonaa waqti macquula ah oo ku filan ka hor inta aan la qabanin dhageysiga si loo fattasho diiwaanka ardayga oo idil, kana mid ah war kasta oo ku saabsan dhaqanka ardayga.

d. Si loo fulliyo dhageysiga, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ma aha in uu ku qasban yahay sharciyada caddeynta ama hababka kale ay maxkamadda ku shaqeyso, wuxuuna awood u leeyahay in uu u yeero iyo in uu su'aal weydiiyo marqaatiyada loo arko in ay munaasab yahiin.

e. Maamulaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu dalban karaa in uu joogo qareenka sharciga si uu la-talliye ugu noqdo shaqaalaha dugsiga ama si uu ula talliyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray xagga fullinta dhageysiga. La-talliye kasta oo la taliya Maamulaha ama qofka loo xilsaaray fulinta dhageysiga ma aha in uu dhagmi doono sida la-talliyaha shaqaalaha dugsiga; hase ahatee, shaqaalaha dugsiga waxay xaq u yeean doonaan in ay la yimaadaan qareenka sharciga.

17.3 Go'aanka

a. Maamulaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu qori doonaa natiijadaha, koobiyada waxaa lagu dari doonaa diiwaanka ardayga kaddibna waxaa loo diri doonaa ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/biixiyeyaasha daryeelka iyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga. Hase ahatee, haddii Maamulaha ama qofka loo xilsaaray go'aan ku gaaraan in aan la jebinin *Buuggaan* ama in aan leysku dayin talooyin kale oo ku saabsan ka-reebid loona tixgelinin is taxadir leh, ma jrio wax qoraal ah oo ku saabsan ka-joojinta oo la gelin doono diiwaanka ardayga ama loo gudbin doono qof kale marka laga reebo kuwa xaqa u yeesha in ay helaan koobi sida hoos timaada Sharciyada Diiwaanka Ardayga (Student Record Regulation) (**LIFAAQA A**). Haddii ka-joojinta aan si buuxdo loo siinin Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay go'aan ku gaari doonaan in ardayga degdeg dib loogu ogolaado iyo waxay codsan doonaan in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga tagaan

kullanka shirka dib u gelinta ee lala yeesho Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga lana xariira dib u gelinta.

b. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu warbixin qoran ka diyaarin doonaa hawsha gadaal laga sameeyo, wuxuuna u diri doonaa Maamulaha ama qofka loo xilsaaray.

c. Dhamaan kiisaska marka Maamulaha uusan ahayn sarkaalka dhageysiga, qofka uu Maamulaha u xilsaaray ee u fadhiistay sida sarkaalka dhageysiga wuxuu qoraal ka diyaarin doonaa xaqiiqada, sida aasaaska go'aanka. Kiisaska qaar marka Maamulaha fadhiisto sida sarkaalka dhageysiga, waxaa lagu dabaqi doonaa qodobada qeybta 17.3, marka laga reebo marka habab kale sida ku qoran qeybaha 20 ilaa 23 *Buuggaan* lagu dabaqi doono. Muddo afartan iyo sideed (48) saac gudahooda, dhageysiiska kaddib, ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, la-talliyaha ardayga ama wakiilka waxaa loo diri doonaa koobiga natiijada, haddii uu jiro, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo Maamulaha. Dhamaan daruufaha marka sarkaalka dhageysiga uusan ahayn Maamulaha, natiijada waxaa ka mid noqon doono oraah qoran oo ogeysiineyso ardayga xaqa uu u leeyahay in uu racfaan ka qato go'aanka sarkaalka dhageysiga.

d. Haddii ay dhacdo in ardayga doono in uu racfaan ka qaato go'aanka sarkaalka dhageysiga, racfaanka ardayga waa in loo gudbiyo sarkaalka dhageysiga muddo shan (5) maalin dugsiyeed kaddib marka uu helo go'aanka sarkaalka dhageysiga. Kaddib marka la helo codsiga racfaanka baaraha wuxuu Maamulaha u gudbin doonaa koobiga natiijadha iyo diiwaanka dhageysiga si uu u fiiriyo. Ardayga wuxuu heli karaa diiwaanka dhageysiga kaddib marka uu codsado iyo kharash la'aan. Ardayga wuxuu warar qoran iyo dood u soo gudbin karaa Maamulaha iyo/ama wuxuu codsan karaa in uu shir la qaato Maamulaha.

e. Maamulaha wuxuu u diri doonaa ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, wakiilka ardayga, haddii uu jiro, iyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, go'aan qoran muddo shan (5) maalin la shaqeeyo gudahooda kaddib marka la dhageysto racfaanka go'aankaas oo xaqiijin doono, ka sare mari doono, ama si kale wax ka baddali doono go'aankii la soo dhaafay. Maamulaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu kaloo codsan karaa in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga tagaan kullanka shirka dib ugu soo noqoshada ee lala yeesho Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga muddada ka-joojinta. Go'aanka Maamulaha wuxuu ahaan doonaa go'aanka ugu dambeeyo dugsiga dagmada xagga ka-joojinta

f. Mar kasta uu dhageysi, racfaan ama go'aanka maamulka aan rasmiga ahayn go'aamiyo in ardayga uusan geysanin gaf lagu eedeyay ardayga, dhamaan tixraaca dhacdada iyo dacwadaha dishibiliinka waa in laga saaro diiwaanka ardayga. Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay qoraal ku ogeysiin doonaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga in diiwaanada la xariira dhacdada iyo dacwadaha dishibiliinka la saaray.

g. Maamulaha ama qofka loo xilsaaay wuxuu, sida hoos timaado sharciyada u dagsan Guddiga Waxbarashada Gobolka (State Board of Education), in ay hayaan diiwaanada ka-joojinta (macnaha, diiwaan) qora liiska magacyada, taariikhda iyo muddada ay socoto iyo asbaabta ka dambayso. Hase ahatee diiwaanka noocaas, haddii loo bandhigo dadweynaha, ma kashifi doonto aqoonsiga ardayga ma qoyska ardayga.

## 18.0 WAXBARASHADA KHAASKA/HABABKA DISHIBILIINKA QORSHAHA 504 (504 PLAN DISCIPLINE PROCEDURES)

18.1 Ardayda itaalka darran, sida ku sifeysan sharciyada federaalka iyo gobolka iyo xeerarka, waxay hoos imaan doonaan sharciyada *Buugaan*, haddii aan si kale looga hadlin qeybtaan.

18.1.1 Brograamka Waxbarashada Ku Kooban Qofka (Individual Education Program) (IEP) iyo/ama Qorshaha 504 (504 Plan) ee loogu talogalay arday kasta oo xaq u yeesha wuxuu muujin doonaa haddii ardayga laga filan karo in uu la kulmo xeerka dishibiliinka caadiga sida ku qoran *Buuggaan* ama haddii itaal darrida ardayga u baahan tahay in wax laga baddalo xeerkaan dishibiliinka ama mid kasta oo ka mid ah sharciyada ku saleysan dugsiga. Baddalaad kasta oo loo baahan yahay in lagu sameeyo xeerka dishibiliinka ama sharciyada ku saleysan dugsiga waxaa lagu qori doonaa IEP_da ardayga iyo Qorshaha 504.

18.1.2 Haddii itaal darrida ardayga saameyso dabeecadda ardayga, dabeecadaha noocaas waxaa wax looga qaban doonaa habka TEAM.

18.1.3 Sida la xariirta qaadashada go'aanka maamulka sida hoos timaada Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (ama qofka loo xilsaaray) wuxuu ogeysiin doonaa Xafiiska Adeegyada Ardayga (ama qofka loo xilsaaray) gafka laga dhaafi karo ardayga itaalka darran kaasoo IEP loo sameyay iyo/ama Qorshaha 504 uusan muujinin baahida loo qabo in baddalaadda lagu sameeyo xeerka dishibiliinka ee ku qoran *Buuggaan* ama sharciyo kasta oo ku saleysan dugsiga, iyo koobiga ogeysiiska ka-joojinta loo gudbin doono Xafiiska Adeegyada Ardayga.

18.2 Shaqaalaha ka socda Xafiiska Adeegyada Dugsiga (Office of Student Services) waxay ku lug yeelan doonaan dhamaan go'aanada maamulka ee hoos yimaado *Buuggaan* kuna lug leh ardayda itaalka darran.

18.2.1 Haddii go'aanka maamulka ee hoos yimaado *Buuggaan* uusan saamaynin meeleynta ardayga iyo/ama uusan dhallinin ka-joojinta marka leysku daro in ka badan toban (10) maalin dugsiyeed halkii sanno dugsiyeed, looma baahna shirka TEAM.

18.2.2 Haddii go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buuggaan* saamayn doono meeleynta ardayga iyo/ama uu dhallin doono iskudarka ka-joojin ka badan toban (10) maalin dugsiyeed muddo hal sanno dugsiyeed, waxaa loo baahan yahay in la qabto shirka TEAM ka hor inta aan la gaarin go'aanka maamulka in la saaro dishibiliin.

18.3 Ka hor inta uusan gaarin go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buuggaan*, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu go'aan ka gaari doonaa haddii ardayga loo aqoonsaday in uu yahay arday itaal darran iyo haddii kale ama haddii loo dirray qiimeynta waxbarashada khaaska balse aan weli la ogaanin in uu xaq u leeyahay.

18.3.1 Ardayga aan loo arkin in uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira iyo ka qeybgalay dabeecad jebisay sharciga ama xeerka aadaabta wuxuu ku adkeysan karaa badbaadinta uu ka helo sharciyada waxbarashada khaaska ee gobolka iyo federaalka ka hor inta dabeecadda ka dambaysay talaabada dishibiliinka.

a. Waaxda dugsiga waxaa loo haystaa in ay ogsoon tahay in ardayga uu yahay arday qaba itaal darri haddi ka hor dabeecadda dhallisay talaabada dishibiliinka lala kulmay waxa soo socda:

(i) Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay arrimo qoran u soo jeediyeen shaqaalaha kormeerka ama maamulka ama macalinka cunugga in ardayga u baahan yahay waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira; ama

(ii) Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay codsadeen qiimeynta ardayga; ama

(iii) Macalinka ardayga ama shaqalaha kale dugsiga waxay soo jeediyeen arrin tilmaaman oo ku saabsan sasaanka dabeecadda uu ardayga si toos ah u muujiyay agaasimaha Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) ama shaqaale kale oo ka tirsan kormeerka Xafiiska Adeegyada Ardayga.

b. Waaxda dugsiga waxaa loo haystaa in aysan xogogaal u ahayn in ardayga uu yahay arday qaba itaal darri haddii:

(i) Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ma ogolaanin qiimeynta ardayga; ama

(ii) Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay diideen adeegyada ardayga; or

(iii) Ardayga waa la qiimeyay, waxaana loo arkay in uusan xaq u lahayn waxbarashada khaaska. waxbarashada iyo adeegyada la xariira.

c. Haddii waaxda dugsiga aan loo arkin in ay ogsoon tahay in ardayga uu yahay arday qaba itaal darri, waxaa dhici karto in ardayga la saaro dishibiliin sida hoos timaado xeerka dishibiliinka ku qoran *Buuggaan* marka laga reebo sharuudaha soo socda ee lagu dabaqi karo:

(i) Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga codsadaan qiimeynta muddada ardayga loo geysto dishibiliin, markaas qiimeynta waa in loo fulliyo si degdeg ah; iyo

(ii) Ilaa laga dhamaystiro qiimeynta, ardayga waa in uu ku sugnaado meeleynta waxbarashada ay soo dajiyeen madaxda dugsiga.

18.4 Haddii go'aanka maamulka sida hoos timaado *Buuggaan* saamayn doono meeleynta ardayga iyo/ama maka iskudarka ka-joojinta muddo ka badan toban (10) maalin dugsiyeed muddo hal sanno dugsiyeed iyo/ama dhalliso ka-saarid, waxaa lagu dabaqi doonaa qodobada soo socdo:

18.4.1 Dugsiga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga iyo xubnaha kale ee quseeyo TEAM_ka ardayga waxay fiirin doonaan waxa ardayga muujiyo si loo ogaado haddii dabeecad xumada ardayga tahay mid muujisa itaal darrida ardayga. Si ay u gaarto go'aankaan, TEAM waxay tixgelin doontaa haddii: (a) dhaqanka su'aasha ka taagan tahay ka dambeeyo, ama uu toos xariir ula leeyahay itaal darrida cunugga; ama (b) dhaqanka su'aasha ka taagan tahay uu toos uga dhashay fullin la'aanta IEP_da ardayga iyo/ama Qorshaha 504. Sida ku xeran natiijada ka soo baxda go'aanka, waxaa dhici karto in la fulliyo iyo in aan la fullinin talaabada dishibiliinka la soo jeediyay.

18.4.2 Haddii TEAM go'aansato in dhaqanka ardayga yahay mid muujiya itaal darrida ardayga, ardayga waxaa lagu soo celin doonaa meeleynta laga

waday ardayga haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo dugsiga dagmada ku heshiyaan isbaddalka meeleynta taasoo qeyb ka ah qorshaha faragelinta dabeecadda ardayga. Intaas kaddib, TEAM waa in ay qaado talaabooyin degdeg ah si ay wax uga qabato waxa ka dhiman IEP_da ardayga iyo/ama Qorshaha 504, meeleynta ama fullinta sida waafaqsan sharciyada iyo xeerka lagu dabaqi karo ee gobolka iyo federaalka, kana mid ah fullinta qiimeynta dabeecadda shaqada ee ardayga, hase ahatee qiimeynta noocaas waa in ay tahay mid aan horay loo fullinin ka hor inta aysan dhicin dhaqanka u horseeday shirka lagu ogaado muujinta dabeecadda; iyo in la fulliyo qorshaha faragelinta dabeecadda lana baddalo hadba sida lagama maarmaanka ah qorshaha faragelinta dabeecadda jirta ee ardayga.

18.4.3 Haddii TEAM go'aan ku gaarto in dhaqanka ardayga uusan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga:

a. Kooxda waxay soo saari doontaa qorshe kale oo ardayga siiso waxbarashada dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan ah;

b. TEAM waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga u soo bandhigi doontaa qorshe kale iyo ogeysiis qoran sida hoos timaado sharciyada gobolka iyo federaalka iyo xeerka. Diidmada ama marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha ku guul dareystaan in ay ogolaadaan bixinta adeegyada hoos yimaada qorshe kale, taasi ma hor istaagi karto joojinta in la fulliyo

c. Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga codsadaan dhageysi la hor dhigo Waaxda Waxbarashada Massachussetts Xafiiska Racfaanka Waxbarashada Khaaska (Massachusetts Department of Education Bureau of Special Education Appeals), muddada ku meelgaarka, ardayga wuxuu sii wadi doonaa meeleynta waxbarashada kale uu dugsiga aqoonsaday taasoo ka dambeyso go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buuggaan* ilaa laga gaaro dhicidda qodobka dishibiliinka ama ammar uu soo saaro sarkaalka dhageysiga oo wax ka baddala meeleynta ardayga, hadba midka soo hor mara.

18.4.4 Dhamaan xaaladaha marka isbaddal ku yimaado meeleynta ama ka-joojin muddo toban (10) maalin dugsiyeed ama ka badan la saari doono, ardayga waa in la siiyo waxbarasho dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan aha.

Shaqaalaha dugsiga waxay tixgelin karaan daruufaha gaarka hadba sida kiisku yahay marka la rabo in go'aan laga gaaro haddii loo baahan yahay in la soo saaro ammar ku saabsan baddalaadda meeleynta ardayga jebyay xeerka asluubta.

18.4.5 Muddo toban (10) dugsiyeed gudahooda, taariikhda go'aanka maamulka kaddib, si looga qaato talaabo dishibiliin, waxaa dhici doono waxa soo socdo:

a. kooxda (TEAM) waa in ay isu timaado si ay u fulliso qiimeynta dabeecadda hawlgalka ardayga, haddii qiimeyntaas aysan horay u dhicin.

b. TEAM waa in ay fulliso qorshaha faragelinta dabeecadda ardayga haddii qorshaha noocaas aan la fullinin ka hor inta aan la gelin dabeecadda ka dhallatay dishibiliinka; ama

c. kooxda TEAM waa in ay fiiriso, waxna ka baddasho qorshaha faragelinta dabeecadda ee loogu talogalay ardayga haddii qorshaha noocaas la fulliyay ka hor dabeecadda ka dhallatay dishibiliinka.

18.4.6 TEAM waxay go'aamin kartaa in isbaddal lagu sameeyo oo ardayga lagu meeleeyo, ha haysato ama yeysan haysanin ogolaashada waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, waxbarsho ku meel gaar ah muddo aan ka badneyn afartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed, ilaa laga helo waxbarashada dadweynaha ku meel gaar ah xagga mid ama ka badan xaaladaha soo socda:

a. ardayga uu qori u soo qaato dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga;

b. marka arkayga isaga oo ogsoon haysto, isticmaalo, iibiyo ama dalbado iibinta mukhadaraad sharci darro ah iyo/ama maado la kantaroolo inta lagu sugan yahay dugsiga ama la haayo  hawsha dugsiga; ama

c. marka ardayga uu dhaawac halis ah u geysto qof kale inta uu joogo dugsiga, ku sugan yahay xerada dugsiga, ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga.  "Halista dhaawaca jirka" waxaa si gaar ah loogu sifeyaa in ay ku lug leedahay halis la taaban karo dhallin kara dhimasho, xanuun badan oo ku yimaada jirka, haleyn loo geysto muuqaalka muddo dheer ama iska cad ama muddo dheer la lumiyo ama la naafeeyo hawsha ay qabato xubin ka tirsan jirka, xuhin ama awoodda madaxa.

18.4.7 Dugsiga wuxuu kaloo amar ka raadsan karaa Xafiiska Racfaanada Waxbarashada Khaaska ee Waaxda Waxbarashada Massachusetts si ardayga looga saaro ilaa afartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed lana geeyo waxbarasho kale oo ku meel gaar ah haddii dugsiga go'aan ku gaaro in haddii loo dhaafo in uu si joogo meesha uu iminka ku sugan yahay, in taasi dhallin karto in dhaawac uu soo gaaro ardayga ama dadka kale.

## 19.0 SIYAASADDA KA-SAARIDDA -- Hubka, Mukhadaraadka iyo Weerarka

19.1 Waa siyaasadda u dagsan Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Commitee) in mar kasta lagu dadaalo in la kaalmeeyo ardayda si ay u xalliyaan dhibatooyinkooda asluubta iyagoo aan u leexanin isticmaalka dishibiliinka xag jirka, ka-joojinta waa in mar kasta loo qaato sida talaabada ugu dambeyso iyo in mar kasta la tixgeliyo talooyinka kale ee la xariira ka-joojinta. Tusaalooyinka noocyada faragelinta ee laga yaabo in la adeegsado ka hor inta aan lagu dhaqaaqin ka-joojinta ardayga waxaa ka mid ah, balse kuma eka, kuwa soo socdo: raali gelin, magta oo la bixiyo, u dirista/adeegyada bulshada, dhexdhexaadinta qilaafka, ka wada hadalka caddaaladda, sixidda hawsha, la-tallinta, ka reebidda hawlaha dugsiga, xayiraadda qadada, tixraacinta dishibiliinka xafiiska, fogeynta dibadda fasalka, xariirinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, shirka waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, luminta axsaanka, heshiiska ardayga, tixraacinta Kooxda Taageerada Ardayga (Student Support Team) (SST) xagga faragelinta, heshiiska dabeecadda ardayga, qorshaha taageerada dabeecadda, shirka macalinka ee lala yeesho waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, shirka macalinka ee lala yeesho waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga, shirka macalinka ee lala yeesho ardayga, digniinta, ka-joojinta gudaha dugsiga iyo/ama ka-joojinta dibadda dugsiga. Intaas kaddib, xaaladaha qaar, waxay lagama maarmaan u noqon kartaa agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga in ay ka fakaraan haddii ay habboon tahay in ay warbixin u gudbiyaan Waaxda Caruurta iyo Qoyska ee Massachusetts (Massachusetts Department of Children and Families) xagga jebinta hoos timaada qodobada siyaasaddaan. Hase ahatee, waa in la xasuusto in liiskaan faragelinta uusan ahayn mid dhamaystiran in faragelin kasta oo la soo qoray loo adeegsado xaalad kasta, baddelkii, faragelinta la adeegsado la xariiraan cuslaanta jebinta. Hase ahatee, kiisaska noocaas marka dabeecadda ardayga ay carqalad ku tahay dugsiga, waxyeelo gaarsiisa ardayga ama dadka kale ama ku dhaqaaqo waxyaabo ay mamnuuceen sharciyada Barwaaqo Sooranka Massachusetts, markaas waxaa loo baahan yahay in la raaco dishibiliinka. Sida ku saleysan daruufaha gaarka oo la xariira sharuudahaan, waxaa dhici karto in ardayga la saaro dishibiliin iyo waxaa kaloo dhici karto in loo diro brograamka waxbarashada magaalada/caafimaadka ee ku habboon.

Sharciga Horumarinta Waxbarashada 1993 ee Barwaaqo Sooranka Massachusetts (Commonwealth of Massachusetts Educational Reform Act of 1993) wuxuu qabaa in arday kasta oo ku sugan xeryaha dugsiga ama munaasbo uu dugsiga kafaalo qaaday ama la xariirto dugsiga, kana mid ah cayaarta atleetikada, oo haysta hub halis ah ama haysta maado la kantaroolo sida ku sifeysan Cutubka 94C, kana mid ah, balse ku ekeen, qamro, xashiis, kokaine, mukhadaraad iyo "heroin, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ku xakumi doonaan in laga saaro dugsig. Intaas kaddib, arday kasta oo weerar ku qaada Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha, farsama yaqaanka ama xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha kuna sugan xerada ama munaasbadaha dugsiga kafaalo qaaday ama la xariira dugsiga, sida cayaaraha

atleetikada, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu ka saari karaa dugsiga ama dugsiga dagmada.

Arday kasta oo laga joojiyo dugsiga sida hoos timaado sharciyada M.G.L.c. 71, §37H wuxuu la siin doonaa fursad uu ku helo adeegyada waxbarashada iyo in uu horumar ka gaaro waxbarashada inta ay socoto ka saaridda sida ku qoran hoos Qeybta 21.

Xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha oo arka ama la socda weerarka noocaas waa in uu isla markiiba ogeysiiyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

Sidaas darteed, siyaasadaan waxay quseysaa milkiyadda hubka halista, milkiyadda maadooyinka la kantaroolo, iyo weerarada ay ardayda u geystaan shaqaalaha.

Arday kasta oo laga joojiyo dugsiga sida hoos timaado sharciyada M.G.L.c. 71, §37H waxaa la siin doonaa fursad uu ku helo adeegyada waxbarashada iyo in uu horumar ka gaaro waxbarashada inta uu ku sugan yahay muddada ka-saaridda sida ku qoran qodobada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan*.

19.2 Hubka

In hub la keeno dugsiga, in hub la isticmaalo gudaha xerada dugsiga ama lala yimaado hawll ka socoto dugsiga, ama hub la gashado qaanadaada, ama inta aad ku sugan tahay dugsiga, baska, ama aad joogtid hawl ka socoto dugsiga kaddib, waa gaf culus waa mid ka soo horjeedo sharciyada iyo xeerarka dugsiga. **Waxay kaloo ka soo horjeedaa sharciga.** Waxaa jira saddax nooc oo hub ah:

a. Kuwa "sharci ahaan halis ah," kana mid yahiin hubka ka soo horjeedo sharciga lahaashada, sida shay kasta oo la qaato loona adeegsado siyaabo lagu cabsi geliyo ama ujeedada tahay in qof kale loo geysto waxyeelo, waxaa loo haystaa in uu yahay hub halis ah. "Hubka Sharci ahaan Halista ah" waxaa ka mid ah, balse kuma eka, kuwa soo socda:

i. nooc kasta hubka xabbadda ka dhacdo, kana mid ah qoryaha BB iyo qoryaha hawada,

ii. middi kasta oo labo af leh, middida battanka ama middi kasta oo ku shaqeyso qalabka moolada automatigga taasoo middida ka sii daysa gacan qabadka; middiyada fiiqan ama ableey,

iii. biraha lagu feertamo, "nunchaku", "shuriken" ama shay kasta oo fiiqan lana mid ah shay u shabaha xidigga oo loogu talogalay in uu dhaawaco qof marka lagu tuuro,

iv. turub, qoryaha "blow gun",

v. suunka gacanta ee ka sameysan maqaar oo lagu suray mudacyada birta, buundooyinka ama tiirarka; qalab kasta oo la mid ah lagana sameyay maado kale,

vi. biraha "mace", qiiqa ilmeeya, ama maado kasta oo loo adeegsado si qofka loo itaal dareeyo qof kale,

vii. dabka ama nooc kasta waxyaabaha qarxa,

viii. dhamaan hubabka kale sida ku sharaxan Guudka Massachusetts (Massachusetts General) Sharciyada, Cutubka 269, Qeybta 10.

b. Waxaa jira waxyaabo kale oo la mamnuucay, inkastoo aan lagu sifeynin in ay yahiin hub sida hoos timaado Sharciyada Guud ee Massachussetts (Massachusetts General Laws), Cutubka 269, Qeybta 10, aan loo ogoleyn xerada dugsiga, munaasabadaha dugisiga kafaalo qaado, iyo/ama munaasabadaha la xariiro dugsiga, sida cayaaraha atleetikada. Haysashada ama isticmaalka waxyaabahaas la soo sheegay aan macno u lahayn ardayga gudaha dugsiga loona ogol yahay xerada dugsiga, munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday iyo/ama munaasabadaha la xariira dugsiga, kana mid ah cayaaraha atleetikada:

i. middiyada nooc kasta, qaab, ama dherere; kana mid ah middiyada silsiladda furaha, middiyada leysku laabo,

ii. sakiinta cabbir kasta

iii. xiireyaasha, muduca lagu jaro baakooyinka

iv. silsilado, karbaash ama bir kasta oo kale, aan lahayn ujeedo waxbarasho shay kasta oo kale aan lahayn isticmaal macquul ah xagga dugsiga, ama xerada dugsiga, iyo/ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday iyo/ama munaasbadaha la xariira dugsiga, sida cayaaraha atleetikada.

c. Waxyaabaha kale ee caadiga ah ama waxyaabaha loo adeegsado habka halista ama cabsi gelinta. Waxyaabaha noocaas waxaa ka mid ah: laabisyada, maqasta, cirbadaha iyo biinanka, masaamiirta, qalabka hawlaha looxa, iwm. Isticmaalka waxyaabaha noocaas, oo ku dhisan cabsi gelin iyo halis, waxay dhallin kartaa in laga joojiyo ama laga saaro dugsiga. Intaas kaddib, ka qeybgalka ama iskudayidda farsamo atleetiko halis ah oo halist gelisa caafimaadka ama ammaanka qofka, sida

isticmaalka koofida adag ama qalab kasta oo loo adeegsado isboortiga sida hub, taasi waxay dhallin karta ka-joojin ama ka-saaridda dugsiga.

**XASUUS: Waxyaabaha lagu cayaaro ama shabahaad laga sameeyo hub nooc kasta, kana mid ah qoryaha iyo middiyada, looma ogola xeryaha dugsiga, dhulka dugsiga, baska gudahiisa ama munaasbadaha dugsiga kafaalo qaaday iyo/ama munaasbadaha la xariira dugsiga, kana mid ah cayaaraha atleetikada. Waxyaabaha sida kuwaan waa lala wareegi doonaa, waxayna dhallin karaan ka-joojin ama ka-saarid haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama Kaaliyaha Agaasimaha u gartaan in la jebiyay siyaasaddaan.**

19.3 Ku Xadgudubka Mukhadaraadka/Maadada

Siyaasadda ku qoran hoos waa talaabo maamul uu soo ogolaaday Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee). Lama ogola in tilmaamahaan la baddalo si loo waafajiyo dacwado kale oo la xariira sharciga kana dhasha baaritaanada ay fulliyaan Waaxda Boliiska Cambridge (Cambridge Police Department) ama wakaaladaha kale ee qaabilsan hirgelinta sharciga. Siyaasaddaan waxaa loola jeeda in lagu kaalmeeyo shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Cambridge si ay u soo saaraan go'aano ku saabsan gaffeyaasha siyaasadda la soo sheegay mana aha in ay jebiso xuquuqda ardayga bacdamaa ay la xariiraan 603 C.M.R. 28.00 iyo sharciyada iyo xeerarka kele ee u dagsan gobolka Massachusetts.

Arday kasta oo jooga xerada dugsiga ama munaasabo dugsiga kafaalo qaaday ama munaasbo la xariirta dugsiga, sida cayaaraha atleetikada, oo haysta maado la kantaroolo sida ku sifeysan Cutubka 94C kana mid ah, balse ku ekeen, qamro, hashiish, cocaine ama heroin, wuxuu Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ka saari karaa dugsiga ama dugsiga dagmada.

Intaas kaddib, marka la fiiriyo xaqiiqada in isticmaalka qamrada halis geli karto caafimaadka iyo ammaanka qofka isticmaala, ana aqoonsiga waxyeelada la xariira isticmaalka cabbitaanka qamrada ku yeelan karto nidaamka guud iyo dishibiliinka, Guddiga Dugsiga wuxuu mamnuucay isticmaalka, siinta, ama qaadashada cabbitaanka qamrada lagu cabbo hantida dugsiga ama xaflad dugsiga leeyahay.

Intaas kaddib, arday kasta, iyadoo aan la fiirinin da'da, oo soo cabbay cabbitaanka qamrada kuna sugan xerada dugsiga, ka hor inta uusan imaanin, ama ka qeybgelin, hawl dugsiga kafaalo qaaday, sida munaasabadaha atleetikada, waxaa laga mamnuuci doonaa hawshaas kaddibna waxaa la saari doonaa, waxaana la saari doonaa dishibiliin sida lagu tafatiray *Buuggaan*. Intaas kaddib, arday kasta, iyadoo aan la fiirinin da'da, oo lagu helo in uu haysto, isticmaalo, joogaan, qeybinta ama iibinta cabbitaanka qamrada inta ay ku sugan yahiin xerada dugsiga, ka hor inta aysan imaanin, ama ka qeybgelin, hawl dugsiga kafaalo qaaday, sida

munaasabadaha atleetikada, waxaa lagu qaadi doonaa talaabo dishibiliin sida ku tafatiran *Buuggaan*.

Arday kasta oo laga joojiyo dugsiga sida hoos timaado sharciyada M.G.L.c. 71, §37H waxaa la siin doonaa fursad uu ku helo adeegyada waxbarashada iyo in uu horumar ka gaaro waxbarashada inta uu ku sugan yahay muddada ka-saaridda sida ku qoran qodobada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan*.

19.4 Sifeynta Mukhadaraadka/Ku Xadgudubka Maadada

a. Marka lagu hawlan yahay maado la kantaroolo iyo/ama maado halis ah taasi macnaheeda wuxuu yahay in ardayga lagu arkay agagaarka u dhaw meesha laug iibiyo, qeybiyo, isticmaalo ama lagu haysto maado la kantaroolo, maado la kantaroolo lana qorin, mukhadaraadka maandooriyaha, mukhadaraadka lagu waasho, amphetamine, barbiturate, xashiish, opiod, cabbitaanka qamrada ama nooc kasta saqradda xerada dugsiga ama inta la hoos yimaado awoodda dugsiga ama iibinta, qeybinta, isticmaalka, ama haaysashada qalabka mukhadaraadka "paraphernelia" lagu haaysto xerada dugsiga ama inta la hoos yimaado awoodda dugsiga meesha lagu isticmaalay maadada la kantaroolo iyo/ama maadada halista, la ogaaday, ama lala wareegay; lana samaynin iskudayid macquul ah in meesha laga tago. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in ardayga lagu arko in uu joogo meel lagu hayso maado la kantaroolo iyo/ama maado halis ah haddii ardayga laga arko in uu socdo suranka dugsiga lana joogo hal arday ama ka badan oo si firfircoon ku lug leh iibinta, qeybinta, isticmaalka iyo/ama haysashada maado la kantaroolo, maado aan loo qorin oo la kantaroolo, mukhadaraadka maandooriyaha, mukhadaraadka maandooriyaha, amphetamine, barbiturate, xashiish, opioid, cabbitaanka qamrada ama nooc kasta cabbitaanka lagu mirqaamo, ardaygana la socdo arday ku lug leh dhaqanka la mamnuucay kaasoo aan samaynin iskudayid macquul in uu meesha ka tago. Marka lagu sheego erayo kale, ardayga wuu la socdaa jebinta xeerka asluubta ee meesha ka socda, wuxuu sii wadaa in uu sii joogo meesha jebinta ka dhacday bedelkii uu ka tagi lahaa ardayda kale iyo jebinta meesha ka socoto.

b. Kiisaska ku habboon marka ardayga uu soo cabbo qamro ama soo qaato mukhadaraad inta uu ku sugan yahay dugsiga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay ardayga u diri kraan kalkaalinta ama takhtarka, waxay ogeysiin karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, waxay xaajada ku wareejin karaan madaxda caafimaadka iyo/ama madaxda sharciga, kaddibna waxaa shir lala yeelan doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga.

c. Ardayda qabta dhibatooyinka ku xadgudubka mukhadaraadka qamrada, iyo maadooyinka kale iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha

daryeelka waxaa lagu dhiirigelinaa in ay raadsadaan kaalmada shaqaaaha dugsiga si ay u xalliyaan dhibatooyinka noocaas, kaddibna waxaa loo diri doonaa wakaaladha ku habboon ee magaalada/wakaaladaha caafimaadka xagga daweyna ku xadgudubka mukhadaraadka iyo taageerada.

d. Hadba sida uu u garto Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama kaaliyaha agaasimaha, waxaa dhici karto in ardayga noocaas la siiyo fursad iyo in lagu dhiirigeliyo in uu tago hay'ad ku takhasusta daweynta dadka qaba dhibatooyinka noocaas. Ardayda qabta mukhadaraad, qamro ama dhibaatooyinka la xariira ku xadgudubka mukhadaraadka kaddibna la ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga lagu dhiiri geliyo in ay raadsadaan kaalmada shaqaalaha dugsiga xagga qorsheynta, faragelinta iyo tixraaca wakaaladaha ku habboon magaalada/caafimaadka xagga daweynta ku xadgudubka mukhadaraadka iyo taageerada.

e. Dhamaan isgaarsiinta ku saabsan dhibaatooyinka noocaas waa in lagu haayo meel asturan.

f. Intaas kaddib, agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiyada waxay qiimeyn doonaan dhacdo kasta iyo saamaynta ay ku leedahay ardayda ku lugta leh balse xattaa uwa laga yaabo in ay arkeen dhacdada si loo hubiyo in la fulliyo hadba sida loogu baahan yahay talaabooyinka laga qaaday fiyoobida arrimaha bulshada/caatifadda ee ku habboon.

g. Habka loogu talogalay ardayda marka ay ku sugan yahiin Meel ay taalo Qamro ama Maadada la Kantaroolo:

    i. Haddii ay caddahay in ardayga ogaa in qof uu isticmaalo, ku lug leeyahay, muujiya mukhadaraad ama qamro kuna dadaalin sida macquulka ah in uu meesha ka tago, waxaa la siin doonaa ilaa saddax maalin oo ka-joojin ah iyo waxaa loo diri doonaa brograam ku saabsan ku xadgudubka maadada lana xariira aqoonta wakaaladda caafimaadka/magaalada ee ku habboon.

    ii. Haddii maamulaha go'aan ku gaaro in ay jirto caddeyn ku filan oo la xariira daruufaha si loo xaqiijiyo in ardayga uu joogay si uu uga qeybgalo isticmaalka mukhadaraadka ama qamrada, ardayga waxaa la siin doonaa isla ciqaabta la siiyo qofka isticmaala.

h. Haysashada maado la kantaroolo waxaa loola jeeda in ardayga uu maado la kantaroolo ku haysto hantida ardayga qof ahaan, ama kantaroolkiisa ku jirto (tusaale qaanadaha) inta uu hoos yimaado awoodda madaxada dugsiga.

i. Macnaha isticmaalka mukhadaraadka la kantaroolo iyo/ama mukhadaraadka halista ah waxay tahay in la ogsoon yahay sida macquulka

ah in ardayga uu isticmaali jiray waxyaabahaas (tusaale ahaan, cabbitaanka qamrada, isticmaalka "cocaine" ama "opiod", cabidda xashiishka, qaadashada kaniini, iwm.) ama sida macquulka ah loo arko in uu qaato isla waxaas inta uu hoos yimaado awoodda madaxda dugsiga. Isticmaalka waxaa kaloo ka mid ah isticmaalka aan la soo ogolaanin ama ku xad gudubka daawada la qoro.

j. Qeybinta maadada noocaas waxay la macno tahay maadada noocaas oo lagu wareejiyay qof kale, ha jirto ama yeeysan jirin lacaga ama yaabo kale oo qiim leh oo leys dhaafsado. Lahaashaha, isticmaalka iyo qeybinta maado la kantarool waxaa hoos yimaadaan siyaasadda ka-saaridda.

19.5 <u>Weerarka/Cabsi Gelinta loo Geysto Shaqaalaha Dugsiga</u>

Ardayda waxaa laga mamnuucay in ay weerar ku qaadaan ama kadeedaan shaqaalaha dugsiga. Dabeecadahaan waxaa lagu sifeyn karaa sida: (1) marka si ula kac ah, la ogsoon yahay ama taxadir la'aan qof kale loo geysto dhaawaca jirka; (2) si ula kac ah ama la ogsoon yahay qof kale lagu handado in loo geysan doono kuna soo socto dhaawaca jirka; ama (3) si ula kac ah ama la ogsoon yahay la taabto jirka qof kale marka ardayga ogsoon yahay ama sida macquulka ah aaminsan yahay in qofka kale uu taabashada u qaadan doono gaf, daandaansi, ama ku abuuro cabsi macquul ah in ay ku soo socoto halis degdeg ah. Waxyeelada weerarka waxaa ka mid noqon kara: (1) Ka-joojin shan-maalin ilaa toban-maalin iyo dhageysiga ka-saaridda; (2) waxaa la soo gudbin karaa ashtakada dambiga; iyo (3) ogeysiinta booliiska.

Arday kasta oo weerar ku qaada Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha, Madaxa Kulliyadda, macalin, kaaliyaha macalinka ama shaqaale kale oo ku sugan xerada dugsiga ama joogamunaasabo uu dugsiga kafaalo qaaday ama munaasabo dugsiga la xariirto, sida cayaaraha atleetikada, waxay hoos imaan karaan in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uu ka saaro dugsiga.

19.6 <u>Jebinta Nimaadka u Dagsan Hubka, Mukhadaraadka iyo Weerarka Lagu Qaado Shaqaalaha</u>

<u>19.6.1 Hababka Darajooyinka K ilaa Darajada 8aad</u>. Haddii ardayga loo arko in uu haysto hub sharci ahaan halis ah ama hub kale, ama ku hawlan yahay isticmaalka shay cabsi geliya, weerar, cabsi gelin, garaaca shaqalaha, weerarka shaqaalaha waxbarashada gudaha xerada dugsiga ama munaasabadaha la xariira dugsiga ama haysta, qeybiya qamro ama maado la kantaroolo, ama joogo meel qamro ama maado la kantaroolo lagu cabbo, ciqaabta uu mutteysto aad ayay u culus tahay. Waxaa lagu dabaqi doonaa habka soo socda:

a. Xubinta shaqaalaha ee ku lugta leh ayaa la xariiri doono Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama Kaaliyaha Agaasimaha.

b. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Head of Upper School) waxay ogeysiin doonaan:

   i. Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Gelyada; iyo
   ii. waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka lagula xariiro telefoon, loo raaciyo warqad, iyo haddii loo baahdo, loo diro warqad la xaqiijiyay; iyo
   iii. Sarkaalka Hawlgalka Sare (Chief Operating Officer).

c. Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Director of Safety and Security) wuxuu Maamulaha ama qofka loo xilsaaray u diri doonaa warbixinta dhacdada.

d. Ardayga waxaa laga saari doonaa xerada dugsiga sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqi karo *Buuggaan*.

e. Marka la jebiyo sharci, Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Geliyada wuxuu ogeysiin doonaa Boliiska Cambridge iyo wuxuu ashtako u gudbin karaa Maxkamadda Dagmada Middlesex County, iyo wuxuu, haddii loo baahdo, qaadi karaa talaalbo ku habboon oo kale.

f. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay fullin doonaan dhageysiga ka-joojinta sida ku saleysan sharciyada lagu dabaqi karo ee *Buugaan.*

   Haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ogaadaan in ardayga uu jebiyay siyaasadda u dagsan hubka, Agaasimaha/muddo Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ardayga ka joojin karaan toban (10) maalin marka uu jebiyo siyaasadda u dagsan hubka, mukhadaraadka, iyo weerarka lagu qaado shaqaalaha dugsiga sida ku tafatiran kor Qeybaha 14.3(a) iyo/ama 14.3(b) iyo Qeybta 19.1 ilaa 19.5 *Buuggaan*. Waxaa lagu tallinaa in la tixgeliyo heerka darajada ardayga iyo xaaladda jebinta marka la rabo in go'aan laga gaaro tirada maalmaha ka-joojinta iyo haddii loo baahan yahay in lagu dhaqaaqo dhageysiga ka-saaridda ardayga taasoo la xariirta jebinta sharciyada. Sida waafaqsan talladaan, tilmaamaha ku saabsan ardayga looga joojiyo jebinta noocaas waa sida soo socoto:

| | |
|---|---|
| Darajooyinka K-2 | Ma jirto ka-joojin, balse waxaa la ballamin doonaa shir lala geli doono waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga. |
| Darajooyinka 3-5 | Saddax ilaa shan maalin |
| Darajooyinka 6-8 | Ilaa shan ilaa toban maalin |

Sida ku saleysan daruufaha u gaarka ah jebinta, waxaa dhici karto in ardayga sidoo kale lagu wareejiyo brograam ku habboon oo laga helo magaalada/brograamka aqoonta caafimaadka. Marka la soo gabogabeeyo ka-joojinta noocaas, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu codsan doonaa in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga tagaan kullanka shirka dib u gelidda lala galo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

g. Inta ay socoto muddada ka-joojinta iyo haddii waxa uu ogaado Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare caddeyaan, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay bilaabi doonaan hababka lagu fulliyo dhageysi rasmi ah oo ku saabsan saaridda. Si loo bilaabo hawsha saaridda, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waa in uu ogeysiiyo ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga, qoraal ahaan, fursad lagu qabto dhageysi heerka dugsiga. Ogeysiiska dhageysiiska ka-saaridda waa lagu soo qoro Ingiriisi iyo luqadda uu ku hadlo ardayga marka uu joogo guriga, haddii ay ka duwan tahay. Ogeysiinta waa in ay muujiso qeybta *Buuggaan* ee la jebiyay iyo xaqiiqada la xariirta jebinta lagu soo dacwooday; in ardayga uu xaq u leeyahay in la mattalo inta uu socdo dhageysiga iyo in la siiyo fursad uu ku soo bandhigo caddeyn iyo marqaatiyo iyo in loo keeno turjubaan haddii loo baahdo. **Hase ahatee, marka la soo qaado ardayda la siiyay brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP) ama Qorsha Qeybta 504 (Section 504 Plan), dhageysiga wuxuu dhici doonaa oo keliya kaddib marka TEAM gaarto go'aanka in dhaqanka su'aasha ka taagan tahay in aysan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor. Intaas kaddib, ardayga qaata waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira waa in la siiyo waxbarasho lacag la'aan ah oo ku habboon dadweynaha muddada laga reebay. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor.**

19.6.2 <u>Fullinta Dhageysiga ku saabsan Hubka, Mukhadaraadka iyo Weerarka kuna saabsan Sharci Jebinta Shaqaalaha Darajooyinka K ilaa Darajada 8aad.</u>

Dhageysiga waxaa fullin doono Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uusan ahayn dhibanaha ama marqaatiga, markaas dhageysiga waxaa fullin doono Kaaliyaha Agaasimaha ama shaqaale kale oo dhexdhexaad ah kana tirsan maamulka dugsiga kaasoo aan toos ugu xerneen dhacdada. Dhageysiga waxaa imaan doono ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, qareenka ardayga, haddii lagu dabaqi karo, iyo dad kale hadba sida uu goomiyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xil saaro iyo/ama sida ardayga codsado.

a. <u>Dallacaadda.</u> Sarkaalka dhageysiga wuxuu ku dhawaaqi doonaa waxyaabaha lagu soo eedeyay iyo wuxuu go'aan ka gaari doonaa in ardayga uu fahamsan yahay.

b. <u>Marqaatiyada.</u> Haddii ardayga uu qilaafsan yahay waxa lagu soo eedeyay, waxaa loo yeeri doonaa dadka xogogaalka u ah dhacdada. Dhamaan marqaatiyada u yimaada in ay marqaati furaan waa in ay qof ahaan yimaadaan dhageysiga marka laga reebo (i) maragta uu furo aqoonyaan sida caddeyn xabbadaha, ama (ii) marqaatiga (marqaatiyada) ardayga haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama cidda loo xilsaaray go'aan ku gaarto in aqoonsiga maragta uu furo ardayga ay halis gelin doonto ammaanka jifka marqaatiga (marqaatiyada) ardayga.

19.6.3 Haddii, dhageysiga kaddib, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare ardayga go'aan ku gaaro in uu saaro ardayga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay ogeysiis qoran siin doonaan ardayga iyo waalidiinta/iaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka asbaabta ka dambeyso go'aanka. Ogeysiiska noocaas waxay kaloo ogeysiin doonaa ardayga xaqa uu u leeyahay in uu racfaan qoran u soo gudbiyo maaulaha ama qofka loo xilsaaray muddo toban (10) maalin gudahooda kaddib marka uu helo ogeysiiska ka-saaridda, iyo xaqa in uu mattalo qareen xagga racfaanka iyo wuxuu ku soo dari doonaa codsi in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga ka qeybgalaan kullanka shirka dib u soo gelinta ay la yeeshaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare kaddib marka la soo gabogabeeyo muddada ka-saaridda.

19.6.4 Dhageysiga lagu qabto Maamulaha ama qofka loo xilsaaray hortiisa, xaajada racfaanka laguma soo koobi karo oo keliya go'aanka xaqiiqada haddii ardayga uu jebiyay qodob ku jira Buugaan. Soo gudbinta racfaanka, ardayga waa in uu sheego cabbashada uu qabo, sida oraah ku saabsan qiilka uu u haysto racfaanka iyo oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada iyo wax ka qabashada uu codsaday.

Dhageysiga lagu qabto Maamulaha ama qofka loo xilsaaro hortiisa waxaa la waafajin doonaa sharuudaha soo socda:

a. Dhageysiga waxaa lagu qaban doonaa meel xeran, waxaana loo fullin doonaa is aan rasmi ahayn;

b. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in uu mattalo qareen ama qof kale uu dhinaca soo xusho;

c. Dhamaan dhinacyada waxay baari karaan diiwaanada dugsiga iyo dhamaan warqadaha kale ee la xariira racfaanka;

d. Dhamaan dhinacyada waxaa loo ogolaan doonaa in ay su'aal u jeediyaan dhamaan marqaatiyada;

e. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in ay la yimaadaan marqaatiyo iyo caddeyn;

f. Maamulaha ama cidda loo xilsaaray waxay sabab u noqon karaan in la keeno qareenka sharciga si uu u daafaco shaqaale kasta oo ka tirsan dugsiga ama si uu ula talliyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray fullinta shirka. La-talliye kasta oo la talliya Maamulaha ama qofka loo xil saaray fullinta shirka looma ogola in uu sidoo kale ahaado la-talliyaha shaqaalaha dugsiga.

Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay go'aan ka gaari doonaan haddii ardayga laga qaaday xaqa (xuquuqda) ku qoran racfaanka. Haddii Maamulaha ama qofka loo xil saaray go'aansado in ay meesha ka dhacday ka-xayuubinta xuquuqda, Maamulaha ama qofka loo xil saaray waxay ku tallin doonaan garta ku habboon loona baahan yahay si loo hubsado in isla markiiba iyo si joogto ah loo joojiyo ka-xayuubinta xaqa (xuquuqda). Maamulaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu kaloo codsan karaa in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga tagaan kullanka shirka dib ugu soo noqoshada ee lala yeesho Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga muddada ka-saaridda.

Dugsi kasta oo ardayga ka joojiyo ama ka saaro sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan* taasoo la xariirto jebinta sharciyada u dagsan qamrada ama mukhadaraadka wuxuu sii wadi doonaa in uu ardayga siiyo adeegyada waxbarashada muddada ka-joojinta ama saaridda sida hoos timaado qeybta 21, Cutubka 76 iyo sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo *Buuggaan*.

Marka ardayga laga saaro sida hoos timaado qodobada siyaasadaan iyo dalbado in loo ogolaado dugsi kale, Maamulaha ama qofka uu u xilsaaray siistemka dugsiga diray wuxuu ogeysiin doonaa Maamulaha ama qofka uu u xil saaray siistemka dugsiga la gaarsiiyay asbaabta dhallisay ka-saaridda ardayga.

19.6.5 Hababka Dugsiga Sare Darajooyinka 9-12. Haddii arday lagu arko hub sharci ahaan halis ah ama hub kale ama uu isticmaalo shay hab laga cabsado, weerar, cabsi gelin, garaaca shaqaalaha, weerarka shaqaalaha waxbarashada marlagu sugan yahay xerada dugsiga ama munaasabadaha la xariira dugsiga ama haysashada, qeybinta qamrada ama maado la kantaroolo ama haysto, qeybiyo qamro ama maado la kantaroolo, ciqaabta aad ayay u culus tahay. Waxaa lagu dabaqi doonaa habka soo socda:

a. Xubinta shaqaalaha ee ku lugta leh waxay la xariiri doonaan Madaxa, Kaaliyaha Agaasimaha ama Agaasimaha.

b. Madaxa, Kaaliyaha Agaasimaha ama Agaasimaha waxay ogeysiin doonaan:
   i. Agaasimaha Amaanka iyo Nabadgelyada; iyo
   ii. Agaasimaha Cambridge Rindge iyo Dugsiga Latin (Latin School); iyo

iii. waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka oo lagula xariiro telefoon, warqad dheeraad oo la sii socota, iyo haddii loo baahdo, warqad la xaqiijiyay oo loogu diro boostada.

c. Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Director of Safety and Security) wuxuu ogeysiin doonaa Agaasimaha iyo Maamulaha or qofka loo xilsaaray: koobiga warbixinta dhacdada waxaa loo diri doonaa Agaasimaha iyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray marka la gaaro dhamaadka maalin dugsiyeedka.

d. Ardayga waxaa laga saari doonaa xerada dugsiga sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqi karo *Buuggaan*.

e. Marka la jebiyo sharci, Agaasimaha Ammaanka iyo Nabad Gelyada wuxuu ogeysiin doonaa Boliiska Cambridge, wuxuu ashtako u gudbin karaa Maxkamadda Dagmada Middlesex County, iyo, haddii loo baahan yahay, wuxuu qaadi karaa talaabada kale ee ku habboon.

f. Agaasimaha wuxuu fullin doonaa dhagesyiga ka-joojinta sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo ee ku jira *Buuggaan*.

g. Haddii Agaasimaha ogaado in ardayga uu jebiyay sharciga u dagsan hubka, mukhadaraadka ama weerar u geysto siyaasadaha u dagsan shaqaalaha dugsiga, Agaasimaha wuxuu ardayga siin karaa ka-joojinta muddo shan (5) ilaa toban (10) maalin marka la jebiyo sharciga u dagsan hubka, mukhadaraadka iyo weerarka lagu qaado siyaasadaha shaqaalaha dugsiga sida waafaqsan qodobaada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan* kaddibna wuxuuna bilaabi karaa dacwadda ka-saaridda ee la xariirta jebinta. Koobiyada warqadda ka-joojinta waxaa loo diri doonaa Madaxa Sarkaalka Hawlgalka, Agaasimaha, sekuritiga, iyo la-talliyaha. Sida ku saleysan daruufaha u gaarka ah jebinta, waxaa dhici karto in ardayga sidoo kale lagu wareejiyo brograam ku habboon oo laga helo magaalada/brograamka aqoonta caafimaadka. Marka la gaaro dhamaadka ka-joojinta noocaas, Agaasimaha wuxuu waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga ka codsan doonaa in ay yimaadaan shirka dib u soo celinta ee lala galo Agaasimaha.

h. Inta ay socoto muddada ka-joojinta iyo haddii lagu saleyn karo natiijadaha Agaasimaha, Agaasimaha wuxuu bilaabi doonaa habab oo lagu fulliyo dhageysiga ka-saarid rasmi ah sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqi karo ee *Buuggaan*. Si loo bilaabo dacwadda ka-saaridda, Agaasimaha wuxuu ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyeha daryeelka siin doonaa fursad lagu qabto dhageysi heerka dugsiga. Ogeysiiska dhageysiiska ka-saaridda waa lagu soo qoro Ingiriisi iyo luqadda uu ku hadlo ardayga marka uu joogo guriga, haddii ay ka duwan tahay. Ogeysiinta waa in ay muujiso qeybta *Buuggaan* ee la jebiyay iyo xaqiiqada la xariirta jebinta lagu soo

dacwooday; in ardayga uu xaq u leeyahay in la mattalo inta uu socdo dhageysiga iyo in la siiyo fursad uu ku soo bandhigo caddeyn iyo marqaatiyo iyo in loo keeno turjubaan haddii loo baahdo. **Hase ahatee, marka la soo qaado ardayda la siiyay brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP) ama Qorsha Qeybta 504 (Section 504 Plan), dhageysiga wuxuu dhici doonaa oo keliya kaddib marka TEAM gaarto go'aanka in dhaqanka su'aasha ka taagan tahay in aysan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga. Qeybta 18.0 kore. Intaas kaddib ardayga qaata waxbarashada gaarka ah ee iyo adeegyada la xariira waa in uu helo waxbarashada dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan ah muddada ay socoto ka saaridda. Fiiri Qeybta 18.0 kor.**

19.6.6 Fullinta Dhageysiga ku saabsan Hubka, Mukhadaraadka iyo Weerarka Lagu Qaado Shaqaalaha,
Darajooyinka 9 ilaa Darajada 12.

Dhageysiga waxaa fullin doono Agaasimaha haddii Agaasimaha uusan ahayn dhibanaha ama marqaatiga, balse haddii taasi dhacdo, dhageysiga waxaa fullin doono Kaaliyaha Agaasimaha ama shaqaale kale oo dhexdhexaad ah kana tirsan maamulka dugsiga, aan toos ugu lug lahayn dhacdada. Dhageysiga waxaa imaan doono ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo/ama qofka loo xilsaaray iyo/ama u codsaday ardayga.

a. Dallacaad. Sarkaalka dhageysiga wuxuu ku dhawaaqi doonaa waxa lagu soo eedeyay kaddibna wuxuu go'aan ka gaari doonaa in ardayga fahamsan yahay iyaga.

b. Marqaatiyada. Haddii ardayga qilaafo waxa lagu soo eedeyay, waxaa loo yeeri doonaa dadka xogoaalka u ah dhacdada la soo sheegay. Dhamaan marqaatiyada marag furi doono waxay soo xaadiri doonaan dhageysiga qof ahaan marka laga reebo (i) maragta uu furo aqoonyaanka sida caddeynta hubka shay laga tuuro ama falanqeynta mukhadaraadka, ama (ii) marqaatiga (marqaatiyada) ardayga haddii Agaasimaha iyo/ama qofka loo xilsaaray go'aan ka gaara aqoonsiga marqaatiga ardayga ee halis gelin doonto ammaanka jirka marqaatiga (marqaatiyada) ardayga.

Haddii, dhageysiga kaddib, Agaasimaha uu go'aan ku gaaro in ardayga ka saaro, Agaasimaha waa uu ogeysiis qoran siiyo ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga asbaabta la xariirto go'aanka sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo *Buuggaan*. Dhageysiga kaddib, Agaasimaha wuxuu dooraan doonaa in uu ardayga ka joojiyo kaddibna uu ardayga u diro brograam kale baddalkii uu saari lahaa. Ogeysiiska noocaas wuxuu ardayga ogeysiin doonaa xaqa racfaan qoran loogu gudbiyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray sida waafaqsan sharciyada lagu dabaqi karo *Buugaan.*

19.6.7 Dhageysiga la hor keeno Maamulaha ama qofka loo xilsaaro, xaajada mowduuca racfaanka kuma koobnaan doonto keliya xaqiiqada haddii ardayga uu jebiyay qodob ku jira *Buuggaan*. Soo gudbinta racfaanka, ardayga waa in uu sheego cabbashada uu qabo, sida oraah ku saabsan qiilka uu u haysto racfaanka iyo oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada iyo wax ka qabashada uu codsaday.

Dhageysiga lagu qaban doono Maamulaha ama qofka loo xilsaaray hortooda waxaa la waafajin doonaa sharuudaha soo socdo:

a. Dhageysiga waxaa lagu qaban doonaa meel xeran, waxaana loo fullin doonaa is aan rasmi ahayn;

b. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in uu mattalo qareen ama qof kale uu dhinaca soo xusho;

c. Dhamaan dhinacyada waxay baari karaan diiwaanada dugsiga iyo dhamaan warqadaha kale ee la xariira racfaanka;

d. Dhamaan dhinacyada waxaa loo ogolaan doonaa in ay su'aal u jeediyaan dhamaan marqaatiyada;

e. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in ay la yimaadaan marqaatiyo iyo caddeyn;

f. Maamulaha ama cidda loo xilsaaray waxay sabab u noqon karaan in la keeno qareenka sharciga si uu u daafaco shaqaale kasta oo ka tirsan dugsiga ama si uu ula talliyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray fullinta shirka. La-talliye kasta oo la talliya Maamulaha ama qofka loo xil saaray fullinta shirka looma ogola in uu sidoo kale ahaado la-talliyaha shaqaalaha dugsiga.

Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay go'aan ka gaari doonaan haddii ardayga laga qaaday xaqa (xuquuqda) ku qoran racfaanka. Haddii Maamulaha ama qofka loo xil saaray go'aansado in ay meesha ka dhacday ka-xayuubinta xuquuqda, Maamulaha ama qofka loo xil saaray waxay ku tallin doonaan garta ku habboon loona baahan yahay si loo hubsado in isla markiiba iyo si joogto ah loo joojiyo ka-xayuubinta xaqa (xuquuqda). Maamulaha wuxuu kaloo codsan ka codsan karaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha iyo ardayga in ay tagaan kullanka shirka dib u soo gelidda ee lala galo Agaasimaha marka la soo gabogabeeyo muddada ka-saaridda.

Marka ardayga laga saaro sida hoos timaado qodobada siyaasadaan iyo kaddibna dalbado in loo ogolaado dugsi kale, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ee siistemka dugsiga qaabilsan dirista wuxuu Maamulaha ama

qofka loo xilsaaray ee siistemka dugsiga qabashada asbaabta ka dambayso saadidda ardayga.

Dugsi kasta oo arday ka joojiya ama ka saara sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo *Buuggaan*, arrin la xariirto jebinta sharciyada u dagsan qamrada, hubka ama mukhadaraadka wuxuu sii wadi doonaa in uu bixiyo adeegyada waxbarashada la siiyo ardayga waqtiga ka-joojinta ama ka saaridda hoos timaado qeybta 21, cutubka 76 iyo sida waafaqsan qodobada lagu dabaqi karo *Buuggaan*.

## 20.0 AADAABTA DIBADDA DUGSIGA

20.1 Qeybta 37H½ cutubka 71 Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) wuxuu u ogol yahay Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga in uu dugsiga ka joojiyo ardayga lagu soo eedeyay dambi culus ama lagu soo ashtakeyay in uu galay dambi culus, xattaa haddii aan la ogeyn in dhaqanka la soo sheegay uu ka dhacay dugsiga ama uu ka dhacay hawl la xariirta dugsiga iyo haddii kale, haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga go'aan ku gaaro in sii joogitaanka dugsiga ee ardayga ay waxyeelo xun oo muuqda ku yeelan doonto maslaxadda guud ee dugsiga. Qeybta 37H½ waxay kaloo u ogolaataa Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga in ay dugsiga ka saaraan arday qirtay in uu galay dambi culus ama gaf la xariira dambi culus; haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga go'aan ku gaaro in joogitaanka sii socota uu ardayga joogo dugsiga ay waxyeelo xun oo la taaban karo ku yeelan karto fiyoobida guud ee dugsiga.

**Hase ahatee, marka la soo qaado ardayda la siiyay brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP) ama Qorsha Qeybta 504 (Section 504 Plan), dhageysiga wuxuu dhici doonaa oo keliya kaddib marka TEAM gaarto go'aanka in dhaqanka su'aasha ka taagan tahay in aysan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor. Intaas kaddib, ardayga qaata waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira waa in la siiyo waxbarasho lacag la'aan ah oo ku habboon dadweynaha muddada laga reebay. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor.**

Arday kasta oo laga joojiyo dugsiga sida hoos timaado sharciyada M.G.L.c. 71, §37H ½ wuxuu fursad u heli doonaa in uu helo adeegyada waxbarashada iyo in uu horumar ka gaaro waxbarashada inta ay socoto ka saaridda sida ku qoran hoos, Qeybta 21.

20.2 Kuwa soo socdo waa hababka loo baahan yahay in la raaco xagga ka-joojinta aan la cayimin iyo/ama dhageysiga ka-saaridda ee hoos yimaada M.G.L.c. 71, §37H½:

a. Inta ay socoto muddada ka-joojinta 10ka maalin ama ka yar, haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga go'aan ku gaaro in dhaqanka uu baahan yahay in la bilaabo ka-joojin aan la xaddidin ama ka-saaridda ardayga, markaas Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu qoraal ku ogeysiin doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay jirto fursad lagu dhageysto ilaa heerka dugsiga. Ogeysiiska dhageysiga waa in lagu soo qoro Ingiriisi iyo luqadda looga hadlo guriga ardayga, haddii ay ka duwan tahay. Ogeysiinta waa in ay muujiso qeybta *Buuggaan* ee la jebiyay iyo xaqiiqada la xariirta jebinta lagu soo dacwooday; in ardayga uu xaq u leeyahay in la mattalo inta uu socdo dhageysiga iyo in la siiyo fursad uu ku soo bandhigo caddeyn iyo marqaatiyo iyo in loo keeno turjubaan haddii loo baahdo. **Hase ahatee, marka la soo qaado ardayda la siiyay brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP) ama Qorsha Qeybta 504 (Section 504 Plan), dhageysiga wuxuu dhici doonaa oo keliya kaddib marka TEAM gaarto go'aanka in dhaqanka su'aasha ka taagan tahay in aysan ahayn mid muujisa itaal darrida ardayga. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor. Intaas kaddib, ardayga qaata waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira waa in la siiyo waxbarasho lacag la'aan ah oo ku habboon dadweynaha muddada laga reebay. *Fiiri Qeybta* 18.0 kor.**

b. <u>Fullinta Dhageysiga</u>

Dhageysiga waxaa fullin doono Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uusan ahayn dhibanaha ama marqaatiga, markaas dhageysiga waxaa fullin doono Kaaliyaha Agaasimaha ama shaqaale kale oo dhexdhexaad ah kana tirsan maamulka dugsiga kaasoo aan toos ugu xerneen dhacdada. Dhageysiga waxaa imaan doono ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, qareenka ardayga, haddii lagu dabaqi karo, iyo dad kale hadba sida uu goomiyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama qofka loo xil saaro iyo/ama sida ardayga codsado.

i. <u>Dallacaadda.</u> Sarkaalka dhageysiga wuxuu ku dhawaaqi doonaa waxyaabaha lagu soo eedeyay iyo wuxuu go'aan ka gaari doonaa in ardayga uu fahamsan yahay.

ii. <u>Marqaatiyada</u>. Haddii ardayga uu qilaafsan yahay waxa lagu soo eedeyay, waxaa loo yeeri doonaa dadka xogogaalka u ah dhacdada. Dhamaan marqaatiyada u yimaada in ay marqaati furaan waa in ay qof ahaan yimaadaan dhageysiga marka laga reebo (i) maragta uu furo aqoonyaan sida caddeyn xabbadaha, ama (ii) marqaatiga (marqaatiyada) ardayga haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama cidda

loo xilsaaray go'aan ku gaarto in aqoonsiga maragta uu furo ardayga ay halis gelin doonto ammaanka jifka marqaatiga (marqaatiyada) ardayga.

c. Dhageysiga kaddib, haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga go'aan ku gaaraan in ay arday saaraan ama ka joojiyaan muddo aan la xadidin, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga wuxuu ogeysiis qoran siin doonaan ardayga kiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha ardayga si ay u ogaadaan asbaabta ka dambeyso go'aanka. Ogeysiiska noocaas wuxuu ardayga u sheegi doonaa xaqa uu u leeyahay in uu racfaan qoran u soo gudbiyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray muddo shan (5) maalin gudahooda laga bilaabo marka uu helo ogeysiiska ka-saaridda ama go'aanka ka-joojinta, iyo xaqa uu u leeyahay in la mattalo dacwadda racfaanka. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay kaloo codsan doonaan in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayga in ay tagaan kullanka shirka dib u soo celinta ee lala galo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga marka la soo gabogabeeyo muddada ka-saaridda ama ka-joojinta aan la xaddidin.

## 21.0 ADEEGYADA WAXBARASHADA IYO HORUMARKA WAXBARASHADA XAALADDA KA-JOOJINTA

21.1 Arday kasta oo la siiyo ka-joojinta gudaha dugsiga, ka-joojinta muddada gaaban, ka-joojinta muddada dheer ama ka-saarid, waxaa la siin doonaa fursad uu ku shaqeysto buundooyin, hadba sida loogu dabaqi karo, gadaal ka sameeyo hawlaha, imtixanaadka, warqadaha iyo shaqada kale ee dugsiga hadba sida loogu baahdo si uu u gaaro horumarka aqoonta muddada ardayga laga wareejiyo fasalka ama dugsiga. Arday kasta oo laga saaro ama laga joojiyo in ka badan toban maalin isku xiga, ha ahaato gudaha dugsiga ama dibadda dugsiga, waxaa la siin doonaa fursad uu ku qaato adeegyada waxbarshada iyo in uu horumar ka gaaro waxbarashada si uu ula kulmo sharuudaha gobolka iyo kuwa deegaanka, una adeegsado qorshaha adeegga waxbarashada u baahsan gobolka uu Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare soo saaray. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay fursadaan ogeysiin doonaan ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka marka la saaro ka-joojinta ama ka-saaridda.

21.2 Qorshahaan adeegga waxbarashada ku baahsan dugsigaan wuxuu sharaxi doonaa adeegyada waxbarashada uu dugsiga dagmada siin doono ardayda laga saaro ama laga joojiyo dugsiga in ka badan toban (10) maalin isku xiga waxayna ku soo dari doonaan habka loo ogeysiiyo ardaydaas iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda/bixiyeyaashooda daryeelka adeegyada iyo habka leysugu dabarido adeegyada noocaas. Adeegyada waxbarashada waxay ku saleysnaan doonaan, ama waxaa lagu bixin doonaa hab waafaqsan heerarka

waxbarashada iyo qaabka manhajka loo samayaya dhamaan ardayda sida hoos timaada sharciga iyo xeerka gobolka.

## 22.0 KA REEBIDDA

22.1 Lama ogola in arday aan iskiisa u dooranin in laga reebo dugsiga hab kasta ama muddo waqti marka laga reebo sida waafaqsan habka ku jira *Buuggaan* haddii ardayga uu qabo cudur leysku daarto ama cudur kale oo halis ku ah caafimaadka dadweynaha, ama aan keenin caddeyn in la talaalay, kaddibna waxaa isla markiiba la ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka addibna ardayga waxaa loo diri doonaa guriga hase ahatee waxaa la ogol yahay in laga dhaafo sharuudahaan waqtiga la soo galo dugsiga taasoo ugu wacan asbaab la xariirto caafimaadka iyo diinta. Shayga keliya ee ka reeban ka reebidda caruurta aan la talaalin ama qeyb ahaan la talaalay iyaddoo aysan jirin ka-dhaafidda caafimaadka ama diinta waa caruurta guri laaweyaasha. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo Kalkaaliyaha Dugsiga ayaa la shaqeyn doono waalidiinta/ilaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka arrinta ku saabsan sida ardayga ugu soo noqdo dugsiga.

22.2 Haddii ardayga, jira toban iyo lex (16) sanno ama ka badan, doorto in uu iskiisa uga tago dugsiga, muddo todobo (7) maalin kaddib marka ardayga joojiyo in uu yimaado dugsiga, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay ogeysiis qoran u diri doonaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga ku hadla luqadda aasaasiga waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo Ingiriisi iyaga oo ka codsada in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga la kulmaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray ka hor inta ardayga uusan si joogta ah uga tagin dugsiga.

22.3 Wareysiga Ka Bixidda. Haddii loo baahdo, warqadda waa in lagu soo diro boostada la hubiyay. Ujeedada shirka noocaas waxay ahaan doontaa in la fiiriyo asbaabta uu ardayga uga tagay dugsiga, diiwaanka ardayga iyo qorshooyinka waxbarashada mustaqbalka ee ardayga ama qorshooyinka shaqada, iyo si loo ogaado in ardayga uu iskiisa uga tago dugsiga; in uusan jirin xoog ama cadaadis uu dugsiga uga tago sarkaalka ka tirsan dugsiga ama shaqaale.

22.4 Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo/ama ardayga aysan ka jawaabin muddo toban (10) maalin gudahooda codsiga wareysiga ka-bixidda, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu xasuusin u diri doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ardayga laga saari doono diiwaanka dugsiga.

22.5 Qeybtaan looma qaadan doono in si joogto ah looga saaro arday raba in uu dib ugu soo noqdo waxbarashada goor dambe. Ardayga wuxuu ku soo noqon karaa dugsiga bilowga samastarka ku xiga ka hor inta uusan gaarin maalinta

dhallashada 21aad ee ardayga kaddib marka arji qoran loo diro Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga si uu dib ugu soo noqdo shirka.

22.6 The Principal/Head of Upper School and/or Assistant Principal, subject to regulations established by the State Board of Education, shall maintain a record of every student who leaves school for a period of one (1) consecutive month or longer, whether by reason of expulsion, exclusion, illness, voluntary departure or for any other reason. Diiwaanka noocaas waxaa ka mid ah magaca, da'da, isirka, jinsiga, cinwaanka, heerka darajada, taariikhda uu ardayga joojiyay in uu si joogto ah u yimaado dugsiga iyo sababta uu ardayga u joojiyay in uu yimaado. Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama Kaaliyaha Agaasimaha waxay warbixinta sannadka u gudbin doonaan Maamulaha ama qofka loo xilsaaray iyo Guddiga Dugsiga, taasoo laga helo soo koobidda ardayda ka tagtay dugsiga muddo hal (1) bil ama ka badan, hase ahatee warbixinta ma kashifi doonto aqoonsiga ardayga.

## 23.0 XAQA LOO LEEYAHAY DHAGEYSIGA SI WAX LOOGA QABTO KA QAADIDDA XUQUUQDA

23.1 Haddii arday iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka aaminsan yahiin in sarkaal ama shaqaale ka tirsan Waaxda Dugsiga u arday u diiday xuquuqda u ku qoran Buugga iyo haddii ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka aysan awoodin in ay xalliyaan tabashadooda kaddib marka si daacad ah leysugu dayo in la adeegsado habab aan rasmi ahayn, lala shaqeeyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama saraakiil kale oo ka tirsan dugsiga, ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay xaq u leeyahiin in ay ashtako qoran u gudbiyaan Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ama Sarkaalka Hawlgalka Sare (Chief Operating Officer). Ashtakada qoran waxay sheegi doontaa cabbashada, sida xaqa loo diiday ardayga, waxaana ka mid ah oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada iyo codsiga in wax laga qabto.

23.2 Haddii, baaritaan kaddib Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ama Sarkaalka Hawlgalka Sare (Chief Operating Officer) uu go'aan ku gaaro in eedeynta tahay mid aan waxba ka jirin loona haysan aasaas ama haddii Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ama Sarkaalka Hawlagalka Sare uu awood u leeyahay in uu xalliyo cabbashada ilaa ay raali ka noqoto dhainaca loo geystay muddo todobo (7) maalin dugsiyeed kaddib marka la helo ashtakada qoran, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ama Sarkaalka Hawlgalka Sare wuxuu ogeysiis u diri doonaa Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, shaqaalaha waaxda dugsiga, haddii ay jiraan, ee lagu magacaabay ashtakada qoran iyardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee soo gudbiyay ashtakada. Ogeysiinta noocaas waxaa ka mid ah:

a. Waqtiga iyo goobta uu ka dhici doono shirka la qaban doono ugu dambayn toban (10) maalin kaddib marka la helo ashtakada, marka laga reebo in dhinac kasta ay codsan karto in dib loo dhigo taariikhda dhageysiga ilaa shan (5) maalin dugsiyeed si loo diyaariyo dhageysiga;

b. Oraah ku saabsan waxa la tabanaayo sida ku qoran ashatakada;

c. Oraah buuxdo oo ku saabsan xaqiiqada, sida magacyada marqaatiyada, ee u horseeda eeda (eedaha);

d. Waa la codsaday oraahda naxariista;

e. Oraah ku saabsan xuquuqda ay leeyahiin dhamaan dhinacyada kana mid ah xaqa in lala yimaado qareen ama qof kale oo iyaga mattala shirka, in ay keenaan marqaatiyo iyo caddeyn iyo in ay su'aal weydiyaan marqaatiyada ka soo horjeedo.

23.3 Shirka wuxuu ahaan doonaa mid waafaqsan tilmaamaha soo socda:

a. Shirka waxaa lagu fullin doonaa Maamulaha ama qofka loo magacaabo hortiisa;

b. Shirka wuxuu ahaan doonaa mid albaabada loo xeray, waxaana loo fullin doonaa si aan rasmi ahayn;

c. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in uu mattalo qareen ama qof kale ay soo xushaan;

d. Dhamaan dhinacyada waxay fatishi karaan diiwaanada dugsiga iyo dhamaan warqadaha kale ee la xariira ashtakada;

e. Dhamaan dhinacyada waxaa loo ogolaan doonaa in ay su'aalo weydiiyaan dhamaan marqaatiyada;

f. Dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in ay la yimaadaan marqaatiyo iyo caddeyn;;

f. Maamulaha ama cidda loo xilsaaray waxay sabab u noqon karaan in la keeno qareenka sharciga si uu u daafaco shaqaale kasta oo ka tirsan dugsiga ama si uu ula talliyo Maamulaha ama qofka loo xilsaaray fullinta shirka. La-talliye kasta oo la talliya Maamulaha ama qofka loo xil saaray fullinta shirka looma ogola in uu sidoo kale ahaado la-talliyaha shaqaalaha dugsiga.

23.4 Maamulaha ama qofka loo xilsaaray ayaa go'aan ka gaari doono haddii ardayga laga hor istaagay xaq (xuquuqda) ku qoran ashtakada qoran. Haddii Maamulaha

ama qofka loo xil saaray go'aansado in ay meesha ka dhacday ka-xayuubinta xuquuqda, Maamulaha ama qofka loo xil saaray waxay ku tallin doonaan garta ku habboon loona baahan yahay si loo hubsado in isla markiiba iyo si joogto ah loo joojiyo ka-xayuubinta xaqa (xuquuqda). Si loo helo wax ka qabashada habboon, waa in baahida kala duwan ee ardayda la tixgeliyo lana saaro xoogga sidii wax looga qaban lahaa baahida ardayga xagga isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada, muuqaalka jirka, xaaladda waalidnimada, xaaladda bulsho-dhaqaale iyo guri la'aanta iyo baahida ardayga u qabo sinaanta, luqadda, fiyoobida bulso/caatifad iyo farsamada.

23.5 Iyadoo aan la fiirinin qodobada qeybtaan, ardayga wuxuu adeegsan karaa habka astakada ee ku qoran "Siyaasadda Takoor La'aanta" iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Sinjiga" ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools "Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment") si uu u raadsado xallinta ashtakooyinka takoorka ama kadeedka ee ku saleysan sifo uu sharciga badbaadiyo sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada, xaaladda bulsho-dhaqaale ama guri la'aanta; ardayga wuxuu isticmaali karaa habka racfaanka ee ku qoran *Buuggaan* in uu xal u helo ashtakooyinka ku saabsan dishibiliinka ardayga; kaddibna ardayga wuxuu adeegsan karaa habka ashtakada ku qoran Ka Hortagga Gardareysiga (Bullying Prevention) ama Qorshaha Faragelinta (Intervention Plan) si uu u helo xal ku saabsan gardareysiga.

23.6 Dhinac kasta oo ka calool xumaaday go'aanka iyo tallada uu soo jeediyay Maamulaha ama qofka uu u xilsaaray wuxuu xaq u yeelan doonaa in uu racfaan u gudbiyo Guddiga Dugsiga. Hase ahatee, xaqa noocaas ee loo leeyahay racfaanka, laguma dabaqi doono xukunka ama talooyinka Maamulaha ka gaaro kuwaasoo sida waafaqsan sharciga gobolka caddeeya in racfaanka ugu dambeeyo loo baahan yahay in uu dhageysto Maamulaha. Codsiga racfaanka waa in loo soo gudbiyo Guddiga Dugsiga muddo shan (5) maalin dugsiyeed kaddib marka la helo go'aanka Maamulaha.

23.7 Guddiga Dugsiga (School Committee) wuxuu fiirin doonaa natiijadaha iyo talooyinka Maamulaha si loo ogaado haddii ay jirto caddeyn ku filan oo lagu ogaado in ka-xayuubinta xaqa la soo sheegay ay dhacday iyo haddii garta la siiyay ku habbooneyd xayuubinta. Go'aanka qoran ee Guddiga Dugsiga waxaa la soo saari doonaa toban (10 maalijn dugsiyeed kaddib marka la dhageysto racfaanka, go'aankaas oo xaqiijin doono, ka gudbi doono, ama si kale u baddali doono natijadaha iyo talooyinka Maamulaha ama qofka loo xilsaaray.

23.8 Dhamaan dhinacyada iyo wakiiladooda, sida qareenka, waxay Guddiga Dugsiga kala hadli karaan caddeynta la soo bandhigay inta uu dhageysiga socday iyo

habboonaanta naxariista.  Guddiga Dugsiga, hadba sida ay u garato, waxay dhageysan kartaa marqaatiyada iyo waxay heli kartaa caddeyn dheeraad ah.

## 24,0  BUUGAAGTA ARDAYGA

Xeerar Dheeraad ah oo ku saabsan Aadaabta waxay lagu daabacay Cambridge Rindge iyo Buugga Ardayga Dugsiga Latin, iyo buugga ardayga dugsiga.  Dhamaan ardatda, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo shaqaalaha waa in ay la tashtaan buugaagtaan si ay u helaan macluumaad dheeraad ah oo la xariira sharciyo muhiim ah kuna lug leh nolosha ardayga.

**LIFAAQA DAMBE A**